

Hagaha Tababarka Nabadeynta itoobiya



Araar (Fariinta Qoraaga)

Hagaha tababarka nabadeynta itoobiya waxaa laga soo qaatay oo laga soo cusboneysiyey daabacada macadka caalamiga ah ee UNESCO, qaybta kobcinta awooda Afrika (IICBA) 2017 ee waxbarashada isbedelka leh ee nabadeynta: Hagahan oo loogu talagalay barayaasha xaalada itoobiya taaso qayb ka ahayd mashruuca **“taakuleynta maamul loodhan yahay iyo maareynta khilaafaadka”**, Mashruuc isbahaysi ah oo u dhexeeya Barnaamijka horumarinta ee hayada Qaramada midoobay (UNDP), Ururka caalamiga ah ee socdaalada (IOM), iyo Barnaamijka Haweenka ee hayada Qaramada midoobay, taas oo ay taagertay Sanduuqa dhismaha nabada ee hayada Qaramada midoobay (Mashruuca PBF).

Hagaha 2017 waxaa loogu talagalay in tababar lagu siiyo barayaal ka badan 6500 oo kakala socda dadalka Eritriya, Itoobiya, Kenya, Soomaaliya, Koonfurta sudaan iyo Uganda taasoo qayb ka ahayd mashruuca UNESCO IICBA's ee **“Horumarinta & tababarka Barayaasha ee nabadeynta geeska Afrika iyo dalalka ku xeeran”** oo ay dawlada Japan ay tageeraysay. Itoobiya dhexdeeda waxaa loo isticmaali jiray in tababar lagu siiyo barayaasha Macalimiinta kuwaas oo ka socda 31 kamid ah kuliyaadaha waxbarashada barayaasha. Waxaa la ogaaday waxtarka ay leedahay in dib loo eego islamarkaana dib loo cusbonaysiiyo iyo in xaalada Itoobiya lagu saleeyo iyo in loo turjumo luuqadaha deegaanada Itoobiya.

Halka Hagaha 2017 loogu talagalay kobcinta aqoonta barayaasha, Qaybtan lasoo qaatay ee la cusbooneysiiyey waxaa la balaadhiyey ka faa'idaysteyaasha si loogu dhiso Awooda bahwadaagta kala duwan ee Itoobiya dhexdeeda si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah islamarkaana awood u leh sababta iyo Qaabka ay kuwa kale nabadeynta u barilahaayeen. Waxa uu soo bandhigayaa falanqaynta khilaafaadka itoobiya dhexdeeda kajira, waxa uu baaritaan ku sameynayaa doorka anashaxa iyo haweenku ay ku leeyihiin nabada iyo amniga, waxa uu baaritaan ku sameynayaa fikirka ah waxbarashada waxtarka leh ee nabadeynta iyo sidoo kale bixinta agab wax ku ool ah si loogu qiimeeyo fahanka farsamooyinka iyo xirfadaha nabadeynta. Waxaana uu soo gunaanadayaa dhawr hawlood oo ka qaybgal leh, taasoo fasalka dhexdiisa iyo banaankiisaba la isticmaali karo si loo dhiso kartida nabadeynta iyo fikradaha xaasaasiga ah iyo hal-abuurka ee ka qaybgalayaasha da'day doonaanba ha noqdaane.

Hiigsiga hagaha tababarku waa in uu noqdaa qofka isticmaalaya qof leh anshaxa, aqoonta, xirfada iyo ka go'naanshaha taakuleynta kuwa kale dhinaca dhisida Karti dhamaystiran ayagoo ah Nabad dhiseyaal.

Mahadnaq

Hagahan waxaa cusbooneysiisay oo soo qaatay **Dr. Tigist Yeshiwas Engdaw** oo ah Caawiye professor dhanka daraasadka nabada & khilaafaadka, Maareyaha cilmi-baadhista bamaamijyada tacliinta ee **Global Goodwill, Safiirka Xuquuqda Aadanaha ee Macadka Daraasadka amniga & xasiloona (IPSS), Jamacada Addis Ababa**, waxaana habeyay **Ms. Beth Roseman**, la taliyaha UNESCO IICBA, kaasoo sidookale bixiyey aragti iyo caawimaad xirfadeed. Waxaa hagahan la sameeyay ayadoo Jihayn guud uu siinayo **Dr. Yumiko Yokozeki**, Agaasimaha UNESCO, qaybta IICBA. Waxaa mudan in loo mahadnaqo **Ms. Eyerusalem Azmeraw**, Sargaalka UNESCO, u qaabilsan mashruuca IICBA, iyo asxaabta kale ay wada shaqeeyaan ee UNESCO IICBA kuwaas oo taagero ka geystay hawsha Diyaarinta.

UNESCO IICBA waxay u mahadnaqaysaa UNDP, IOM, UN Women, Wasaarada waxbarashada ee Itoobiya iyo xafiiska waxbarashada ee dawlad deegaanada Oromiya, Soomaalida iyo Shucuubta konfureed Talobixinta ay ka bixiyeen iyo darsaas ay sameeyeen awgeed.

Tusmada Buugga

Mahadnaq.....	3
Tusmada Hagaha Tababarka	4
Macnaha Erayada	7
Hordhac	12
Tilmaamaha isticmaalka Hagaha tababarka.....	15
CUTUBKA 1AAD: FAHANKA KHILAAFKA.....	17
1.1 fahanka khilaafka	17
1.2 Xaalada khilaafaadka	17
1.3 Falanqaynta khilaafaadka	17
1.4 Khariiradeynta Khilaafaadka	18
1.5 Qalalaase toos ah, Mid qaab-dhismeed leh iyo mid dhaqameed ah.....	20
1.6 Isbed-bedelka Khilaafaadka.....	22
1.7 Hababka xallinta khilaafaadka	25
1.8 Dooraka ka hortagga iyo Xallinta khilaafaadka	26
CUTUBKA 2AAD: NABAD-DHISKA.....	30
2.1 Isku xidhka dhisidda nabadda iyo waxbarashada nabada	30
2.2 Mabaadi'da iyo qaab-dhismeedka nabadda	30
2.3 Dhisidda dhaqan nabadeed	31
2.4 Asalka, kala duwanaanshaha iyo nabad dhiska	33
CUTUBKA 3AAD: DHIRIGELINTA KA FIIRSASHADA ANSHAXA.....	37
3.1 Waxbarashada Nabadda iyo anshaxa	37
3.2 Waxbarashada Nabadda Iyo Habka Ku Saleysan Xuquuqda Aadanaha	38
3.3 Istimalka waxbarashada nabadda si loo dhiirrigeliyo Falcelinta anshaxa	40
CUTUBKA 4AAD: DHISIDA KARTIDA SHAQSIYAADKA NABADEYNTA KU HAWLAN	41
4.1 Ka Warhaynta Nafta	41
4.2 xirfadaha xidhiidhka dadka.....	42
4.3 Xirfadaha Dhageysiga.....	43

4.4 Xirfadaha xidhidhka dhaqamada ee Itoobiya.....	44
4.5 Waxyaabaha Dabiciiga ah oo Qaybta iyo Astaanta Nabad-Dhiska ah	45
4.6 Xirfadaha fikirka xasaasiga ah	46
4.7 Xirfadaha dhexdhexaadinta	49
4.8 Xirfadaha Waan Waanta	49
4.9 Ka jawaabcelinta & u nuglaanta kala duwananta: U Furfurnaanta dadka kale...50	
4.10 Kordhinta qiyamka dhismaha nabadda.....	51
4.11 Iskaashi iyo wada shaqeyn	53
CUTUBKA 5AAD: DUMARKA, NABADA IYO AMNIGA.....	55
5.1 Hordhaca jinsiga.....	55
5.2 Ka Qayb-galka Haweenka	56
5.3 Haweenka, nabadda iyo amniga.....	60
5.4: Haweenka iyo carruurta barakacayaasha ah	66
CUTUBKA 6AAD: MUHIIMADA HABKA BARIS-BARASHO EE ISBEDDEL KEENITAANKA.....	63
6.1 Hordhac waxbarida isbadalka	68
6.2 Xalaada guud ee xasaasiga ah iyo ka jawaab celinteeda	68
6.3 Meelo waxbarasho oo aamin ah	69
6.4 Nidaam waxbarasho oo lagu xaqiijinayo kaqeybgalka iyo iskaashiga	71
6.5 ku dayasho	75
6.6 Hanaanka Dugsiga guud.....	76
CUTUBKA 7AAD: GO'AAN QAADASHO.....	72
7.1 Noqoshada wakiillada isbeddelka.....	78
7.1 Qaab-dhismeedka HOPE.....	79
7.2 Darajooyinka kaqeyb-galka.....	80
7.3 Tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu hagayo barayaasha sidi ay u taageeri lahaayeen mashaariicda ay hoggaaminayaan bartayaashu	82
7.4 Ka qeyb qaadashada dhalinyarada ee dhanka nabadeynta	83
7.5 U-doodista iyada oo loo marayo dabaaldeg iyo bandhigyo.....	84
7.6 Wacyigalinta la xidhiidha Xafladaha & Carwooyinka	78
7.7 Ganacsi bulsheed oo ay hogaamiso dhalinyaro	85

CUTUBKA 8AAD: QIIMEYNTA AQOONTA IYO XIRFADAHA LA XIDHIIDHA DHISMAHA NABADA__	79
8.1 Qiimeynta sababta loogu baahday maxay tahay?	86
8.2 dhinacyada barashada nabad dhiska	86
8.3 waxtarka Qiimeynta.....	87
8.4 Goormaa la qabanayaa Qiimaynta	88
8.5 Aaladaha Qiimaynta Aqoonta & Xirfadaha Dhismaha Nabadda.....	89
CUTUBKA 9AAD: HAWL-GALO	972
Tixraac	140

Macnaha Erayada

Khilaaf	Khilaafku waa iswaafaq la'aanta hab-dhaqanka iyo Hiigsiga ee xidhiidhka u dhexeeya laba dhinac ama in ka badan (Shaqsiyaad ama Kooxo). Waa geedi socod firfircoon oo marxalada lagu jiro, Aragtidu, dabeecada iyo qaab-dhismeedka ay hadd iyo jeer isbeddelaan oo midba midka kale saameyn ku yeeshaan (Galtung, 1969).
Falanqaynta Khilaafaadka	Falanqaynta Khilaafku waa hawl lagu aqoonsanayo, jajabinayo oo lagu kala soocayo Kooxaha iskhilaafsan, sababaha asalka ah ee keenay isku dhaca, marxalada lagu jiro, firfircoonida, Arrimaha jira, xidhiidhka Awoodeed, dhacdooyinka iyo Qaab-dhismeedka (UNESCO IICBA, 2017).
Maareynta Khilaafaadka	“Dadaallada faragelinta ah ee looga hortagayo korodhka iyo saameynta xun, gaar ahaan kuwa rabshadaha wata, ee isku dhacyada socda... “Waa inaan loo arkin inay yihiin qaab fudud, toosan ama qaabaysan.” (Miller, 2005, p. 23).
Ka hortagga Khilaafaadka	“Filashada isku dhaca ee looga dan-leyahay in lagu saxo cabashooyinka sababa si looga fogaado sii kordhinta isku dhacyada rabshadaha wata ama in la yareeyo dib u soo noqoshada isweydaarsiga rabshadaha ama qaar ka mid ah wadarta waxyaabahan sababa. Ereyga ‘ka hortagga khilaafaadka’ wuxuu noqon karaa mid marin habaabin ah, maxaa yeelay aragti ahaan midkoodna dhinacyada aan soo sheegnay midna kuma haminayo inuu ‘ka hortago’ isku dhaca sidaa oo kale. Taas bedelkeeda, ujeedku badanaa waa in lagu xalliyo isku dhac hadda socda ama si caadi ah looga hortago korodhka ama muujinta rabshadaha ”(Miller, 2005, p. 24).
Xallinta Khilaafaadka	Wajiyo kala duwan oo loogu talagalay in lagu xaliyo khilaafaadka iyadoo loo marayo xalinta waxtarka leh ee dhibaatooyinka si ka duwan maaraynta ama isbadalka isku dhaca. Xallinta khilaafaadka waa mid wajiyo badan leh iyadoo loola jeedo geeddi-socod, natiijo, iyo xirfad tacliimeed ah oo la aqoonsan yahay iyo sidoo kale waxqabad ay dadka iyo

bulshooyinku maalin kasta ku hawlan yihiin iyagoo aan weligood isticmaalin ereyga ”(Miller, 2005, p. 25).

Isbeddelka Khilaafaadka

“Isbedelada dhammaantood, mid kasta, ama xoogaa isku dhafan ee arrimaha soo socda ee ku saabsan isku dhaca: xaaladda guud ama qaabeynta xaaladda, dhinacyada is haya, arrimaha la isku hayo, geeddi-socodka ama habraacyada lagu xakamaynayo dhibaataada, ama qaababka saameynaya mid ka mid ah wax yaabaha kor ku xusan...waxay u baahan tahay in dhinacyada ay khusayso wax ka beddelaan istiraatiijiyaddoodii hore ee ku saabsanayd maaraynta ama ka fogaanshaha khilaafaadka si loo hirgeliyo habab cusub oo lagu hagaajinayo xaaladda ” (Miller, 2005, p. 26-27).

Khariiradeynta Khilaafaadka

Khariidaynta isku dhaca ayaa ah farsamo matalaysa isku dhaca qaab fikir ahaan ama garaaf ahaan ah, iyadoo la dhigayo dhinacyada is haya ee la xidhiidha dhibaataada iyo xidhiidhka midba midka kale la lehayay. (UNESCO IICBA, 2017).

Waxbarasho waxtar leh

Nidaamkani wuxuu qabaa in waxbarashadu ay dhacdo marka la xaqiijo ka-qaybgalka firfircoon ee ardayda. Halkii ay si aan firfircoonayn u heli lahaayeen macluumaadka, bartayaashu waxay kaloo sameeyaan macno waxayna dhisaan aqoonta . (UNESCO IICBA, 2017).

Dhaqanka Nabadda

Dhaqanka nabadda “... wuxuu ka kooban yahay Mabaadi'da, Aragtiyada iyo dabeecadaha ka tarjumaya isla markaana dhiirrigelinaya isdhexgalka bulshada iyo wadaaga ku saleysan mabaadi'da xorriyadda, caddaaladda iyo dimuqraadiyadda, dhammaan xuquuqda aadanaha, dulqaadka, iyo midnimada, ee diida rabshadaha isla markaana iskudaya in laga hortago isku dhacyada asago wax ka qabanaya sababaha aasaasiga ah si loogu xaliyo dhibaatooyinka wada xaajoodka wadhadalka taas oo dammaanad qaadaysa ku dhaqanka buuxda ee dhammaan xuquuqda iyo qaababka looga qayb qaadan karo geedi socodka horumarka bulshadooda” (United Nations General Assembly, 1998, p. 1)

Anshax

Anshaxu waa laan kamida cimiga falsafada. Waa barashada Mabaadi'da iyo caadooyinka qof ama koox waxayna koobsanaysaa falanqaynta iyo hawlgelinta fikradaha sida saxda iyo khaladka, wanaagga iyo xumaanta, iyo mas'uuliyadda. Anshaxu waa aaminaad, fikrado, aragtiyo iyo falcelin aasaasi ah oo ku saabsan su'aalaha lama huraanka ah, kuwaas oo fududeeya dejinta heerarka. (Arigatou International, 2008).

Jinsiga

Jinsiga waxaa loola jeedaa doorarka iyo masuuliyadaha ragga iyo dumarka ee laga dhex abuuray qoysaskeena, bulshooyinkeena iyo dhaqamadeena. Fikradda jinsiga sidoo kale waxaa ka mid ah rajooyinka laga qabo astaamaha, fikradaha iyo dabeecadaha suuragalka ah ee dumarka iyo ragga labadaba (dheddig iyo lab). (UNESCO, 2003).

Ka Qaybgelinta Haweenka

"waa istiraatiijiyad caalami ah oo la aqbalay oo lagu gaadho sinnaanta jinsiga iyo awoodsiinta haweenka" (Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Qaramada Midoobay, 2010, p. 1). UN Women (2019) waxay ku sifeeyneysaa inay tahay "habab gaar ah, habab istiraatiiji ah iyo sidoo kale farsamooyin iyo habab hay'adeed oo la qaatay si loo gaadho himiladaas [sinnaanta jinsiga waxay ujeedadeedu tahay in beddesho hay'adaha bulshada, sharciyada, caadooyinka dhaqanka iyo hab-dhaqanka bulshada ee takoorka ah, sida kuwa xaddidaya helitaanka haweenka ee xuquuqda hantida ama xaddidaya marinka ay u leeyihiin barxadda bulshada ”.

Nidaamka Xuquuqda aadanaha

Habka xuquuqda aadanaha ku saleysan waa qaab fikradeed oo caadi ah kuna saleysan heerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Waxay dhiirrigelisaa oo ay ilaalisaa xuquuqda waxayna kobcisaa horumarka aadanaha (OHCHR, 2017). Ujeedada habka xuquuqul insaanka ku saleysan ee waxbarashada ayaa ah in la hubiyo in ilmo walba uu helo waxbarasho tayo leh oo ixtiraamaysa isla markaana kor u qaadeysa xuquuqdiisa sharaftiisa iyo horumarkiisa wanaagsan (UNESCO / UNICEF, 2007). Xuquuqda Waxbarshada waxaa si rasmi ah loogu aqoonsaday inay tahay xuquuqda aadanaha tan iyo markii la qaatay Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda

Aadanaha sanadkii 1948. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta (1989) wuxuu sii xoojinayaa oo ballaadhinayaa fikradda xuquuqda waxbarashada.

Isdhexgalka dhaqamada

Dhaqan-isweydaarsigu waxaa loola jeedaa xidhiidhka sii kordhaya ee u dhexeeya kooxaha dhaqanka. UNESCO (2006) waxay ku qeexday 'jiritaanka iyo isdhexgalka sinnaanta dhaqamada kala duwan iyo suurta galnimada abuurista muujinta dhaqanka ee wadaaga wadahadal iyo is ixtiraam' (p 17).

Dhaqamada badan

Ereyga dhaqamada badan wuxuu qeexayaa dhaqamada kala duwan ee bulshada aadanaha. Ma aha oo kaliya tilmaamaha Qowmiyada ama dhaqan qaran, laakiin sidoo kale waxaa ku jira kala duwanaanshaha luuqadaha, diimaha iyo dhaqan-dhaqaale (UNESCO IICBA, 2017).

Nabadeynta

Nabadeynta waxaa lagu qeexaa ku dhaqanka iyo nidaamka dhisida ama dib u dhiska cilaaqaadyo cusub ama bedelida kuwii hore. Nidaamka dhismaha ama dib u dhiska wuxuu ka hadlayaa arrimaha caddaaladda iyo xuquuqda aadanaha, iyo kuwo kale. (UNESCO IICBA, 2017).

Waxbarashada Nabadda

Waxbarashada nabada ayaa ah geedi socodka iyo waxqabadka lagu horumarinayo xirfadaha aan rabshadaha lahayn iyo kor u qaadida afkaarta nabada iyo barashada tilmaamaanta caqabadaha inaga hortaagan kahelitaanka nabada. (UNESCO IICBA, 2017).

Dib u heshisiin

“Nidaam iskudayaya inuu u beddelo xumaan ba'an ama raagtay oo ka dhex jirtay dhinacyadii horay u dhex maray khilaaf ama muran una beddelo dareemo aqbalaad iyo cafiska cadaawadihii ama falalkii xumaa ee hore” (Miller, 2003, p. 66).

Cadaalada dib u dhiska

Beddelka ciqaabta oo diiradda saaraya hagaajinta waxyeelada dhacay, bogsiinta dhaawaca soo gaadhay dhibbanaha, buuxinta baahiyaha dhibbanaha, iyo in dambiilaha loo qabsado ficilkiisa. Waa hab miisaaman oo diirada lagu saaray inta badan soo celinta xiriirkii ka dhaxeeyay cadaawgii hore iyo casharadii

laga bartay khaladaadkii hore. Way ka duwan tahay caddaaladda abaalmarinta; caddaaladda dib u soo celinta ayaa diiradda saareysa dhisidda iyo beddelka xiriirka halka caddaaladda aargudashada ay xoogga saareyso dembiga iyo ciqaabta (UNESCO IICBA, 2017).

Waxbarasho Isbedel leh

Habka waxbarasho ee isbedelka leh ayaa ah hab waxbarasho oo cusub oo awood u siisa ardayda inay si heer sare u baaraan duruufaha, aaminsanaanta, Mabadi'dooda, aqoontooda iyo afkaartooda iyadoo ujeeddada laga leeyahay ay tahay in la horumariyo is-Falcelinta, qaddarinta kala duwanaanta iyo fikirka muhiimka ah. waxbarasho wax tar leh ayaa la gadhaa markay waxbarashadu dhaafto maskaxda oo ay isku xidho quluubta iyo ficilada, isbedelka aqoonta, afkaarta iyo xirfadaha.(UNESCO IICBA, 2017).

Nidaamka Dugsiga oodhan

Nidaamka dugsiga dhamaantii wuxuu wax ka qabtaa baahiyaha ardayda, shaqaalaha iyo bulsho-weynta, kaliya maaha manhajka, laakiin guud ahaan dugsiga iyo jawiga waxbarasho ayay ka caawinaysaa sidii ficil wadareed iyo iskaashi ka socda dhanka dugsiga bulshada si loo wanaajiyo barashada ardayda, dhaqanka, fayoaqabka, iyo xaaladaha taageera. (UNESCO IICBA, 2017).

Qalalaasaha

Asal ahaan, "xagjirnimada" waxaa loola jeedaa "aaminaada iyo taageerida fikradaha aadka uga fog waxay dadka intooda badani u arkaan inay sax yihiin- ama macquul yihiin" sidaas awgeed waxaa loola jeedaa afkaarta ama dabeecadaha loo arko inay ka baxsan yihiin dhaqanka caadiga ah. Fahamkan ereybixintan aasaasiga ahi waxay tilmaamaysaa dabeecadda asalka ahaaneed ee ereyga, kaas oo qaadan kara macnayaal kala duwan iyadoo kuxiran qofka qeexaya nidaamka iyo go'aaminta waxa la aqbali karo ama aan ku habboonayn (waxaa laga soo qaatay UNESCO, 2017).

Hordhac

Barashada habka wada noolaanshaha ee Xaalada Itoobiya

In kasta oo isbedel la taaban karo ay gaadhay laga soo bilaabo 2018, haddana Itoobiya waxay umuudqataa inay ku jirto isbedbedel xaaladeed; waxaana kajira khilaafaadyo kaasoo qalalaase wata oo ay sababaan arrimo kaladuwan oo cakiran oo caqabado ah kuwaas oo laga helo dhammaan qaybaha dalka.

Qaar waxay ka dhashaan dhaqaale yari, dhul beereed/daaqsimeed aan la isticmaalin iyo biyo la'aan, halka arrimaha kale ay laxidhiidhaan dareen shisheeye iyo cabashooyin aan laga jawaabin wakhtiga ku haboon. Rabshaddu waxay dhici kartaa iyadoo loo aaneynayo fikradaha ku saleysan takoorka, awood ka xayuubin iyo ka reebitaanka qowmiyadeed. Waxay sidoo kale ka dhalan kartaa falalka xagjirnimada rabshadaha wata ee ka dhasha qowmiyadaha iyo xiisadaha wadaninimo la'aanta meel dhexe ama isu tanaasulka asalka kala duwanaanta. Intaas waxaa sii dheer, arrimaha dhaqaalaha, bulshada, siyaasadda iyo warbaahinta bulshada (teknolojiyadda) ayaa door ka ciyaara kicinta rabshadaha. Mid ka mid ah cawaaqibka muuqda ee rabshadaha noocaas ah ka dhasha ee Itoobiya kajira waa saboolnimada.

Si ay uga badbaadaan saboolnimada, rabshadaha iyo cadaadiska, Itoobiyaanku way soo haajireen, qaxeen oo ka gudbeen xuduudaha si ay u codsadaan qaxooti ahaan ama ay gudaha ugu barakaceen dalkooda; Dadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs) waxay ku sugan yihiin meel kasta oo ka mid ah Itoobiya laakiin inta badan waxay ku urursan yihiin afar gobol, oo kala ah SNNPR, Oromia, Amhara iyo Somali. Sida taariikhda siyaasadeed ee Itoobiya ay muujineyso, qanac la'aanta, caddaalad darrada iyo rabitaanka awoodda ayaa sidoo kale dhalin karta isku dhac iyo rabshado ka dhaca gudaha iyo gobollada dhexdooda. Colaadaha ka jira gobollada inta badan waa kuwo waara oo soo noqnoqda.

Habka ugu wanaagsan ee looga bixi karo khilaafka joogtada ah, waa in dadku ay bartaan inay wada noolaadaan oo ay ixtiraamaan kala duwanaanshaha iyada oo kor loo qaadayo qadarinta kala duwanaanta. Halkan ayaa looga baahan yahay waxbarasho loogu talagalay nabadeynta. Waxay bixisaa beddel waara oo ka sarreeya khilaafaadka. Iyada oo loo marayo waxbarashada nabad dhiska (nabadeynta), waxaan baranaynaa xeeladaha iska-warqabida, wada xidhiidh, sinnaanta jinsiga, tixgelinta xuquuqda aadanaha, wadahadal yeelasho, isdhageysi, dhexdhexaadin iyo wada xaajood. Kuwani waa qaybaha aasaasiga u ah wada noolaanshaha Itoobiya.

Doorka waxbarashada nabaddu ay ku leedahay nabadeynta

Waxbarashada nabaddu waa nidaamka iyo hab-dhaqanka lagu horumariyo aqoonta iyo xirfadaha aan rabshadaha lahayn iyo kor u qaadida aragtiyada nabadeed iyo fahamka caqabadaha inaga hortaagan gaadhitaanka nabadda. Waa qeyb udub dhexaad u ah dhisidda nabadda. Intaas waxaa sii dheer, sida laga soo xigtay Fountain (1999) waxbarashada nabada ayaa loola jeedaa

Nidaamka kor loogu qaadayo aqoonta, xirfadaha, aragtida iyo Mabda'a loo baahan yahay si loo helo isbeddelo hab-dhaqan ah oo carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn u oggolaan doona ka-hortagga isku dhaca iyo rabshadaha, labadaba iska horimaadka qarsoon iyo qaab dhismeedka labadaba si nabad ah; iyo in la abuurto xaalado ku habboon nabadda, ha ahaato xiriirka nafta, is dhexgalka, is dhexgalka kooxaha, heer qaran ama heer caalami (p.1).

Si looga qeyb qaato waxbarashada isbedelka ee nabadeynta, doorka barayaasha waa in dib loo qeexaa. Barayaashu waxay ubaahanyihiin anshaxa, aqoonta, xirfadaha iyo u heelanaanta lagama maarmaanka u ah fikirka xasaasiga iyo hal abuurka ah ee ardayda. Barayaashu waa inay ixtiraamaan asalka shaqsiyaadka kala duwan - qowmiyada, diinta, jinsiga iyo dabaqada bulshada – waa inay fahmaan saameynta asalkoodu iyo asalka ardayda ku leyihiin dhaqamada iyo isdhexgalka.

Hagahani waxaa loogu talagalay inuu gacan ka geysto geeddi-socodka dhismaha xidhiidh wanaagsan oo heer deegaan iyo heer qaran ah iyadoo loo marayo barista nabad-dhisidda (nabadeynta) Itoobiya. Tan waxaa lagu samayn karaa:

Dhiirrigelinta wadhadalka u dhexeeya iyo ka dhexeeya kooxaha bulshada ee kala duwan; dhiirrigelinta xakamaynta ikhtiyaariga ah ee isticmaalka xoogga; kor u qaadista wacyiga si loo xalliyo khilaafaadka iyada oo aan loo adeegsan gacan ka hadal; iyo horumarinta xirfadaha fikirka xasaasiga ah ee dhalinyarada;

- dhiirrigelinta dabaaldega kala duwanaanta, wada noolaanshaha nabadeed iyo isbedelka bulshada.

Nabadda looma qeexin oo keliya dagaal la'aan ama amni daro ah. Taa badalkeed, waa jiritaanka geeddi-socodka iyo xaaladaha ay u badan tahay inay dhaliyaan nabad waarta, caddaalad iyo nolol wanaagsan. Waxay tusinaysaa xaalad ladnaan, iyo geeddi-socod bulsho oo firfircoon oo caddaaladda, sinnaanta iyo ixtiraamka xuquuqda aadanaha ee asaasiga ah, halka xadgudubka (shucuurta, jidheed, maskaxeed iyo Qaab-dhismeed) la yareynayo.

Nabaddu waa xaalad maskaxeed oo dadku ay qanacsan yihiin oo kalsooni iyo rajo ay jirto. Waa Mabda'a aadanaha oo ka tarjumaya xaaladaha halkaa oo ixtiraamka xuquuqda aadanaha, caddaaladda iyo sinnaanta lagu sugay, halka ay ka jiraan kala duwanaanta, iyo khilaafaadka lagu xalliyo qaabab aan rabshad lahayn iyo mid dimuqraadiyadeed.

Waxaa jira lix qodob oo lagu qeexayo fikirka nabada: (1) Nabada oo ah dagaal la'aan (nabad liidata); (2) Nabadda oo ah isku-dheelitirka xoogagga nidaamka caalamiga ah; (3) Nabadda oo ah nabad wanaagsan (ma jiro rabshad Qaab-dhismeed); (4) Nabadda haweenka, heerarka waaweyn iyo kuwa yaryar, ee u dhexeeya jinsiga; (5) nabad dhamayestiran (Gaia), nabadda dabiiciga iyo deegaan; iyo (6) Nabadda dhamaystiran ee gudaha iyo dibaddaba shaqsiyaadka. Haddii aan ka reebno mid ka mid ah arimahan, qiimaha nabadda ayaa halis geli. Sidaa darteed, geeddi-socodka dhisidda nabadda ee waara wuxuu noqon karaa mid aad u caqabado badan oo dhibaato leh.

Waxbarashada nabadda ayaa ku saabsan ka shaqeynta qaabka ay u fikiraan, maskaxda iyo dabeecadda shaqsiyaadka si loo abuuro meel wanaagsan oo lagu noolaado. Waxbarashada nabada ayaa ah mid waaxo badan laga so curiyey oo isla markaana ka kooban dadaallo waxbarasho oo is-dhamaystiraya sida hub ka dhigista, xuquuqul insaanka, qorshayaasha horumarineed, muwaadinimada, wacyigelinta jinsiga, Cilmiga bulshada iyo anshaxa, sharciga caalamiga iyo tixgelinta deegaanka.

Tilmaamaha isticmaalka Hagaha tababarka

Tilmaamaha hagahani ee dib loo cusboonaysiiyey waxaa laga soo qaatay Mac'hadka caalamiga ah ee UNESCO ee kobcinta awooda Afrika, daabacaada 2017 ee ahaa Habka waxbarasho ee wax ku oolka ah (isbedelka leh) : Waa Hage loogu tala galay qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay kamid yihiin kuwo ku jira nidaamka waxbarashada iyo kuwo ka baxsan. Waxaa loogu talagalay sida hoos ku xusan:

- Qalab wax ku ool ah oo loogu tala galay tababarida iyo cusboneysiinta aqoonta iyo xirfadaha baahwadaagta kala duwan dhanka nabadeynta dalka Itoobiya dhexdeeda.
- Raadraac ugu noqdo kuwa nidaamka waxbarashada ku jira kana caawiyo sidi ay u dhigi lahaayeen iyo sidi ay ugu dari lahaayeen fikradahan nabadeynta Maadooyinka dugsiiga.
- Raadraac ugu noqoto kuwa ka baxsan nidaamka waxbarashada sidii ay ugu dhiirigelin lahaayeen afkaarta nabadeynta qoysaska, bulshooyiinka, dugsiyada, mac'hadka, barnaamijyada iyo Xeerarka.
- Khayraad ka kooban hawlo ka qaybgal leh taaso fasalka dhexdiis iyo banaankiisaba ay ku isticmaali karaan kasoo qaybgaleyaashu da'day doonaan hanodhaane si loo dhiso kartida nabadeynta iyo fikirka curinta xalka hawlaha taagan ee xasaasiga ah.

Dadka loogu tala-galay

Tilmaamaha hagahani ee dib loo cusbooneysiyyay waxaa loogu tala galay sidii sare loogu qaadi lahaa xaalada nabadeynta Itoobiya iyadoo lagu saleynayo dhamaan baahwadaagta xiiseynaysa inay wax ka bartaan, si fiicana u fahmaan iyo inay kor u qaadaan nabadda iyo waxbarashada nabada. Halka hagahii 2017 u bartilmaamedsaneyey barayaasha, tababarkan, kasakow barayaasha waxaa sidoo kale lagu tala galay in lagaadhsiiyo qaybaha kaladuwan sida hogaamiyeyaasha bulshada, hogaamiye dhaqameedka iyo culimada diinta iyo masuuliyiinta dawlada.

Sida loo isticmaalo Hagaha tababarka

Bilowga ilaa dhamaadka hagaha , “Ereyga” barre” waxaa loola jeeda akhristaha, kuwa nidaamka waxbarasho ku jira iyo kuwa ka baxsanba. In kasta oo aanu qof kastaa isu tixgelin karin inuu yahay bare, haddana marka dib loo eego hagahan tababarka, Qofka adeegsanay ayaa yeelan doona aqoon, xirfado iyo farsamooyin uu dadka kale ku baro dhismaha nabadda ee Itoobiya.

In kasta oo aan dhiirigalineyno dib u eegista dhammaan cutubyada kujira tilmaamahan tababarka, waxaa jira cutubyo gaar ah oo ku wajahan kuwa ku jira nidaamka waxbarashada, kuwaas oo kala ah cutubyada 6 ee waxbarashada isbeddelka leh iyo cutubka 8 ee qiimeynta. Cutubka 1aad wuxuu bixiyaa fahamka isku dhaca, laga soo bilaabo falanqaynta ilaa

khariiradeynta illaa firfircoonidiisa iyo qaababka loo maareeyo. Cutubka 2aad waa dulmar guud oo ku saabsan dhisidda nabadda, cutubka 3aad wuxuu ka hadlayaa anshaxa iyo sida loo dhiirigaliyo Falcelinta anshaxa. Cutubka 4aad wuxuu qeexayaa kartida (aqoonta) looga baahan yahay dhismaha nabadda. Cutubka 5aad waa qayb cusub oo lagu soo kordhiyey hagahan tababarka ee la cusbooneysiiday ee haweenka, nabadda iyo amniga. Wuxuu sharaxaad kabixinayaa fikradaha la xiriira jinsiga iyo muhiimadda ay leedahay ka-qaybgalka haweenka ee arrimaha nabadda iyo amniga, sidoo kale waxaa ku jira qayb ka mid ah dhalinyarada, barakacayaasha iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee loogu talagalay aragtida cusub iyo horumarka cusub ee siyaasadeed ee muhiimka ah ee Itoobiya. Cutubka 6aad wuxuu soo bandhigayaa astaamaha muhiimka ah ee barbaarinta waxbarashada, halka cutubka 7aad uu qeexayo talaabooyin wax ku ool ah oo lagu hagayo barayaasha taageerida ardayda si ay ugu fidiyaan xirfadahaaga nabadeynta wixii dhaafsan fasalka / tababbarka sida bulshada deegaankooda iyo wixii ka baxsan. Cutubka 8aad wuxuu yahay hage aasaasi ah oo loo isticmaalayo qiimeynta barashada, iyadoo lagu soo bandhigayo farsamooyin kala duwan oo qiimeyn ah oo loo adeegsado barashada ka hor iyo ka dib. Cutubka 9aad wuxuu soo bandhigayaa hawlgalo kala duwan oo lagu horumarinayo kartida dhisidda nabadda iyo fikirka hal-abuurka leh iyo xasaasiga ah ee ka-qaybgalayaasha da 'kasta ha ahaadeen gudaha iyo dibedda fasalka.

Cutubka 1: Fahanka khilaafka

1.1 fahanka khilaafka

Khilaafku waa iswafaq la'aan dhab ah oo dhinaca dhaqanka iyo hadafka la xidhiidha islamarkaana u dhexaysa laba dhinac ama in ka badan (Shaqsiyaad ama Kooxo). Waa geedi socod firfircoon oo marxalada lagu jiro, aragtida dabeecada iyo qaab-dhismeedka ay had iyo jeer isbeddelaan oo midba midka kale saameyn ku yeeshaan.

1.2 Xaalada khilaafaadka

Itoobiya dal ahaan waxaa lasoo darsay xasilooni daro asal ahaan kaladuwan. Tan waxaa u sabab ah xasillooni-darro bulsho-siyaasadeed, isku dhac gacan ka hadal ah, la'aanta hay'ado adag iyo sinnaan la'aan sii kordheysa oo ay uga sii darayaan arrimo kakan, sida musuq maasuqa, isbeddelka cimilada iyo khilaafaadka la xidhiidha kheyraadka. Badanaa, kooxaha qowmiyaduhu waxay ku nool yihiin gobollo madax-bannaan oo kala duwan oo Dalka ah. Colaadaha la xidhiidha qowmiyadaha ama ay sababeen qowmiyaduhu ayaa noqda dhacdooyin la caadaysto. Khilaafaadka la xidhiidha isku dhaca u dhexeeya qowmiyadaha ayaa sii kordhaya sannadihii la soo dhaafay. Inta badan xuduudaha gobolada Itoobiya si muuqata looma calaamadeyn. Dad badan ayaa ka tallaaba xuduudaha si ay uga cararaan cadaadis (qaxooti), iyagoo raadsanaya nolol fiican tani waa xaalada dadka reer guuraaga ah iyo kuwa xoola dhaqatada ah. Si kastaba ha noqotee, waxaa sidookale jira ganacsiyo sharci darro ah ee hubka fudud, kasoo laga soo geliyo meelo ka mida ah dalka Itoobiya. Hubka fudfudud iyo tahriibka dadka, marka lagu daro dambiyada caalamiga ah ee abaabulan, oo ay kujiraan afduubka caruurta iyo qalalaasaha qowmiyadaha ee rabshadaha wata, ayaa sidoo kale sii kordhaya.

1.3 Falanqaynta khilaafaadka

Falanqaynta Khilaafaadku waa tab lagu aqoonsanayo dhinacyada iskhilaafsan islamarkaana lagu qaadaadhigayo sababaha asalka ah ee keenay isku-dhaca, iyadoo lafalanqaynayo marxalada lagu jiro, Arrimaha isku dhacyada keenay, xidhiidhka Awoodeed ee dhinacyaduu khilaafku ka dhexeeyo, dhacdooyinka iyo Qaab-dhismeedka. Sida daraadeed waxaa jira hababka loo gorfeeyo isku dhaca kaasoo loo yaqaano geed ku muujinta heerarka khilaafka. Marka heer aasaasi ah laga fiiriyo, waxay gacan ka geysaneysaa sidii loo aqoonsan lahaa arrimaha ku jira xaalad isku dhac ah ka dibna loo kala saaro saddex qaybood, oo kala ah (1) Sababaha asalka ah; (2) Dhibaatooyinka asaasiga ah; iyo (3) Saamaynta.

sawirka 1: Sawir Geed oo muujinaya heerarka khilaafku Maro



Xigasho: waxaa laga soo qaatay Fisher et al., 2000

Khilaafyo badan dhexdooda, waxaa jiri doona jawaabo iyo fikrado kaladuwan oo ku aadan su'aalahan muhiimka ah:

1. Maxay isku dhacyadan u dhacaan? Maxay yihiin sababaha keena?
2. Sidee loo soo bandhigaa isku dhacyadan? Sidey isku muujiyaan?
3. Maxay yihiin natiijooyinka ka dhalan kara khilaafaadka?
4. Maxay tahay arrinta ugu muhiimsan ee ay tahay in la xalliyo (laga hadlo)?

Sawirkan geedka ee lagu muujinayo heerarka khilaafka waxaa uu ka kooban yahay sababaha asalka khilaafka u ah, sida takoorid, xeerar aan cadaalad ku dhisnayn, saboolnimo iyo midnimo la'aanta bulshada. Dhibaatooyinka aasaasiga ah waxay noqon karaan kuwo cakiran oo laga yaabo inay ku lug yeeshaan isku dheelitirnaan la'aanta awoodda ama dhulka. Saamaynta waxaa ka mid noqon kara xadhig, aflagaado hadal, xadgudub galmo iyo jidheed, iyo dilba. Waxaa muhiim ah in la xasuusnaado in sababaha asalka (sida xididdada geedka) laga yaabo inaysan muuqan. Si kastaba ha noqotee, saameynta ama cawaaqibta ayaa had iyo jeer ah kuwa la arki karo.

1.4 Khariiradeynta Khilaafaadka

Khariiradeynta isku dhaca ayaa ah farsamo matalaysa isku dhaca qaab fikir ahaan ama garaaf ahaan ah, iyadoo lagu muujinayo dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo iyo xidhiidhka ka dhexeeya dhibaata ka dhex jirta midba midka kale la leeyahay. Khariiradeynta isku dhaca waxay isku dayaysaa inay bixiso sawir buuxa oo xaqiiqada ka turjumaya dhammaan dhinacyada iyo saamaynta xaaladda isku dhaca si loo caddeeyo xidhiidhka ka dhexeeya.


jaantuska 2 Khariiradeynta khilaaf Qoys

Khariiradeynta isku dhaca u dhexeya Qoyska

(Fisher et al, 2000, Bogga 24)

KEY:

—	Xidhiidh adag	≠	Isbahaysiga kala go'ay
≡	Khilaafka ugu weyn isku dhaca yar	≡	Isbahaysi
~		—	xidhiidh



Khariiradeynta isku dhaca waxaa loo isticmaali karaa in lagu diyaariyo tallaabo wax looga qabanayo waxayna si gaar ah waxtar u leedahay haddii la isticmaalo wakhti hore, sida xilliyada ololaha u-doodida ama bixinta digniinta. Khariiradeynta khilaafaadku ayaa faa'iido u leh

1. si loo oogaado asalka iyo ujeedadii khilaafka waa in:

- La adeegsado khariirad tilmaamaysa goobta uu khilaafku ka jiro.
- Si kooban loo qeexo goobta.
- Sharaxaad laga bixiyo tariikhda khilaafka ee goobta.

2. Si gaar ah u kala soocno dhinacyada isku dhaca iyo arrimaha ka dhexeeya.

- Kalasaar dhinacyada ugu waaweyn uu khilaafku ka dhexeeyo.
- Soo saar arrimaha la xidhiidha isku dhaca.
- Raadi xidhiidhka ka dhexeeya dhinacyada isku dhacay.
- Tilmaan fikradaha ku aadan sababaha iyo dabeecadda isku dhaca ee dhinacyada.
- Wax badan ka ogow hab-dhaqanka hadda jira ee dhinacyada isku dhacay.
- Aqoonso (sooc) hogaamiyaasha dhinacyada isku dhaca

3. Aasaasida xaalada guud ee lagu sugan yahay: qoyska, deegaanka, dalka, heer gobol iyo heer caalami.

- a. Heerka Qoyska: Sidee bay xidhiidhka ka dhexeeya xubnaha qoysku ay saameyn ugu yeeshaan isku dhaca
- b. Heer deegaan : Sideebu xidhiidhka ka dhexeeya dadka deegaanka uu saameyn ugu yeeshaa iska-horimaadka?
- c. Heerka waddanka: Ma sida dawladu ay tahay ayaa la diidan yahay ?
- d. Heer Gobol: Sidee ayu xidhiidhka dalalka deriska ah ay saameyn ugu yeeshaaan khilaafka?
- e. Heer caalami: Ma jiraan dano juqraafi siyaasadeed oo ka baxsan dalka oo khilaafka ku jira? Maxay yihiin arrimaha dibadeed ee hurinaya isku dhaca iyo maxaa badali kara.


1.5 Qalalaase toos ah, Mid qaab-dhismeed leh iyo mid dhaqameed ah

Ereyga "Qalalaase (Rabshad)" waxaa loo adeegsadaa marar badan si ay ereyga gardarrada isku mid yihiin. In kasta oo gardaro iyo Qalalaase u muuqdaan kuwo isu dhigma, haddana waxaa jira heshiis guud oo ku saabsan farqiga u dhexeeya isticmaalkooda iyo asalkooda.

Rabshadu waa xaalad ka dhalata isdhexgalka u dhexeeya noolaha iyo dhaqankooda waxayna muujineysaa wax ula kac loo sameeyey. Qorayaasha, sida Berkowitz (1996) iyo Anderson iyo Bushman (2002), waxay muujinayaan faraqa u dhexeeya labadan Qayb ee ugu weyn ee dabeecadda rabshada (Qalalaasaha): (i) Dhinaca habdhaqan oo tilmaamaya adeegsiga anshax xumo cadowtinimo ku dhehan tahay iyadoo ujeedadu tahay keliya waxyeelo, iyo (ii) dhinac ula kac ah, halkaas oo rabshadda loo adeegsado hab lagu gaadho himilooyinka qofka. Qaybta loo yaqaan rabshada cadaawada waxaa loola jeedaa qorshe aan la sii qorsheysan, xanaaq ku saleysan, dabeecad kacsanaan ah oo inta badan la iska xanaajiyo oo looga dan leeyahay in wax yeelo la geysto.

Jaantuskan hoose waa saddex geesoodle muujinaya xaaladaha sababa khilaafka, wuxuuna tilmaamayaa in isku dhac kastaa uu ka kooban yahay sadex qaybood, kuwaas oo ah qaybo muhiima oo ku saabsan isku dhaca oo loo aqoonsaday aragti / fikrado, dabeecado iyo xaalada lagu sugan yahay / is burinta. Arrintaan la xidhiidhta, isku dhac kasta wuxuu leeyahay muuqaal muuqda iyo mid qarsoon; dhinaca muuqaalka ah oo lagu garto dabeecadda iyo dhinaca qarsoon ee leh aragti iyo is burin (Galtung, 1996, oo laga soo xigtay Engdaw, 2018).

Sawirka 3: Saddex-geesodka isku dhaca ee ABC (Aragtida, Dabeecadda iyo xalada lagu jiro)



Xigasho: Galtung, 1996

Saddexda Qaybood ee saddex geesoodka isku dhaca waxay gacan ka geystaan fahamka isku dhaca saddexda aragti ama qaab ee kaladuwan: rabshadaha tooska ah, rabshadaha Qaab-dhismeedka ah iyo rabshado dhaqameed.

Xadgudubka tooska ah waxay noqon kartaa mid la xidhiidha jidh dil, niyad jabin iyo mid shucuur waxaana ka mid ah xoogsheegasho, cabsi gelin, bahdilaad, dayac, iyo gacan ka hadal.

Tusaalooyinka qaarkood ee rabshadaha guriga waxaa ka mid ah ragga oo garaaca xaasaskooda (ama cabsi geliya) iyo / ama lamaanaha oo is-aflagaadeeya iyo carruurta oo ay ku xadgudbaan waalidkooda ama kuwa daryeela. Waxay sidoo kale noqon kartaa xadgudubka iskuulka ka dhaca, sida macallimiinta oo garaaca ama aflagaadeeya ardayda. Waxaa ka mid ah khilaafaadka deriska, qabiilka ku saleysan, qaran, gobol ama heer caalami ah.

Xadgudub qaab-dhismeed: waxaa loola jeedaa nooc xadgudubka kamid ah oo qof gaystay uu san muuqanin ama lagaranynin; taasi "waxaa laga yaaba inu jirin qof si toos ah waxyeello ugu gaysanaya qof kale oo ku Jira qaab-dhismeedka. Xadgudubku qaab dhismeedka ayu la socdaa waxa u isku muujiyaa nooc awood aan loo sinneyn taaso sidaas darteed keenta fursado nololeed oo aan loo sinnayn "(Galtung, 1969, Tusaale ahaan, khayraadka, sida Qaybinta dakhliga, waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka, ayaa ah kuwo si aan sinayn loo qeybiyay waxaana laga yaabaa in kooxo dadka ka mid ah laga reebo ka qeyb-galka siyaasada, dhaqaalaha iyo bulshada iyadoo lagu saleynayo qowmiyadooda, xaalada bulshada, diinta, jinsiyada iyo / ama naafada, taana waxay sababi kartaa rabshado inay qarxaan. Hal Qof oo khaladka iska leh ma jiro , laakiin waxaa sababta leh nidaamka (Qaab-dhismeedka) guud ahaan. Itoobiya gudaheeda, saboolnimadu waa nooca ugu badan ee rabshadaha Qaab-dhismeedku ka dhacaan; Ma jiraan


dambiilayaal toos u muuqda, taas badalkeed saboolnimadu waxay ku qotontaa bulshada dhexdeeda, iyadoo isu soo bandhigaysa go'doomin dhaqan-siyaasadeed iyo mid dhaqaale.

Xadgudub dhaqameed: waa qiil u noqoshada xadgudubada qaab-dhismeedka iyo kuwa tooska ah ee ku saleysan qabiilka / Qowmiyad, jinsiga, diinta iyo Qaab-galmoodka iyo / ama kartida asal ahaan. Tusaale ahaan, haweenka ku nool dalka Itoobiya ayaa inta badan laga reebay ka qaybgalka siyaasadda, dhaqaalaha iyo / ama arrimaha bulshada. inta badan cudurdaarka la bixiyo ayaa ah inaysan dhaqanka iyo caadadaba ay ku jirin in haweenku noqdaan hoggaamiye siyaasadeed iyo / ama mid dhaqaale ama ka qaybgale. Fikradahaas laga aaminsan yahay, ha ahaadeen dumarka ama kooxaha kale ee la hayb-sooco, waxay ku dhex milmeen waxbarashada (buugaagta), kaftanka, maahmaahyada, sheekooyinka dhaqanka, iwm.

1.6 Isbed-bedlka Khilaafaadka

Rabshada khilaafaadku waxay ka bilaabantaa dhacdo yar, waxaana laga yaabaa inay korodho islamarkaana isu badasho dhacdo weyn. Tusaale ahaan, ka soo qaad in aabbe uu gabadhiisa u guurinayo qoys uu ficiltan ka dhexeeyo. Si kastaba ha noqotee, ayeydeed kuma raacsana guurka la isku raacay. Markay ogaato waxa u wiilka ay soddoga u tahay sameeyay, aad bay uga xanaaqaysaa. Warka ku saabsan niyad jabkeeda wuxuu ku faafay qoyska intooda kale, qoyska ninku kaso jeedo, bulshada iyo inta ka baxsan. Caddaalad-darradii hore ayaa maskaxda ku soo dhacaysa, taasoo sii shidaysa cadhada sii kordheysa. Xanaaqa waxaa laga yaabaa inuu keeno gacan ka hadal, oo u horseedi kara falal kale oo rabshad ah iyadoo dadku aargudasho ku hawlan yihiin. Markaa, halkan dhacdo ayaa isu bedeli karaa isku dhac sokeeye, gobol ama xitaa mid qaran.

Jaantuska 4: Tusaalaha muuqaalka ah ee siduu isku dhacu uu uga bilaaban karo waxyar isla markaana uu si deg deg ah uga baxi karo gacanta.



Isku dhacu waxa u ka bilaaban karaa waxyar (sida dhibic oo kale)

Heerarka iyo culeyska Rabshada khilaafka

Sida laga soo xigtay Brahm (2003), waxaa jira lix heer oo isku dhacyo rabshado(gacan ka hadalka) wata:

Marxaladda 1^{aad}: Uruurinta xaabada dabka / Khilaafka Dahsoon. Inta hore, agabka dabka ayaa la ururiyaa. Qaar ka mid ah agabkan waxay u badan tahay inay ka gubasho fudud yihiin marka loo eego kuwa kale, lakiin weli ma jiro wax dab ah; khilaaf qarsoon ayaa hoosta ka shidmaya.

Marxaladda 2^{aad}: waa sida marka uu dabku bilaabo ololka/gubashada / waana marka uu soo if-bixi khilaafaadku. Marxaladdan marka la taagan yahay, Kabriid ayaa la shiday, dabkuna wuxuu bilaabaya inuu shidmo. Badanaa isku dhaca kooxaha, sida banaanbax weyn oo dadweyne ah ama Muuqaalo iyo sawirro la soo dhigo baraha bulshada ayaa u noqda Kabriidka, taas oo si deg deg ah u shidaysa alwaaxda qalalan ee isku dhaca qarsoon.


Marxaladda 3^{aad}: Dabshid / faafida khilaafka. Dabku wuxuu u gubtaa sida ugu fogaanshaha badan iyo sida ugu dhakhsiyaha badan ee uu Olali karo, isagoo si xawli ah u ololaya oo aan la xakamayn karin. Marka la taagan yahay Marxaladdan, isku dhacu wuxuu gaadhayaa heer xiisad iyo sida dabka oo kale, isku dhacu wuxuu baabiyaa alwaaxda (ama agabka) siinaya shidaalka.

Marxaladda 4^{aad}: Dhaawac iyo dhiig-daadasho. Waa marka Labada dhinacba ay is-dhaawacaan oo ay dhiigooda daadiyaan islamarkaana khilaafku uu circa isku sii shareero.

Marxaladda 5^{aad}: Dejinta / wada-xaajood. xiligan, dabku wuu sii damayaa oo dhuxusha uun baa sii ifaysa. dabku intiisa badan wuu damey. kadib waxaa bilaabmaya dadaalada waada xaajoodka ee dhexdhexaadiyayaasha. Marxaladdan marka lagu jiro , waxaa laga yaabaa in uu khilaafku sii socdo ama joogsado si guul leh gaar ahaan haddii dadaallada waada xaajoodku ay noqdaan kuwo miro dhal leh.'

Marxaladda 6^{aad}: Dab-demis / markan waxaa bilawda dhismaha nabadda. Xiligan dabkii hurayay wuu damey oo xitaa dhuxushu way qabowday. Marxaladdan, waxaa la joogaa xilligii xoogga la saari lahaa dib u dhiska xidhiidhka iyo in la bilaabo dib-u-heshiisiinta iyo dib-u-dhiska nabadda isku dhaca kadib . Si kastaba ha noqotee, haddii xallinta khilaafaadka aan si wanaagsan loo maareyn ama ay daciif tahay, waxaa suurtagal ah in khilaafku mar kale dib u bilowdo.

Jaantuska 5: Habka Marxaladaha Khilaafka




Xigasho: Brahm, 2003

Meertada khilaafaadka

Meertada khilaafku wuxuu sare uqaadaa habkii lagu faham karo isku dhacyada rabshadaha wata ee ka socda Itoobiya. Haddii khilaafyadii hore aan si sax ah loo fahmin waxna laga qaban, lama beddeli karo.

Jaantuska 6: Wareegga isku-dhaca



1.7 Hababka xallinta khilaafaadka

Waxaa jira afar hab oo loo adeegsado xallinta isku dhacyada:

- **Ka hortagga khilaafaadka:** habkani hadafka iyo ujeedada laga leeyahay waa sidii loo joojin lahaa inuu qarxo khilaaf.
- **Maareynta khilaafaadka: habkan** waxaa looga danleeyahay in lagu xadido oo looga fogaado rabshadaha mustaqbalka dhici kara iyadoo la dhiirigelinayo isbedelada hab-dhaqanka wanaagsan ee dhinacyada ku lugta leh.
- **Xallinta khilaafaadka: habkani** ayaa Xalliya sababaha isku dhaca keena oo raadiya dhisida xidhiidh cusub oo waara oo u dhexeeya kooxaha cadawga isku ah.
- **Isbedelka isku dhaca: habkani** wuxuu wax ka qabtaa ilaha guud ee dhinaca bulshada iyo siyaasada ee keena isku dhaca wuxuuna doonayaa in uu badalo tamarta xun ee isku dhaca uuna u badalo isbedel bulsho iyo mid siyaasadeed oo wanaagsan.

Gudaha Itoobiya, waxaa jira habab fara badan oo lagu maareeyo khilaafaadka, sida ku cad buugga "**Nabadeynta Itoobiya: Sagaalka hab dhaqan ee xalinta khilaafaadka (2016)**".

Buuggu wuxuu ka hadlayaa doorka odayaasha ee xalinta khilaafaadka sagaalka gobol ee Itoobiya wuxuuna soo bandhigayaa kiisaska soo socda: -

- Kiiska dadka Welayta ee Koonfurta Itoobiya,
- Xeerka Oromada Arsi oo si gaar ah u tixraacaya degmooyinka Dodolla iyo hareeraheeda,
- Doorka abegar (Aabbaha Rabbaaniga ah) ee Waqooyiga Wolo,
- Xeerka Sidaamada,
- Xeerka gobolka Guraagta,
- Xeerka daraasadda ee Tigray,
- Xeerka guurtida Amxaarada ee degmada Ankober, iyo
- Xeerka Kambata iyo
- Xeerka guurtida ee soomaalida

Caqliga caadiga ah wuxuu muujinayaa in dadka degan Itoobiya ay sifiican u fahmsan yihiin dhibaatooyinkooda marka loo eego dadka kale waxayna ku haboonyihiin inay xaliyaan mashaakilkooda iyagoo adeegsanaya hababkooda iyo xeerarkooda dhaqameed.

Machadka Caalamiga ah ee Dib-u-dhiska Reer Miyiga, Buugga Xarunta Dhaqanka ee Xarunta Afrika ee Isgoyska: Buugga dhismha Nabada ee dumarka Itoobiya (*Ethiopian Women in Peacebuilding* 2009) ayaa xooga saaraya doorka haweenku ay ku leyihiin nabadeynta. Buuggu wuxuu ka hadlayaa xirfadaha iyo awoodaha gaarka ah ee haweenku u isticmaali jireen nabadaynta iyo xallinta khilaafaadka. Wuxuuna soo bandhigaya habab loo adeegsan karo xirfadaha xaalada itoobiya maanta ay ku jirto si loo kobciyo xidhiidhka nabadeed oo u dhexeeya

shakhsiyaadka, bulshada iyo qowmiyadaha. Qaar ka mid ah tusaalooyinka haweenka ee dhinaca dhisida nabadda ayaa looga hadli doonaa Cutubka 5aad: Haweenka, nabadda iyo amniga.

1.8 Dooroka ka hortagga iyo maareynta Khilaafaadka

Qoysaska, bulshada, hoggaamiyeyaasha diinta iyo ururada diinta ku saleysan, dugsiyada, warbaahinta iyo dowladda dhammaantood waxay door muhiim ah ka qaadanayaan ka hortagga iyo wax ka qabashada khilaafaadka ayagoo ka qaadanaya door firfircoon oo ku aaddan dhisidda nabadda. Khilaafku Waxa uu ku wanaagsan yahay in laga hortago intii la maareyn lahaa markuu bilowdo kadib.

Dooroka barayaashu ku leeyihiin waxbarashada nabada waxay muhiim u tahay geedi socodka nabadaynta Itoobiya. Dhaqan ahaan, macallimiinta waxaa loo tababaray inay tixgeliyaan naftooda inay yihiin shakhsiyaad bixiya nuxurka waxbarashada. Aragtidan 'macallinku waxwalba u garanaya, ardayduna waxba ma garanayaan' (Freire, 1970, p. 73) iyo waxbariddu waxaa loo arkaa inay tahay ficil la 'buuxinayo dheri madhan. Maadama ay raagtay Aragtidan, waxaa macquul ah in loo arko in 'habka dheriga madhan u yahay midka ku habboon.

Habka waxbarasho ee ku saleysan baraha ee qaba in bareyaashu leeyihiin dhammaan aqoonta halka kuwa wax baranaya aysan midkoodna lahayn wax aqoon ah ayaa cawaaqib xun yeelan karta. Halkii u ka noqon lahaa dhalile afkaar iyo qof fikirkiisa u madaxbanaan, bartuhu waa u hogaansan yahay oo u ku tiirsan yahay macalinka si uu ugu sheego waxa ay tahay inu ka fikiro iyo waxa ay tahay in u barto. Sidaas darteed, bartaha waxaa si fudud u maamuli kara dadka maamulka haya. Maamulkaasi waxaa u fudueynyaa fursada inay ku dhirigelinayeen dulqaad la'aanta iyo in lagu tababaro aragtiyo Asal raac ah /xagjirnimoo oo ay dhallinyartu rumeysan yihiin inaan su'aal laga keeni karin.

Habka waxbarasho ee isbeddelka ku salaysan waxa u liid ku yahay habka waxbarasho ee baruhu udub dhexaadka u yahay. Waa hab waxbarasho oo bartuhu udub dhexaad u yahay waxbarashad, oo ay horseed u tahay barashada firfircoon wuxuuna isku daraa fikirka xasaasiga ah, Falcelinta, iska-warhayn, anshaxa iyo ficil macno buuxa leh. Halkii laga buuxin lahaa dheri madhan, qaabkan, waxbaridda waxaa loo arkaa inay u oggolaanayso ubaxyada inay koraan. Habka waxbarasho ee ku salaysan isbedelka ee nabad-dhisidda waxay ku dhiirrigelisaa ardayda kala duwan inay ka digtoonaadaan, dhaliilaan kana jawaabaan adduunka ballaadhan ee wax-barashada ee ka baxsan darbiyada dugsiyada, oo ay ku jiraan waxbarashada aan rasmiga ahayn iyo tan aan tooska ahayn ee qoysaska, asxaabta, bulshada, machadka diinta, mac'hadka aan diiniga ahayn, dawladda iyo warbaahinta

Jaantuska 7: Aragtiyo kala duwan oo ku saabsan wax-baridda



Xigasho: Wonderlane/Flicker & Patrick Standish and Creative Commo

Haddaba Aynu isla firrino doorka ay ku leyihiin qoyska, bulshada, hoggaamiyeyasha diinta iyo ururada diinta ku saleysan, dugsiyada, warbaahinta iyo dowladda si looga hortago loona maareeyo khilaafaadka ka jira Itoobiya.

Qoyska

Qoysku waxay door weyn ka qaataa korinta caruur, dhalinyaro nabad jecel iyo hogaamiyeyasha berito dhinacyada kala duwan ee nolosha. Barashada sida loo maareeyo khilaafaadka waxay ka bilaabataa guriga. Wada-hadalka nabadeed ee heerka qoyska, u qaadashada midba markiisa iyo is ixtiraamka marka la wada-hadlayo, dhageysiga midba midka kale iyo ula dhaqanka gabdhaha iyo wiilasha si siman qoyska dhexdiis waxay u noqotaa aasaas muhiim ah bulshooyinka nabadeed. Qoysaska iyo doorka waalidnimadu waxay door weyn ka ciyaaraan qaabeynta aragtida, dejinta qiyamka, caqiidooyinka iyo fikradaha kala duwan ee carruurtooda. Bulsho dhaqameedka sida Itoobiya, qoysku wuxuu door weyn ka ciyaaraa ka hortagga iyo maaraynta khilaafaadka.

Bulshada

Bulshooyinka ku dhaqan Itoobiya ee wax wadaaga ee is daryeela ayaa muhiim u ah ka hortagga khilaafaadka iyo abuurista iyo ilaalinta nabadda. Haddii ay rabshadi dhacdo, qoysas dhowr ah ayaa isu imaan kara oo wada hadli kara wada-hadal iyo is-dhexgal nabadeed. Bulshadu waxay kaloo ka qaybqaadan kartaa isu soo dhaweynta cadawgii hore iyo caawinta dhaawacyada iyo agoonta. Bulshadu waxay kaloo door muhiim ah ka ciyaartaa geedi socodka nabadaynta iyagoo gacan ka geysanaya dib u dhiska dugsiyada, tuulooyinka iyo xarumaha caafimaadka ee ku burburay dagaalladii.

Hogaamiyeyasha diinta iyo ururada diinta ku saleysan

Gudaha Itoobiya, halkaas oo dadka intiisa badani haystaan diin gaar u ah, hoggaamiyeyasha diinta iyo ururada diinta ku saleysan ayaa door muhiim ah ka ciyaari kara bixinta damiirka anshaxa ee yareynaya suuragalnimada isku dhaca isla markaana nabadda ku kordhinaya

Falcelinta anshaxa. Waxay sidoo kale bixiyaan aasaas adag oo loogu talagalay bogsashada cafiska ah ee dhibta dhibbanayaashu soo mareen intii lagu jirey khilaafaadka waxayna dhiirrigelinayaan is-cafinta iyo dib-u-heshiisiinta. Waxay kobcin karaan goobo ay bulshada ku bartaan inay ku wada noolaadaan oo ay dhisaan mustaqbal wanaagsan. Si kastaba ha noqotee, diinta ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu sii huriyo rabshadaha. Tusaale ahaan, kooxda xagjirka ah ee Al-Shabab waxay dhiiri gelisaa rabshadaha ayago adeegsanaya magaca Islaamka, xitaa haddii rabshadaha noocaas ah ay ka hor imaanayaan mabda'a diinta lafteeda.

Dugsiyada

Iyada oo loo marayo waxbarashada nabad dhiska, dugsiyada iyo macallimiintu waxay ku dhisi karaan dhaqan nabadeed fasalka, bay'ada dugsiya iyo bulshada dhexdeeda. Barayaashu waxay dhiiri gelin karaan oo tusaale u noqon karaan doodaha nabadeed, shaqada iskaashiga, sinnaanta wiilasha iyo gabdhaha waxayna ula dhaqmaan qaab ixtiraam leh dhammaan ardayda. Dugsiyadu sidoo kale waxay awood u leeyihiin inay kusoo bandhigaan isku dhaca daahsoon fanka, riwaayadaha, gabayada iyo ciyaaraha. Dugsiyadu waxay ku xoojin karaan bulshadooda maalmaha u furan qoysaska ardayda, halkaas oo dugsiya iyo qoysku ay isugu yimaadaan sidii hal bulsho oo ay ku yeeshaan nooc ka mid ah kulan isweydaarsiga (Engdaw, 2018, p. 194-195).

Warbaahinta

Warbaahintu waxay door muhiim ah ka qadataa kahortaga, maaraynta iyo bedelida khilaafaadka. Aqoonta warbaahinta wuxuu diiradda saarayaa horumarinta xirfadaha ku saleysan su'aalida iyo awoodda si macno leh loola macaamilo warbaahinta noocyadeeda kala duwan. Natijjooyinka ugu muhiimsan waxaa ka mid ah: (1) fahamka doorka iyo howlaha warbaahinta ee bulshada si looga hortago, loo xalliyo, loo maareeyo loona beddelo khilaafaadka rabshadaha wata; (2) qadarinta shuruudaha ay warbaahintu ku fulin karto shaqooyinkooda; (3) si qoto dheer u qiimeynta waxyaabaha ku jira warbaahinta iyadoo loo eegayo howlaha warbaahinta; (4) la hawlgelka warbaahinta si aad isu-muujiso iyo ka-qaybgalka dimuqraadiyadda; iyo (5) xirfadaha dib u eegista (oo ay ku jiraan ICT-yada) ee loo baahan yahay si loo soo saaro nuxur ay soo saaraan isticmaaleyaashu.

Waxyaabaha muhiimka ah ee heerka garasho ee macluumaadka waxaa ka mid ah:

- Qeexida iyo qodobaynta baahiyaha macluumaadka si loogu xaliyo khilaafaadka qaab aan rabshad lahayn;
- Helitaanka iyo isticmaalka macluumaadka;
- Qiimeynta macluumaadka;
- Habaynta macluumaadka;
- Isticmaalka macluumaadka anshaxa;
- Gudbinta macluumaadka; iyo
- Adeegsiga xirfadaha ICT oo ka shaqeynta macluumaadka loo adeegsado.

In kasta oo warbaahintu ay sababi karto khilaaf, haddana waxay kaloo noqon kartaa aalad awood u leh dhisidda nabadda. Marka lagu daro telefshanka, raadiyaha AM / FM, wargesyada degaanka ah, qaranka iyo dugsiya ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa:

- Faafinta wararka iyo macluumaadka dhisidda nabadda ee mideynaya kooxaha;
- Baaritaanka waxbarashada nabadda iyadoo loo marayo habab rasmi ah, kuwo aan rasmi ahayn iyo mid aan toos ahayn;
- Si Kor loogu qaado wacyiga bulshada ee arrimaha bilaabi kara ama hurinaya isku dhaca;
- Dhisida xirfadaha loo isticmaali karo xidhiidhka nabadeed.

Dowlada

Dowladdu waxay door weyn ku leedahay ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka. Dowlada waxaa waajib ku ah inay ilaaliso muwaadiniinteeda waxaana waajib ku ah ixtiraamka sharciga.

Dawladdu sidoo kale waxay aad muhiim ugu tahay dejinta iyo hirgelinta siyaasadaha dhaqaale iyo bulsho ee ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka.

Qaabka ay dowladda u wajaheyso ka hortagga khilaafaadka waa inuu noqdaa mid firfircoon halkii uu ka noqon lahaa mid falcelin ah. Dawladdu waa inaysan kufashilimin inay wax ka qabato sababaha aasaasiga ah iyo sababa hoosaadka khilaafaadka oo aysan u adeegsan qaab khaldan xallinta dhibaata. Sababo dhowr ah ayaa lagu soo koobay inay kufilin karaan xaqiiqda ah in adeegsiga xoogga kaligiis uusan xakamayn karin isku dhaca Itoobiya. Haddii tusaale ahaan, hawlgallada ka hortagga khilaafaadka qaarkood, booliiska / millatariga ay taageerayaan xoog aan habboonayn, oo ay sidoo kale dowladdu u adeegsato, xakamaynta isku dhacyada waxay ballaadhinaysaa farqiga u dhexeeya dawladda iyo muwaadiniinteeda. Dowladda waxaa laga yaabaa in loo arko cadow oo aan loo arkin mid adeeg bixiya, dammaanad qaadka xuquuqda, oo ay ku jiraan amniga, xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha iyo ku dhaqanka sharciga. Sidaa awgeed, doorka dowladda ee ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka wuxuu u baahan yahay isku dheelitirnaan aftahan ah. Sidaa darteed, waxaa loo baahan yahay qaab dhammaystiran oo isku dhafan oo fara-gelin ah maadaama arrimuhu isku dhexjiraan oo loo wada dhan yahay (Engdaw, 2018, p. 194).

Cutubka 2aad: Dhismaha Nabada

2.1 Isku xidhka Dhismaha Nabadda iyo Waxbarashada Nabadda

Waxaa jira xidhiidh toosa oo ka dhexeeya dhismaha nabadda iyo waxbarashadda nabadda. Dhismaha nabadda waxaa lagu qeexaa hab-dhaqanka iyo geedi socodka lagu dhisayo ama dib loogu dhisayo xidhiidh cusub ama isbeddeladda xaaladahii hore. Geeddi-socodka dhismaha ama dib-u-dhiska nabada waxayna xooga saartaa dadargelinta arrimaha caddaaladda iyo xuquuqda aadanaha (tusaale ahaan dib-u-heshiisiinta dhinacyadii uu khilaafku dhexmaray ee ay cadaawadu kala gaysay iyadoo dib loo soo celinayo xidhiidhkooda, ama la adeegsanayo caddaalad soo celin ah, oo ay ka mid tahay iscafin iyo dhisidda bulshada iyo isbadal siyaasadeed.

Nabadaynta ayaa dhacda ka hor inta uusan qarxin isku dhacyada rabshadaha wata ama ka dib marka ay dhammaadaan isku dhacyada rabshadaha wata. Waxay dhiirrigelisaa wada-noolaansho nabadeed iyadoo xooga la saarayo xalinta sababaha qotada dheer ama qaab-dhismeedka ah ee khilaafaadka keena. Marka la soo koobo, nabad-dhisku waxay dhacdaa marka bulshooyin iyo reero nabad qaba oo xasilloon oo heer degmo iyo heer qaran ah la dhiso.

Waxbarashada nabada, dhanka kale, ayaa ah geedi socodka iyo ku dhaqanka a) soocida caqabadaha inaga hortaagan helitaanka nabada; (b) horumarinta xirfadaha aan rabshad lahayn si looga hortago loona beddelo isku dhacyada rabshadaha wata; iyo (c) dhiirrigelinta aragtiyada nabadeed. Kuwaani waxaa lagu bartaa si rasmi ah, aan rasmi ahayn ama si aan toos ahayn qoysaska dhexdooda, dugsiyada dhexdooda, asxaabta, bulshada dhexdeeda iyo ayadoo loo marayo warbaahinta. Waxbarashada nabada waa qeyb udub dhexaad u ah dhismaha nabada. Si loo dhiso nabada, qofku waa inuu barto sida loo wada hadlo rabshad la'aan, ixtiraamo kuwa kale, noqdo qof maskax furan, si xasaasi ah loogu fikiro iyo noqdo qof taxaddar leh oo Falcelinta leh. Xirfadahani waa Qayb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashada nabadda.

2.2 Mabaadi'da iyo qaab-dhismeedka nabadda

Mabaadi'da iyo qaab-dhismeedka dhismaha nabadu waa hab-ku-saleysan xoojinta xiriirka, iyo geedi socod ka qaybqaadashada nabadeynta. Waxaana xooga la saaraa horumarinta sidii nabad loogu wada noolaan lahaa iyo sidii looga hortagi lahaa arrimaha sababa ama keena khilaafaadka. Sida ku xusallaalinta qiyamka, yoolalka, iyo u heellanaanta xuquuqda aadanaha iyo baahiyaha aadanaha;

- Waxaa loogu talo galay in la badelo marxaladihii khilaafaadka;
- In aan la iska indhatirin xaaladaha abuurikara cadaalad darrada iyo xadgudubyo;
- Waa in la aasaaso anshax laga midaysan yahay iyo iskaashi si loo yareeyo khilaafaadka.

- Waa in la xoojiyo xirfadaha xidhiidhka
- Waa falanqaynta xaaladaha cakiran ee dhaqamada salka ku haya, tariikhaha, sababaha keena khilaafaadka, iyo walbahaarka degdega ah;
- Waa in la sameeyo goobo ay dadku ku kulmaan si ay fikradaha cusub isu waydaarsadaan islamarkaana u faafiyaan waaya-aragnimadooda;
- Sidii loo bogsiiin lahaa dhaawacyada, islamarkaana kor loogu qaadi lahaa caddaaladda si xidhiidh isbeddel wacan keena loo gaadho;
- Wuxuu u baahan yahay dhiska kartida iyo xidhiidhka heerar kala duwan ;
- Waa mid aad u adag oo dad badan ay ku lug leyihiin.

Shaxda 1: Matalaada xeerarka iyo qaab-dhismeedka nabad dhiska

Maalin maalmaha ka mid ah dalka Itoobiya dhexdeeda, haweeney iyadoo socota ayaa waxay la kulantay goob dhisme laga wado waxayna aragtay saddex shaqaale oo dhammaantood isku shaqo qabanaya. Waxay waydiisay mid walba waxa ay qabanayaan. Shaqaalahii ugu horreeyay wuxuu yidhi, "Waxaan halkan u imi dhagaxaan jajabiyaa."

Haweeneydi waxay u tagtay shaqaalihii labaad waxayna waydiisay isla su'aashii. Kii labaad ayaa ku jawaabay, "nolol maalmeedkeyga ayaan ka helayaa."

Haweeneydii ayaa markaa u tagtay shaqaalihii seddexaad oo isla su'aashaas weydisay. Kii saddexaad ayaa ku jawaabay, "Waxaan dhisayaa isbitaal."

Casharka: Mararka qaarkood waxaan jajabinaynaa dhagaxaan, waxaan xooqa saareynaa hawsha deg degga ah, oo ah shaqo aad u adag. Mararka qaar waxaan xooqa saareynaa sidii aan nolol uheli lahayn, taas oo muhiim u ah badbaadada anaga iyo qoyskeena. Mararka qaarkood waxaan sidoo kale fahamsanahay in shaqadeenu ay qayb ka tahay himilo aad u balaaran, sida dhismaha isbitaal, oo ay ka mid yihiin shaqaale kale oo badan oo leh natijjo waxtar u leh dadka oo dhan.

2.3 Dhismaha dhaqan nabadeed

Fahamka macnaha dhaqanku wuxuu ardayda ka caawiyaa inay dhisaan dhaqan nabadeed. UNESCO (2001) waxay dhaqanka ku qeexdaa 'xidhmada garashada, cilmiga ruuxiga, agabka iyo shucuurta ee astaanta bulshada ama koox bulsho'. Sidoo kale, dhaqanka waa la bartaa, waa la wadaago waana astaan. Waxay si toos ah uga muuqata farshaxda iyo suugaanta, caadooyinka, nidaamyada qiyamka, hiddaha, iyo aaminsanaanta.

Dhaqanka nabaddu wuxuu ka kooban yahay (1) qiyam, (2) aragtida iyo (3) dabeecado. Maba'adiideeda aasaasiga ahi waa: (1) xorriyadda; (2) caddaaladda; (3) dimuqraadiyadda, (4) xuquuqda aadanaha, (5) ixtiraam; iyo (6) midnimo. Horumarinta dhaqanka nabadda waxay gacan ka geysaneysaa in laga hortago isku dhacyada iyadoo lala tacaalayo sababihisa aasaasiga ah iyo iyadoo lagu xalliyo dhibaatooyinka wada-hadal iyo waan waan.

Dhaqan nabadeedka waa la baran karaa. Markay ardaydu bartaan sida xushmadda iyo rabshad la'aan loo xaliyo khilaafaadkooda, waxay horumariyaan awooddooda dhisida dhaqanka nabadda. Markay bartayaashu ka qaybgalaan doodaha, wada-hadalada, iyo waan waanta, waxay bilaabaan inay dhisaan dhaqan nabadeed. Haddii barayaashu ay baraan oo ay dhiirrigeliyaan ficillada noocan oo kale, waa mid lagu soo celceliyo waxayna noqon kartaa hab-dhaqan nololaha oo dhan ay ku dhaqmaan.

Itoobiya gudaheeda, sida meelaha kaleba, fikradda dhaqanka nabadeed waxaa u isku daraa qiyamka, caqiidooyinka iyo qaababka ruuxiga ah. Waxa kale oo ku jira aqoonta iyo teknolojiyada, dhaqanka, iyo hababka muujinta dhaqanka / farshaxda deegaanka. Dhaqanka nabadda ayaa jira marka la ixtiraamo xuquuqda aadanaha, kala duwanaanta dhaqanka, midnimada, diidmada rabshadaha iyo rabitaanka dhisida bulshooyinka dimoqraadiga ah.

Ubuntu, oo ah erey Bantu ah oo macnaheedu yahay 'dadnimada dadka kale,' wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa fahamka dhaqanka Afrika guud ahaan iyo tan Itoobiya gaar ahaan. Itoobiya waxaa lagu sifeeya inay tahay bulsho-wadaag oo lahaanshaha dhulka ee bulshada xoola dhaqatada ah inta badan waxay ku saleysan tahay dhul wadaag ama dhulka abka ab ay lahayen waana isku mid bulshada beeralaydaa. Madaama ay jirto dareen bulsho oo sidaa u xoog badan, waxaa muhiim ah in loo arko dhaqan nabadeedka ka jira Itoobiya dadaal loo dhan yahay, caqabado iyo guul.

Shaxda 2aad: Erayada Desmond Tutu (1999) ee laga soo qaatay "No Future without forgiveness" oo ah "Ma jiro mustaqbal hadaan lays cagin"

'Ubuntu aad ayey u adag tahay in lagu turjumo luqadaha reer Galbeedka ah. Waxay ka hadlaysaa asalka aadmiga. Marka aan dooneyno inaan aad u amaano qof waxaan dhahnaa, "Yu, u nobuntu"; "Haye, he-he-iyo-wuxuu leeyahay Ubuntu." Markaa waxaad tahay qof deeqsi ah, waxaad tahay qof martigeliya, waxaad tahay qof saaxiibtinimo leh, daryeel leh, oo naxariis badan. Waxaad wadaagtaa waxaad haysato. Waaxay la micno tahay, "Dadnimadaydu waxay ku xidhan tahay, oo si aan macquul ahayn ayaa ugu xidhan tahay taada." Waxaan ka tirsanahay hal xidhmo nololeed. Waxaan leenahay, "Qofku waa qof kaliya marka dhinaca dad kale laga eego."


Maahaan, "sidaas darteed waxaan u malaynayaa inaan ahay Qof." Waxay badelkeed leedahay halkii: "Waxaan ahay bini aadam maxaa yeelay waan ka tirsanahay. Waan ka qaybgalaa, waan wadaagna." Qofka leh Ubuntu waa u furan yahay kuwa kale weyna heli karaan, isagoo amaanaya kuwa kale, ma dareemayo in khatar u ku jiro sababto ah in kuwa kale ay awoodaan oo ay wanaagsan yihiin, waayo isagu ama iyadu waxay leeyihiin isku kalsooni habboon oo ka timaadda ogaanshaha inuu isagu ama iyadu ka tirsan yihiin guud ahaan aadanaha iyo uu yaraado marka dadka kale la dulleeyo ama la yareeyo, marka kuwa kale la jidhdilo ama la cadaadiyo, ama loola dhaqmo sidii inay ka hooseyaan cidda ay yihiin '(p 31-32).

2.4 Aqoonsiga, kaladuwanaanshaha iyo Dhismaha nabada

Itoobiya dhexdeeda, Aqoonsiga asalka shaqsiya wuxuu abuura midnimo ama in ay bulshadu kalaqaybsanto. Waxyaabaha dadka isugu keeni kara waxaa kamida dhaqanada la wadaago ama kala duwanaanshaheenu waa midnimadeena. Asalka qofku wuxuu ku saleysan yahay dhinacyo. Asalka qofku waxaa u ka kooban yahay qofku cida uu asal ahaan kasoo jeedo, waa sida dadka kale u arkaan inu yahay waana sidoo kale, qayb ahaan waxay ka kooban tahay sida qofku u arko sida dadka kale ay u arkaan. Tusaale ahaan, cunugga Koonfurta-Suudaan ee qaxootiga ku ah xerada qaxootiga ee Itoobiya wuxuu u maleyn karaa inu yahay wiil, agoon ah, qabiilka Dinka kaso jeeda, iyo arday wanaagsan. Qaar kale waxay u arki karaan inuu yahay qof awood leh, mustaqbalka Koonfurta Suudaan ah, ama culeys ah. Waxa laga yaabaa inuu u arko inay dadka kale u arkaan inuu yahay qof caqli badan, da 'yar, iyo qaxooti ah.

Shaqsiya ama kooxdu badanaa waxay leeyihiin wax ka badan hal asal. Si kastaba ha noqotee, ku-calaamadeynta qof ama koox adigo ku saleynaya hal ahaansho (asal), gaar ahaan mid xun oo ku saleysan faham hoose ama qayb ah, waxay yareynaysaa dadnimadooda waxayna sababi kartaa isku dhac

Sawirka 8 Shaxda asalka Qofka



In kasta oo asalka qofku xooga saarayo, gaar ahaanta sida shaqsigu uga duwan yahay una la mid yahay kuwa kale, kala duwanaantu waxay xooga saareysaa kala duwanaanshaha iyo gaar ahaanta sida sinjiyadda, isirka, jinsiga, Qaab galmeedka, heerka dhaqan-dhaqaale, da'da, awoodaha jireed, caqiidooyinka diinta, aaminsanaanta siyaasadeed, iyo kuwa kale. Gudaha Itoobiya, xaalada kala duwanaanta waa in loo arkaa inay tahay isha xooggeena. Si kastaba ha noqotee, waxay sidoo kale mararka qaar u noqon kartaa bilowga rabshadaha ama isku dhaca kuwa ka baqa ama neceb kala duwanaanta. Marka dhinac ugu fiican laga fiiriyo Kala duwanaanta waa aasaaska nabad-dhiska - madaama ay noo suuro gelinayso inaan ka helo xoog oo aan ixtiraamno kala duwanaanshaheena.

Xaalada guud ee Itoobiya, halkaas oo ay ka jiraan in ka badan 83 qowmiyadood, asalka iyo kala duwanaantu xidhiidh ayay leyihiin. Si fudud marka loo dhigo, kooxaha asalkoodu kaladuwan yahay sida kuwa afalkooda, diimahooda heerarka-waxbarasho, jinsi, iyo Qowmiyadoodu kala duwan tahay ay isu yimaadaan, waxay abuuraan bulsho kaladuwan.

Markay kooxahan asalkoodu kala duwan yahay ay wada shaqeeyaan, wada noolaadaan oo ay iska kaashadaan hadaf guud, waxay si wanaagsan wax ugu biiriyaan nabadaynta. Sheekada guusha ee Shaxda 3 waxay soo koobeysaa sida kooxaha kala duwan asal-ahaan oo ka kooban bulsho kala duwan oo loo yaqaan bulshada Borana - Garba ee xudduudda Itoobiya iyo Kenya ay ugu guuleysteen inay dhisaan nabadda iyagoo ka qayb gelinaya baah-wadaag kala duwan.

Tusaale A oo ah nabad-dhisid dhinaca Xuduuda Itoobiya iyo Kenya ka timid

Geeddi-socod nabadeed oo lix sano ah oo ay bilaabeen hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo odayaasha ayna taagereen haweenka nabadda ka shaqeeya, dhallinyarada xoola dhaqatada ah iyo, dawlada Kenya iyo Itoobiya, ayaa ku guuleystey in ay heshiisiyaan tiro badan oo reer miyi ah oo Borana iyo Gabra ah oo xoolo-dhaqato ah oo ku nool xadka Itoobiya iyo Kenya 2009 (Scott-Villiers et al. 2011). Heshiiska nabadeed waxaa ku jiray qodobo ka mid ah cafiska iyo dib u soo celinta cadaaladda inta waxyeelowday iyo soo noqoshada dadka barakacay iyo qaxootiga; waxay sababtay in dib loo furo dhul-daaqsimeedkii weyn waqti abaar ay jirtay.

Kulamo is daba joog ah oo xasaasi ah, saraakiisha dowlada Kenya iyo Itoobiya ayaa si firfircoon u taageeray habab iskaashi oo ku saabsan booliska iyo cadaalada, iyadoo la adeegsanayo iskudhaf maamul goboleed iyo maamul dhaqameed. Markii ay soo koobayeen astaamaha ugu waaweyn ee geeddi-socodka nabadda, odayaashu waxay xuseen afar arrimood oo muhiim u ah guusha: 1) ka dhaadhicinta anshaxa, 2) sharciga, 3) wada xaajoodka muwaadiniinta, iyo 3) kormeerka muwaadininta iyo booliska. Waxa kale oo ay xuseen in nabadu ayna ahayn mid caam ah isla markaana, iyadoo tixraacaya kicinta siyaasadeed iyo kala fogeynta dhallinyarada ku nool magaalooyinka, waxay qireen in isku dhacu wali suragal yahay oo u jiro, gaar ahaan gudaha iyo hareeraha labada magaalo ee Marsabit iyo Mooyaale.

In kasta oo ay la mid yihiin dadaallo badan oo dib-u-xallinta khilaafaadka dibedda ka ah oo ay horkacayaan ururada samafalka ee ka jira gobolka, howshan waxaa laga bilaabay oo laga soo agaasimay gudaha waxaana laga soo qaatay awooda sharci ahaanta deegaanka iyo falanqaynta siyaasadeed iyo bulsho ee ballaaran ee odayaasha Borana iyo Gabra. Si ka duwan dhaqdhaqaaqyada la midka ah ee nabad-dhisidda, ee u janjeedha arrimo dhawr ah, geeddi-socodka nabad-dhiska ee Borana - Gabra wuxuu isku dayey inuu wax ka qabto saddex arrimood oo saameeya nabadda: maamulka, siyaasadda kala-qaybsanaanta iyo wada-noolaanshaha bulshada.

Xigasho: Pavanello & Scott-Villiers, 2013

Tusaalaha B Itoobiya dhexdeed, si looga hortago rabshadaha qowmiyadaha salka ku haya ee siyaasadeed

Guul kale oo dhawaanahan la gaadhay Itoobiya waxay ahayd, odayaal ka socda Gamo iyo qowmiyadaha oo dejiyay xiisadda magaalada Arba Minich iyo joojinta dibad-baxayaasha doonayay inay weeraraan dukaamada iyo hantida ay leeyihiin Oromadu si ay uga aargoostaan isku dhacii qowmiyadeed ee Burayu ee dhacay Sebtember 17, 2018, halkaas oo tobanaan qof dadka ka soo jeeda Gamo, Oromo iyo qowmiyadaha kale ayaa ladilay kumanaana waa laga barakiciyay deegaanka Burayu, oo katirsan gobolka Oromada ee dalka Itoobiya, waxyar uun ka baxsan caasimada Addis Ababa, taasoo u muuqatay isku dhac qowmiyadeed oo salka ku haya siyaasad.

Markii kooxaha dhalinyarada ee Arba Minch, Gamo Gofa, ee Koonfur Galbeed ee Ethiopia ay sameeyeen talaabo ay kaga aargoosanayaan weerarkii lagu bartilmaameedsaday meherada Oromada ee Arab Minch, odayaasha Gamo ayaa soo faragaliyay iyagoo gacmaha ku haysta caws cusub oo la jaray oo jilbaha dhulka dhigay si ay uga baryaan dhalinyarada inaysan weerarin Ganacsigii Oromada, odayaashu waxay baajiyeen rabshadaha. Sidaa darteed dad badan oo Itoobiyaan ah waxaa qiirooday caqliga odayaasha Gamo oo dad badan ay ku sheegeen sheeko guul leh.



Cutubka 3aad: Dhiirigelinta Ka fal-celinta Anshaxa

3.1 Waxbarashada Nabadda iyo anshaxa

Waxbarashada nabadda waxay ardayda siisaa fursado iyo wakhti ay ku horumariyaan aqoontooda, xirfadaha, iyo dabeecadaha. Intaa waxaa sii dheer, waxay kobcineysaa qiyamka loo baahan yahay si looga hortago in khilaafaadku u sii gudbaan rabshado isla markaana ay awood u yeeshaan inay beddelaan khilaafaadka ayadoo loo marayo iskaashiga iyo midnimada kuwa kale oo la adeegsanayo habab aan rabshad lahayn. Waxbarashada nabadda waxay ubaahantahay bartayaashu inay ogaadaan naftooda, xidhiidhka ay la leeyihiin dadka kale iyo isdhexgalka bulshada.

Gudaha Itoobiya, waxaan ku wada nool nahay bulshooyin badan oo kaladuwan oo si isa soo taraysa isugu xidhan oo isugu tiirsan. Dhamaan isdhexgalkayaga aan la leenahay dadka kale ayaa tixgelinaya aaminaad aasaasi ah ee inaga dhaxeeya. Masuuliyad baa inaga saran inaan is daryeelo. Tani waxay ka mid ah baahida loo qabo in loo jawaabo "dadka kale" iyo in la ilaaliyo dadnimadeenna guud. Nolosheena waxaa qaabeeya isdhexgalka aan la leenahay dadka kale iyo lidkeeda oo la mid ah ; tani waxay u baahan tahay ixtiraam, masuuliyad, iyo daryeel / jacayl daneysi ku jirin oo midba midka kale u qabo.

Nolosheena maalinlaha ah, Itoobiyaanku waxay la kulmaan oo markhaati ka yihiin caqabadaha anshaxa, cadaalad darada iyo rabshadaha; Itoobiyaanku waxay la kulmaan tartan kaasoo caqabadeeya habka aan u fikirno iyo habka aan u dhaqano. Dadka qaarkiis waxay la kulmaan rabshado wayna ka cararaan guryahooda oo ay soo dhexgalaan xaalado cusub oo leh caadooyin bulsho oo cusub iyo isbedel awoodeed. Dadka qaar waxay markhaati ka yihiin rabshadaha iyo takoorka maalin kasta dhaca, taasoo ka dhigeysa inay dareemaan awood la'aan. Dadka qaarkiis waxay la kulmaan faqri iyo sinaan la'aan, taasoo saameyn ku yeelata sida ay u wada nool yihiin oo ay ula wadaagaan goobhooda dadka kale. Kadibna waa inaan ka wajahnaa caqabadaha dhinaca anshaxa ah ee ka imanaya ahaanshaha muwaadiniin caalami ah isla mar ahaantaana isku dayeyno inaan ka jawaabno xaaladdeena deegaanka iyo xaqiiqooyinkeena.

Anshaxu wuxu ku saabsan yahay nidaamkii sare loogu qaadilaha xidhiidhka bulshada; waxay ku saabsan tahay kobcinta Falcelinta muhiimka ah si ay gacan uga geysato kobcinta qiyamka aadanaha iyo dhisida dareenka bulshada. Waxay ku saabsan tahay karti u yeelashada in si firfircoon looga jawaabo caqabadaha, cadaalad darrada iyo rabshadaha iyada oo gacan laga geysanayo soo celinta iyo beddelidda xidhiidhkii burburay. Mana aha sifeynta cidda saxan ama khaldan; laakiin waa geedi socodka si qoto dheer looga firsanayo waxa aan aaminsanahay iyo ficiladayada iyo sida ay u saameynayaan isku xidhnaanta noloshu; waxa weeye inaad si firfircoon wax u qabato si loo hubiyo in sharafta aadanaha la ilaaliyey oo la sugo.

Anshaxu waa udub dhexaadka waxbarashada nabada. Sidaa darteed, barashada nabada waa inay ka caawisaa ardayda inay ka jawaabaan baahidaas asalka ah ee ah in midba midka kale u daryeelo shuruud la'aan oo loo qalabeeyo si ay u gaadhaan go'aano iyo inay u dhaqmaan si anshax leh, iyadoon loo eegin nidaamkooda caqiidada diinta iyo dhaqanka ama qormooyin sharci ah. Waxbarashada nabadda waxay ka caawisaa ardayda inay fahmaan, ixtiraamaan oo ay u dabaaldegaan kala duwanaanta iyada oo loo marayo Falcelinta anshaxa, kasoo ka caawinaya iyaga inay dhisaan xidhiidh wanaagsan.

Barashada ku dhaqanka ficil ku saleysan mabaadi'da anshaxa iyo qiyamka ayaa aasaas u ah wada noolaanshaha nabadda. Nabaddu ma'ahan oo kaliya maqnaanshaha dagaalka iyo rabshadaha. Waa inaan u qalabeysan nahay si aan uga jawaabno caddaalad darrada iyo takoorka; ilaalinta ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo sharafta aadanaha oodhan.

Si kastaba ha noqotee, sidee ayay Itoobiyaanku uga jawaabaan caqabadaha wada-noolaanshaha iyo isla-noolaanshaha, iyagoo hubinaya in qof walba sharaftiisa la ixtiraamo? Sideen ugu wehelinaa ardayda hanaanka aqoonsiga iyo ixtiraamka kala duwanaanta? Sideen u kobcinaa qiyamka iyo kartida anshaxa iyo fikirka firsashada ee ardayda? Waxbarashada nabadu waxay ugu deeqda barayaasha agab iyo habab gaar ah oo wax looga qabto su'aalahan.

3.2 Waxbarashada Nabadda Iyo Arragtiyada Aas-aasiga ee Xuquuqda Aadanaha

Marka laga hadlayo nuxurka nabada, waxbarashadu waa tixgelinta sharafta dadweynaha.

Waxbarashada Nabadda waxaa loo adeegsadaa si loo xaqiijiyo arragtiyada xuquuqda aadanaha ku saleysan si loo hubiyo ilaalinta iyo ka qaybgelinta dadweynaha.

Shaxda 4aad: Waa maxay habka ku saleysan xuquuqda aadanaha?

Waxbarashada nabadda waxay ku saleysan tahay fikradaha xuquuqda aadanaha iyo tixgelinta sharafta aadanaha. Fikirka sharafta bini aadamku waa udub dhexaadka aaladaha waaweyn ee xuquuqul insaanka; sharaftu waa mid aan laga sooci karin xaalada bini aadamka; waa qeyb ka mid ah waxa ay ka dhigan tahay bini-aadan. Sharafta aadanaha ayaa qofka ka dhigta mid aan la beddeli karin. Sharafta aadanaha waa lama taabtaan oo xuquuqda aadanaha weligeed si sharci ah xataa looma qaadi karo. Xuquuqda aadamigu way u siman tahay dhammaan dadka oo dhan. Dadka oo dhan waxay leeyihiin xuquuq aasaasi ah oo loo siman yahay iyadoon loo eegin kala duwanaanta dhaqanka. Tani waa sababta takoorka iyo dhaqamada kale ee sida tooska ah uga soo horjeedda sharafta aadanaha sida jirdil, ula dhaqmid ka baxsan bini'aadanimada, addoonsiga, xaaladaha shaqo ee ka faa'iideysiga iyo takoorida loo mamnuucay.

Heshiiska Xuquuqda Carruurta (CRC) wuxuu bixiyaa qaab-dhismeed ku saleysan xuquuqda oo ku saabsan waxbarasho tayo leh, sida ku xusan qodobka 29-aad oo sheegaya in waxbarashada caruurta loo jiheyn doono:

- Kobicinta shakhsiyadda ilmaha, hibooyinkiisa iyo awoodiisa maskaxeed iyo jir ahaaneed ee kartidooda buuxda;
- Horumarinta ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo xorriyada aasaasiga ah, iyo mabaadi'da ku xusan Axdiga Qaramada Midoobay;
- Kobicinta ixtiraamka waalidka ilmaha, dhaqankiisa, luuqadiisa iyo qiyamkiisa, qiyamka qaran ee wadanka uu ku nool yahay ilmuhu, wadanka uu asal ahaan ka soo jeedo iyo ilbaxnimo ka duwan kuwiisa/kuweeda. Iyo
- Horumarinta ixtiraamka deegaanka dabiiciga ah.

U diyaarinta ilmaha nolol mas'uuliyad ku dheehan tahay oo ka dhex jirta bulsho xor ah, oo ay ku jirto fahamka, nabadda, dulqaadka, sinnaanta jinsiga, iyo saaxiibtinimada dhammaan dadka, qowmiyadaha, kooxaha qaran iyo kuwa diimaha iyo dadka asalkoodu ka soo jeedo. CRC waxay qiimeysaa xaqa cunuggu u leeyahay inuu si macno leh uga qaybqaato. Nidaamka wadahadalka iyo wax-isdhaafsiga ayaa ubaahan in la dhiirigaliyo taas oo caruurta leeyihiin masuuliyado sii kordhaya, ku dhaqma ixtiraam iyo muwaadinimo firfircoon inta ay horumarinayaan kartidooda dimoqraadiyada

Sababtan awgeed, si looga jawaabo caqabadaha badan ee anshaxeed ee bulshada, oo ay ka mid tahay in carruurta lagu qalabeeyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah dhisidda bulshooyinka nabdoonka ah ee loo dhan yahay, waxbarashadu waxay u baahan tahay inay gacan ka geysato horumarinta carruurta awooddooda buuxda, maahan oo keliya caqli ahaan, laakiin sidoo kale shucuur ahaan, ruuxi ahaan iyo xidhiidh ahaanba.

Shaxda 5aad: Heshiiska Xuquuqda Ilmaha

Qodobka 12aad, ee Heshiiska Xuquuqda Ilmaha wuxuu tilmaamayaa xaqa cunuggu u leeyahay inuu hadlo oo laga dhageysto arrimaha iyaga khuseeya wuxuuna caddeeyaa in: 'Ilmuhu uu si buuxda ugu diyaar garoobo inuu ku noolaado nolol shaqsiyadeed oo bulshada dhexdeeda ah, lagu soo barbaariyey himilooyinka lagu dhawaaqay Axdiga Qaramada Midoobay, iyo gaar ahaan dhinaca nabadda, sharafta, isu dulqaadashada, xorriyadda, sinnaanta iyo midnimada. 'Taas macnaheedu waa in carruurta ay xaqa u leeyihiin inay ka qaybgalaan go'aan qaadashada hababka ku habboon noloshooda iyo saamaynta go'aannada laga gaadho arrimaha la xiriira - qoyska dhexdiisa, dugsiga ama bulshada dhexdeeda.

3.3 Adeegsiga waxbarashada nabadda si loo dhiirrigeliyo ka falcelinta anshaxa

Sideen si hufan ugu taageeri karnaa ardayda inay ixtiraamaan oo u qaddariyaan kuwa kale iyo naftoodaba bini-aadam ahaan, iyadoo la adeegsanayo aragtiyo iyo fikrado ka caawiya dhisidda xidhiidhka wanaagsan ee dadka kale? Sideen uga jawaab celin karnaa dalabaadka aadanaha guud?

Waxbarashada nabadda ee horumarinaysa ka falcelinta ficilada anshaxa ayaa ka jawaabaysa baahiyaha bulshadayada kala duwan ee sii kordheysa. U nuglaanta kala duwanaanta dhaqanka iyo diinta; hubinta in goobaha waxbarashadu ay ammaan u yihiin carruurta si loo xoojiyo dareenkooda lahaansho, dareenkooda ka mid ahaansho, loona oggolaado inay noqdaan cidda ay rabaan inay noqdaan, la xidhiidhaan kuwa kale oo is beddelaan, iyo sidoo kale, inay gacan ka geystaan beddelidda adduunka ku xeeran.

Isku xidhnaanshaha iyo garashada in asalkoodu uu u qaabeysan yahay qaabka xidhiidhka ay kuwa kale ula leeyihiin ayaa ah dhismooyinka waxbarashada nabadeed gacan ka geysan kara dhismaha nabadda guud ahaan. Isku-xirnaashaha sidoo kale macnaheedu waa in carruurta iyo dhallin-yarada loo oggolaado inay qayb ka mid ah noqdaan halka ay rabaan inay dhex-galaan bulshada dhexdeeda ayna fahmaan shabakadda xidhiidhka ay la leeyihiin kuwa kale; waxay u baahan yihiin taageero si loo kobciyo garashada booskooda iyo kaalintooda. Fahanka isku xidhnaanta aadanaha iyo mas'uuliyadaha aan wadaagno waxay ka caawin kartaa carruurta iyo dhallinyarada inay ballaariyaan wareegyada ay danaynayaan.

Isku xirnaanshaha sidoo kale waxaa lagu muujin karaa erayga "Ubuntu," kaas oo si toos ah loogu tarjumi karo "Waxaan ahay Adigaa ayaan kugu ahay." Ubuntu waa falsafada Afrikaanka ah ee xoogga saareysa bini-aadamka iyada oo laga eegayo dhanka dadka kale. Ubuntu waa fikradda Afrikaanka ah ee shakhsnimadda: dadku waxay ku tiirsan yihiin dadka kale inay ahaadaan dad. Ubuntu waxay xooga saareysaa qiyamka midnimada aadanaha, isu damqashada, sharafta aadanaha iyo dadnimada qof walba, taasna waxay qabtaa in waxa qofku qof ku yahay ay tahay dadka kale.

Xudunta falsafada Ubuntu waa isku xirnaansho iyo ixtiraam dadka oo dhan. Ixtiraamida dadka diimaha, dhaqamada iyo ilbaxnimada kala duwan ayaa la horumariyaa oo la wanaajiyaa iyadoo booska qof la is dhigayo. Ixtiraamka iyo isu damqashadu waxay u horseedaa iska warhayn ballaaran, iyo ficil ku saleysan mas'uuliyad shaqsiyeed iyo mid wadareed, taas oo horseedda u furfurnaan dib u heshiisiinta.

Cutubka 4aad: Kobcinta Kartida Shaqsiyaadka Ku Hawlan Nabadeynta

Jaantuska 9: Kartida ay u baahan yihiin dhisayaasha nabada



Xigasho: waxaa laga soo qaatay Arigatou International, 2008

4.1 Iska-warqabid

Habka Wada noolaanshaha nabadu waxay ku saleysan tahay xidhiidhka dardargelinta xidhiidh wanaagsan oo caafimaad qaba, taas oo lagu gaadhi karo oo keliya fahamka qofka aan nahay iyo sida aan uga falcelino xidhiidhka. bareyaasha iyo bartayaashu waxay labaduba leeyihiin sifooyin / dabecado u gaar ah oo adag in la fahmo oo saameyn ku leh xidhiidhka midba midka kale. Iska warhayntu waxay u baahan tahay isku day dhab ah oo looso jeedo si loo baadho loona horumariyo garashada qofka dabecaddiisa, dareenkiisa, ujeedooyinkiisa, iyo rabitaankiisa. Bartayaashu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan awoodooda, Meesha ay ka liitaan, himilooyinkooda iyo nidaamyada bulshada ee taageerada si loo fududeeyo go'aan qaadashada miyir-qabka ah si loo helo xaalad nabadeed oo ku dhisan nabad iyo rabshad la'aanta

4.2 xirfadaha xidhiidhka Shaqsiyaadka

xidhiidhka dadku waa is-weydarsiga hadalka iyo adeegsiga calaamado afgangad ee u dhexeeya laba qof iyo wax ka badan. Qeexitaankan fudud ayaa tilmaamaya astaamo kala duwan. Guusheena shaqsiyadeed iyo farxadeena waxay inta badan ku xidhantahay waxtarkayaga dhanka xidhiidhka dadka. Saaxiibtinimada dhow ayaa la sameeyaa, waana in la ilaaliyaa, si ayna u burburin marka isdhexgalka aan dadka kale la sameynayno.

Sidoo kale, guusheena bulshada ee dhinaca la xidhiidhka deriska, kuwa aan naqaanno, iyo dadka aan la kulanno maalin kasta waxay kuxirantahay awooddeena aan ku sameynayno isdhexgalka iyo kaqeybgalka macnaha leh. Horumarinta xirfadaha wada xidhiidhka dadka waxay naga caawinaysaa:

Isbarasho. Wada-hadalka shaqsiyadeed wuxuu naga caawinayaa inaan wax ka barrano dadka kale, hareeraheena iyo nafteena. Markaan kala hadleyno nafsadeena kuwa kale, waxaan ka heleynaa jawaab celin qaali ah oo ku aadan dareenkeena, fikirkeena, iyo dabeecadeena. Xidhiidhka iyo jawaab celinta noocan oo kale ah, waxaan sidoo kale ku baranaynaa sida aan ugu muuqanno dadka kale - kuwa ina jecel, kuwa ina neceb iyo sababta.

Xidhiidhin: Wada-hadalka dadka dhexdiisa ah wuxuu naga caawin karaa inaan xidhiidh la yeelano dadka kale. Waxaan wadaagnaa qiyam sida saaxiibtinimo ama jacayl anagoo adeegsanayna xidhiidhka dadka; isla mar ahaantaana, waxaan falcelin iyo jawaab ka bixinnaa saaxiibtinimada iyo jacaylka dadka kale.

Saameyn. Waxay u badan tahay inaad saameyn ku yeelatid aragtida iyo dabeecadaha kuwa kale ee aad la kulanto. Waxaan jeclaan karnaa kuwa kale inay u codeeyaan qaab gaar ah, ama iibsadaan buug cusub, ama qiimeeyaan fikrado qaar.

Ciyaar :Xiriirka shaqsiyeed waxaa ka mid ah ciyaarista sidoo kale tusaale ahaan. Asxaabtaada oo aad kala hadashid waxyaabaha aad qabanaysiid dhamaadka usbuuca, kala hadalka cayaaraha, uga sheekaynta sheekooyinka iyo kaftanada.

Caawin. Barayaashu waxay ku siin karaan hagitaan dhinaca xidhiidhka dadka ayago adeegsanaya xidhiidhka ay la leeyihiin bartayaashooda. Laga yaabaa, inaan u samayno sariir ama raar saaxiib ka jabay lugtiisa isagoo ciyaaraya kubbada cagta ama aan talo siinno saaxiibkeen shaqo ku saabsan xaalad shaqo oo walaac badan. Marka la soo koobo, kartida iyo xirfadaha dhanka xidhiidhka dadka kale waa tiirarka lagu dhisi karo nabadda bulshadeena dhexdeed.

4.3 Xirfadaha Dhageysiga

Dhegeysigu, muxuu ugu yahay xirfad muhiim ah dhisayaasha nabadda?

Xidhiidh kasta oo wax ku ool ah wuxuu ka bilaabmaa isdhageysiga labada dhinac ee wada xaajoonaya. Si aan u fahano adduunka inagu xeeran oo aan si firfircoon uga qayb qaadano dhismaha nabadda iyo ka mid noqoshada qoysaskeenna iyo bulshooyinkeena, waxaan u baahanahay inaan noqono dhagaystayaal wanaagsan. Dhageysigu maahan oo keliya awoodda lagu helo farriimaha, laakiin sidoo kale waa awoodda lagu turjumo farriimaha si looga fogaado isfaham daro. Dhageysigu waa aasaaska dhismaha xidhiidhka aadanaha iyo nabada waana furaha lagula xiriiro aadanaha intiisa kale.

Ma baran karnaa sida wax loo dhageysto?

Dhageysigu waa xirfad taasoo suurtagal ah in la barto sida loo noqdo dhagayste wanaagsan. Dhageysigu waa talaabada ugu horreysa ee loo qaadayo naxariista, qaddarinta iyo aqbalaada kuwa kale; Dhegeysigu waxa loogu talagalay dhisidda nabadda iyo dhammaan dadka oo dhan, waa tallaabada ugu horreysa ee aad ku gaadhi karto guusha dhanka xidhiidhka dadka kale iyo la macaamilidda dadka kale.

Dhageysigu wuxuu si gaar ah muhiim ugu yahay bareyaasha booskooda hormuud ahaan, dadaalkooda ku aadan kobcinta awooda ardayda, inay fahmaan arrimaha ku hareeraysan iyo inay si firfircoon wax uga badalaan bulshadooda. Barayaashu waxay u baahan yihiin inay si dhab ah u fahmaan ardayda, baahidooda iyo xaaladooda si ay ugu weheliyaan safarka ay gacan uga geysanayaan isbeddelka iyo nabad-dhisidda. Dhageysiga wax ku oolka ahi ma sahlana in la barto oo wuxuu u baahan yahay dulqaad iyo ku celcelis, ku celcelis, ku celcelis! Hoos waxaan ku soo bandhigaynaa toban talooyin oo wax ku ool ah iyo hawl gal kooxeed si kor loogu qaado xirfadaha dhageysiga.

Shaxda 6: Tilmaamaha lagu kobcinayo xirfadaha dhageysiga wax ku oolka ah

1. U kuurgal shaqsi hadlaya. adigoo meesha ka saaraya waxyaalaha uu ku mashquulinayo.
2. Dulqaad yeelo: dhageysiga wanaagsan wuxuu u baahan yahay waqti.
3. Hawl gali dareemayaasha oo dhan: dhageysigu wuxuu u baahan yahay maskax ahaan, muuqaal ahaan, maqal ahaan iyo jidh ahaan inaad foajignaato.
4. Ka dhageyso qalbiga: dhageysigu waa furaha ixtiraamka, u damqashada iyo aqbalida.
5. Booska qofka hadlayaa isgee si aad si dhab ah ugu dhageysato uguna fahamto.
6. U muuji qofka hadlaya inaad dhageysaneysid oo aad fahmeysid adoo adeegsanaya calaamadaha aan hadalka aheyn (dhoola cadeynaya, madaxa oo aad lushid) iyo calaamadaha hadalka ('haa', 'Waan fahansanahay waxaad u jeedo') oo bixiya jawaabo dhiirigelin leh.
7. Diyaar u noqo inaad weydiiso su'aalo aad ku cadeynayso fahankaaga si loo hubiyo macluumaadka la gudbinayo lagana fogaado isfaham la'aanta.
8. Diyaar u noqo inaad dib ugu soo ceshato waxa qofka hadlayaayi u lehay uguna dar suaalo aad si kale u dhigtay; tani way ku caawin doontaa inaad si fiican u fahanto oo aad u qeexo arimahaan.
9. Ha u boodin gunaanadka ee weydi su'aalo si u kugu kala cadeeyo wax ama dib ugu celi si loo xaqiijiyo in fahankaagu sax yahay. Fahanku micnaheedu maaha inaad la heshiiso qofka hadlaya.
10. Ka feji noow kala duwanaanta dhaqanka oo ay ka mid tahay kala duwanaanta jinsiga iyo diinta iyo eexdadaa iyo fikradahaaga.

4.4 Xirfadaha xidhiidh dhaqameedka ee Itoobiya

Waxaa jira sababo badan oo xirfadaha isdhexgalka dhaqamada ay muhiim ugu yihiin dhismaha dhaqanka nabadda ee Itoobiya. waxaana kamid ah Afartan , oo kala ah (1) nabadda, (2) dhaqaale iyo tikniyoolajiyad, (3) ka-warhaynta nafta iyo (4) anshaxa, ayaa hoos sii faahfaahsan loogu qeexi doonaa

Nabadda

Arrinta ugu muhiimsani waa tan: Miyaan baran karnaa, Anagoo shaqsi ahaan, iyo koox-ahaan kala duwan oo ka kooban jinsiyo, da', Qowmiyado, luqado iyo diimo kala duwan, inaan wada noolaano? Sooyaalkeenii hore iyo taariikhdeenii dhawaydba si dhib yar ayay rajo ugu yihiin Xidhiidhka ka dhexeeya kooxaha dhaqamada kala geddisan, laga soo bilaabo xilliyadii ugu horreeyay ilaa maanta, inta badan wuxuu keenaa kala-fogaansho. Nabad la'aan, mustaqbal ma lihin! Isdhexgalka dhaqamada kala duwan, halkaas oo kooxaha dhaqamada kala duwan ay si nabad ah ugu wada xidhiidhaan midba midka kale, waa aasaaska nabadda Geeska Afrika iyo waddamada ku xeeran.

Dhaqaalaha iyo Tiknolojiyadda

Xirfadaha xidhiidhka dhaqamada kala duwan ayaa ah xirfadaha lagama maarmaanka u ah isbeddelada hadda ka socda iyo kuwa mustaqbalka ee goobta shaqada ee heer deegaan iyo

heer calami ah. Dhallinyarada doonaya inay ganacsi ku yeeshaan dhaqaalaha kordhaya ee adduunka waa inay horumariyaan xirfadaha isdhexgalka. Haddii shirkaduhu ay iibinayaan wax soo saar iyo adeeg heer qaran iyo caalami, markaa waxay u baahan doonaan shaqaale isku dhafan oo leh aragtiyo iyo khibrado kala duwan. Waxay ubaahan doonaan maamuleyaal sare oo fahmaya luuqadaha iyo dhaqamada kaladuwan ee Itoobiya iyo wadamada ku xeeran. Waxaan ku jirnaa xilligii dadka, fikradaha, iyo ganacsatadu ay dhammaantood isku xirnaayeen. Awoodda xidhiidhka iyo is dhexgalka dhaqamada badan ee Itoobiya waa mid muhiim ah, gaar ahaan jiilasha soo socda. Dowladda Itoobiya iyada oo loo marayo Wasaaradda Haweenka iyo Dhallinyarada waxay ku abaabuli kartaa dhallinyarada barnaamijyada isdhaafsiga dhaqamada inta lagu jiro waqtiga dheer ee nasashada dugsiya si jiilalka mustaqbalka ay u bartaan midba midka kale dhaqankiisa

Iska-warqabid

Mid ka mid ah sababaha ugu muhiimsan ee wax loo barto isdhexgalka dhaqamada kala duwan ayaa ah in u ka warqabo qofku dhaqankiisa iyo asalkiisa ahaansho iyo taariikheed. Mabda 'ahaan, barashada isdhexgelka dhaqamada kala duwan waxay kubiilaabaneysaa sahaminta dhaqan kale ah xaqiiqaduna waxay ku dhamaaneysaa sahaminta dhaqankiisa. Si kale haddii loo dhigo, markaynu barano oo aan qadarinno dhaqammada kale waxaynu ku baraarugaynaa dhaqankeenna. Haddii aan ixtiraamno dhaqanka dadka kale, waxaan ka rajeyneynaa kuwa kale inay ixtiraamaan kuweenna. Qaddarinta iyo ixtiraamka noocan ahi waa aasaaska dhismaha iyo kor u qaadida dhaqanka nabadda.

Anshaxa

Ku noolaanshaha adduun dhaqamo kala duwan (halkaas oo dad ka soo kala jeeda dhaqamo kala duwan ay ku nool yihiin iyo / ama ka wada shaqeeyaan) waxa u wataa arrimo anshaxeed oo dhib badan oo lagu xallin karo iyada oo la adeegsanayo barashada isdhexgalka dhaqamada nabadeed. Anshaxa waxaa loo maleyn karaa inu yahay barashada mabaadi'da anshaxa ee ka gacan geysata maamulka hab-dhaqanka dadka iyo kooxaha. Mabaadiidaani waxay inta badan ka soo baxaan aragtida bulshada ee waxa wanaagsan iyo waxa xun. Si loo horumariyo xirfadaha isdhexgalka dhaqamada, waxaad u baahan tahay inaad diiradda saarto ku-dhaqanka is-Falcelinta, dhageysiga codadka kuwa kale iyo yeelashada dareen caddaaladda bulshada.

4.5 Waxyaabaha Dabiiciga ah ee ka Qayb-qaata Dhismaha Nabada

Dhisida iyo kor u qaadida dhaqanka nabada waxay si weyn ugu tiirsan tahay isku xidhnaanta shucuubta dhaqamada kala duwan iyo deegaankooda. Xidhiidhka ka dhexeeya shakhsiyaadka iyo noolaha ay hodanka ku tahy Itoobiya ayaa sidoo kale ah tiir lama huraan u ah halganka lagu tirtirayo saboolnimada iyo kor u qaadida dhaqanka nabadda.

Shaxda 7aad: Geedka iyo laamaha oo ah aaladda nabadaynta

Geedka weyn ee qudhaca waa astaan nabadeed oo haweenku u adeegsadaan qaybo badan oo ka mid ah dalka Itoobiya sida astaamaha Sinke ee maamulka haweenka Oromada, Siqqo ulaha nabadeed ee haweenka Sidama.

Wangari Maathai, oo ah aqoonyahan Kenyan ah oo ku guuleysatay Nobel Prize 2004, waxay sharraxaysaa sida geedku astaan ugu noqday nabadda iyo xallinta khilaafaadka waddankeeda. Waxay odayaashu ul ka qaadeen geed oo ay kala dhex dhigeen labada dhinac ee is khilaafsan, taaso sababtay inay raadsadaan heshiis (Maathai, 2004)

Sidaa awgeed, xirfadaha xidhiidhka dhaqamada kala duwan oo ay ka mid yihiin adeegsiga astaamaha ulaha ayaa door aad u weyn ka ciyaara dhismaha iyo kobcinta dhaqanka nabadda ee Itoobiya iyo dalalka ku xeeran.

4.6 Xirfada Fikradaha Xaasaasiga ah

Fikirka xasaasiga ah waa awoodda si firfircoon wax loogu su'aali karo si u unoqdo qof u furan fikrado badan, si u fahmo aragtida dadka kale iyo ra'yigooda, iyo inu la looltamo aragtida shaqsiyadeed ee adduunka, iyadoo uu ka baqayn inuu lumiyo asalkiisa.

Fikirka xasaasiga ah ee dhisida nabada sidoo kale waa awoodda in laga warqabo xaalada guud: arimaha khaaska ah ee isku dhaca, sababaha asalka u ah isku dhaca, awoodda in la arko isku ekaanshaha kooxaha kala duwan ka dhexeya iyo marka laga soo tago intaa, si loo fahmo sida aragtideena iyo dabeecadeheena ay u qaabeynayaan xaqiiqadeenna.

Fikirka xasaasiga ah waa geedi socod dhinacyo badan leh, oo ku lug leh xirfado iyo aragti kala duwan. Waxay inta badan diiradda saartaa:

- kalasaarida mowqifka, doodaha iyo gunaanaka dadka kale.;
- Qiimeynta cadeymaha oo dhinacyo aragti kala duwan ah;
- isbarbardhiga doodaha iyo cadeymaha iska soo horjeeda si cadaalad ku dheehan tahay;
- akhrinta inta udhaxeysa odhaahyada iyo doodaha labada si loo arko waxa ku dhex qarsoon iyo in la garto fikradaha beenta ah ama xaqdarrada ah;
- Aqoonsiga farsamooyinka loo isticmaalo in mawqifyada qaarkood looga dhigo kuwo kusoo jiita marka loo eego kuwa kale, sida ra'yiga beenta ah iyo aaladaha qancinta ee beenta;
- Ka fal-celinta arrimaha qaab habeysan oo macquul ah lana fahmi karo
- Soo saarista gunaanad ku saabsan in doodaha ay ansax yihiin oo qiil loo heli karo iyadoo lagu saleynayo caddeyn wanaagsan iyo fikrado macquul ah;
- Aragtida qaab habeysan, cad, oo macquul ah oo qancisa kuwa kale oo aad usoo bandhigtid.

Tilmaamaha aas-aasiga ah ee fikradaha muhiimka ah

Fikirka xasaasiga ah waxaa ka mid ah saxsanaanta, khalad la,aanta iyo u heellananta helitaanka jawaabta ugu fiican ee su'aasha. Waxaa ka mid ah:

1. U fiirsashada faahfaahinta: waqti qaado si aad u ogaatid tilmaamo yar yar oo iftiiminaya micnaha guud ee arrinta.
2. Kala soocida isbeddellada iyo qaababka: tani waxay ku imaan kartaa khariiradeynta macluumaadka, falanqaynta xogta.
3. Ku celcelin: ku noqnoqoshada isla aaga dhawr jeer si loo hubiyo inaanay waxba seegin.

Sida loo dhiirgaliyo fikirka xasaasiga ah

Barayaashu waxay ku dhiiri gelin karaan fikirka xasaasiga ah iyagoo:

- Abuuraya goobo loogu tala galay isdhexgal iyo wada hadal macno leh;
- Adeegsanaya su'aalo adag oo qotodheer si loo yeesho wadhadallo awood leh;
- U oggolaanaya ardayda inay wax ku weydiyaan oo ayna uga jawaabaan iyo inay si joogta ah u weydiyaan – “sabab”;
- Adeegsanaya agabyo iyo habab kaladuwan oo habka waxbarid oo la xidhidha nolosha iyo khibradaha ardayda;
- Adigoo eegaya aragtiyada kaladuwanaanshaha: waa in aad ka eegtid xogaha iskumidka dhinacyo;
- Meel iska dhigaya waxyaabaha shakhsi ahaaneed, waxaad aaminsan tahay iyo waxyaabaha aad xiiseyso hal dhinac iyadoo ujeedadu tahay in la helo faham qoto dheer; iyo
- Tixgelinta saameynta iyo cawaaqibka fog: waxa u muuqda fikrad wanaagsan muddada dhow, tusaale ahaan, waxay yeelan karaan saameyn muddo dheer ah oo aan aad loo jeclayn.

Lix-tallaabo oo fikirka xasaasiga ah

Qorayaal kala duwan ayaa adeegsada waxyaabo kala duwan si ay u sharxaan lixda talaabo ee fikirka xasaasiga ah. FAO (1990) waxay soo jeedinayaan talaabooyinka soo socda: (1) u kuurgalka xaalada, (2) aqoonsashada dhibaata, (3) soo jeedinta xalalka, (4) qiimeynta xalalka la soo jeediyay, (5) ku talinta xalka ugu fiican iyo (6) ficilka . Lixda tallaabo ee ugu ballaaran lana aqbalay ee barashada muhiimka ah waa "Bloom's Taxonomy of Learning Domains (1956)":

- **Aqoon:** Qeex, qor, sharax, kala saar, muuji, magac sii iyo xigasho
- **Fahamka:** Sharax, soo koob, kala sooc, ka dood oo turjuma
- **Adeegsi:** Tusaalee, isticmaal macluumaadka, isticmaal, muujin,tusid, xalin, kala saar, soo ogaansho
- **Falanqaynta:** Jajabinta, kala soocida, kala sooca, kala-mudnaanta, amar, cadeyn, kala dambaynta, kala sooca, habeynta iyo qaybinta


- **Curin:** isku-dhaf, wax ka beddel, dib-u-habeyn, beddel, qorshayn, hal-abuur, nashqadeyn, iskaashi
- **Qiimeyn:** Go'aami, darajo, tijaabin, cabbiro, ku talin, soo gabagabeyn, isbarbar dhig, qiimeyn iyo difaac.

Jaantuska 10^{aad}: Qaybaha waxbarashada ee Bloom's Taxonomy



Nidaamka go'aan qaadashada ee Jaantuska 10 aad wuxuu leeyahay qaybo ka mid ah Bloom's Taxonomy iyo qaar ka mid ah aragtiyo kale. Go'aan qaadashada waxaa ka mid ah falanqaynta dhibaatooyinka iyada oo la qeexayo, la soo saarayo xalal kale, kadibna la miisaamayo xalalka oo laga xulanayo xalka ku haboon dhibaata taagan, hirgalinta iyo daba galkeeda. Way fududahay in la arko sida fikirka xasaasiga ahi u yahay aasaaska go'aan qaadashada saxda ah.

Jaantuska 11: Habka go'aan qaadashada



Xigasho: waxaa laga soo xigtay Covey, 2013

4.7 Xirfadaha Dhex-dhexaadinta

Dhexdhexaadinta waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo ama laga saaro dhibaatooyinka xidhiidhka gorgortanka, sidaa darteedna, si loo fududeeyo dhammaadka dhibaataada. Waa hawl dhex dhexaad ah oo qof saddexaad sameeyo oo hadafkiisa koowaad u yahay in la gaadho tanaasul ama dejiinta arrimaha. Qaybta saddexaad badanaa waxay marka hore baaraan oo ay qeexaan dhibaataada ka dibna guud ahaan waxay u wajahaan koox kasta gooni gooni ayagoo wadda talooyin labada dhinacba u dan ah . Dhexdhexaadintu waxay ka dhici kartaa isku dhacyada u dhexeeya dawladaha, gobollada dhexdooda, kooxaha gobollada, ururada, bulshada iyo shakhsiyaadka dhexdooda.

Shaxda 8: Astamaha waaweyn ee xirfadaha dhexdhexaadinta

- Dhexdhexaadintu waa qayb ka mid ah maaraynta isku dhaca nabadeed.
- Dhexdhexaadintu waxay ka kooban tahay faragelinta shisheeye - shaqsi, koox, ama urur, oo leh qiyam, kheyraad, iyo dano u gaar ah - isku dhac u dhexeeya laba dhinac ama ka badan.
- Dhexdhexaadintu qasab ma aha, mid aan qasab ahayn in la adeeco oo aan rabshad lahayn weeye.
- Dhexdhexaadiyeyaashu waxay uga hawl galaan khilaafka si ay u beddelaan, u xalliyaan, wax uga beddelaan, ama ugu yeeshaan saamayn xoogaa si ay u helaan xalal aan rabshad lahayn
- Dhexdhexaadiyeyaashu waxay la yimaadaan eex, fikir, aqoon, dhaqaale, iyo danaha kooxda / ururka ay matalaan. Dhexdhexaadiyeyaashu waxay inta badan leeyihiin fikrado iyo ajandayaal u gaar ah oo ku saabsan khilaafka su'aashu ka taagan tahay.
- Dhexdhexaadintu waa nidaam loo maareyo isku dhaca oo ikhtiyaar ku salaysan.. Shaqsiyaadka ku lugta leh ayaa xakameynaya natijada (iyo had iyo jeer haddi ayn habka) khilaafkooda iyo xorriyadda ay ku aqbalaan ama ku diidaan dhexdhexaadinta ama soo-jeedinta.
- Dhex dhexaadintu badanaa waxay shaqeysaa markii loo baahdo (ad-hoc)

4.8 Xirfadaha Wada-xaajoodka

Waan waantu waa geedi socodka ay dhinacyada isku dhacu ku doonayaan in ay ku dejiyaan ama ku xalliyaan khilaafaadkooda, iyada oo aan cid saddexaad soo dhex gelin. Waan waanta waxay leedahay macno kala duwan; qaar baa u arka geedi socodka waan waanta halxiraale la xallinayo; kuwa kale waxay u arkaan inay tahay ciyaar waan waan ah oo ay ka mid tahay isweydaarsi; qaar baa u arka inay tahay hab lagu heshiisiinayo khilaafaadka ka dhex jira ururada dhexdooda iyo kuwa u dhexeeya; welina qaar kale waxay u haystaan inay tahay hab lagu fuliyo siyaasadaha dawladda. Waxa loo baahan yahay si loogu guuleysto geedi socodka waan waanta adag ayaa ah in dhinacyada oo dhani ay go'aansadaan:

- 1) Inay galaan waan waan ayaa uga wanaagsan iyaga oo aan waan waan gelin;
- 2) Inay heshiis gaadhaan ayaa uga wanaagsan iyaga oo aan heshiis gaadhin; iyo
- 3) Inay Fuliyaan heshiis ayaa uga wanaagsan iyaga oo aan fulinin heshiis.

Dhexdhexaadinta iyo waan waanta ayaa ah aalado muhiim u ah yareynta isku dhaca Itoobiya. Qowmiyada Ari dhexdooda, dumarku waxay xirtaan dharka nabada, oo loo yaqaan 'koysha'. Maradaan dheer, oo laga sameeyay qolofa geed, waxaa inta badan lagu duuduubaa dhexda dumarka marka la cayaarayo ee nabadda Loo debaaldegayo. Haweenku sidoo kale waxay ballanqaadeen nabad iyagoo dhigaya maro dhaqameedkoodii dhulka. Haddii haweeney ay gogol dhigto dhulka waxay tilmaan u tahay inay rabto dhinacyada dagaalamaya inay isu yimaadaan si ay uga wada hadlaan isku dhacooda (IRR, 2009, p. 7-8).

Garqaadid

Gar-qaadiddu waa "u gudbinta khilaafka qof saddexaad oo aan eex lahayn oo ay u qoondeeyeen dhinacyada is-khilaafay, kuwaas oo horay u oggolaaday in loo hoggaansamo go'aanka - go'aanka la soo saarayo ka dib dhagaysiga labada dhinacba ay fursad u leeyihiin in la maqlo" (Shirkadda Adeegga Dammaanadda Xirfadleyda, 2016).

Waa inaan ka abuurnaa fursado iskaashi, kaliya maahan kuwa ka yimaada kooxaha la midka ah, laakiin sidoo kale waa inaan ka abuurno kooxo loo arki karo inay ka duwan yihiin oo gooni u yihiin. Kaliya habka waxbarasho ee isbedelka leh iyo hanaan waxbarasho oo gaar ah ayaa taageeri kara fursadaha barashada ee ku lugta leh waxayna ka caawin kartaa barayaasha inay ka gudbaan caqabada ugu weyn ee waxbarashada dhismaha nabada, ka guurista barashada aqoonta cusub si kor loogu qaado ficilka iyo kaqeybgalka geedi socodka nabadeynta fasalka gudahiisa iyo dibadiisa.

Nidaamkan gaarka ah ee waxbarashadu wuxuu xaqiijinayaa in bartayaashu ay uga gudbaan kasbashada aqoonta, xirfadaha iyo kartida una noqdaan kuwo si firfircoon uga qaybqaata dhismaha nabadda ee bulshadooda. Talaabooyinka gaarka ah ee nidaamka barashada waxaa loogu talagalay in lagu hago barayaasha lana hubiyo in ardayda ay si firfircoon uga qeyb qaataan khibrada barashada. Iskudaygu wuxuu u horseedaa kaqeybgalayaasha nidaamka daahfurka, natiijada ka soo baxda taas oo horseedayna Falcelinta cusub iyo barashada joogtada ah. Nidaamka waxbarashadu wuxuu u adeegaa tusaale u ah diyaarinta barnaamijyada iyo waxqabadyada iyo inuu ka dhigo kuwa wax barta inay si joogta ah uga warqabaan waaya-aragnimadooda waxbarasho.

Sawirka soo socdaa wuxuu muujinayaa tarjumaad wax-ka-bedelka qaab muuqaal ah (Arigatou International, 2008). Waxay ku bilaabataa dhiirrigelinta barashada ama ku lug lahaanshaha hawsha, Hawshu waxay maraysaa sahamin, wadahadal, daahfurid, milicsi iyo ficil. Waxaa kale oo xusid mudan in howshu aysan toos ahayn, sidoo kalena aanay xidhiidhsanayn. Horey iyo gadaal ayey u socon kartaa, maadaama ay ku saleysan tahay helitaan.

Sawirka 12: Qaybaha habka waxbarasho ee Isbadalka leh



DHIIRIGELIN

Sababta Ardayda loo hawlgelinayo ee looga qayb-gelinayo maxay tahay? Bareyaasha waxaa looga baahan yahay inay dhisaan dhirigelin kasoo maaxda gudaha iyo ta banaankaba ee ardayda si loo hawlgaliyo iyo inay fahmaan sababta ay mawduuc ama hawlgal gaar ah uu muhiim ugu yahay nabad dhiska. Hawlgalada dhirigelinta leh waxay abuuraan xiiso ayna dhaliyaan rabitaan xoogan oo ku dhasha dhanka ardayda si ay u ogaadaan oo ay u sahamiyaan arin gaar ah.

SAHAMINTA

Wajigaan inta lagu jiro, baraha ayaa waxogaa macluumaad ku saabsan mawduuca ama tilmaamo gaar ah siinaya taasoo ku saabsan hawsha la qaban doono, u ogolaanshaha ardayda si ay u sahamiyaan mawduuca

WADA HADAL

Baruhu wuxuu dhisayaa meel nabdoon oo wadahal iyo dood ku saabsan taasoo u ogolaanaysa ardayda inay wadaagaan mowqiyadooda, isla markaana isla wakhtigaas dhageystaan fikradaha kala duwan. Marxaladani waxay muhiim u tahay horumarinta fikirka muhiimka ah. Barayaashu waxay hoos usii gali karaan wadahalalka iyadoo weydiinaya su'aalo.

DAAHFUR

Wadahalal miro dhal ah kadib, bartayaashu waxay dareemayaan inay heleen habab cusub oo feker iyo waliba inay iyagu naftooda wax ka barten. Xaaladaha qaarkood, waxay sidoo kale qaataan fikradaha kala duwan. Tani waa markay ardeydu haystaan wakhti dheer oo ay ku dardargeliyaan xaqiijinta daahfurka xiriirka cusub ee ay dadka la yeeshaan

FALCELINTA

Aqoonyahanku wuxuu ka caawiyaa ardayda si ay uga falceliyaan waaya-aragnimada iyo waxyaabaha ugu muhiimsan ee laga qaato mowduuca la baaray Sideen ula xiriirinaa tan macnaheena? Sideen uga guurnaa wax ku barashada fasalka una guurnaa nabada bulshadayada? Horumarinta fikirka xasaasiga ah wuxuu u baahanyahay geedi socod socda ee isbadal shaqsiyeed waana sababtaas sababta hanaanka waxbarashadu uu xooga saarayo muhiimada Falcelinta oo ah daqiiqad muhiim ah oo u sahlaya bartaha inuu sahamiyo xaaladooda murugsan iyo sida go'aanadooda oo dhan u saameeyaan naftooda iyo kuwa kale

FICIL

Ficilku waa laga yaabaa, inuu yahay qaybta ugu muhiimsan ee barashada nabad-dhisidda. Sideen ugu dhiiri galineynaa ardayda inay ka fekeraan siyaabo firfircoon oo ay ugu lug yeelan karaan meel ka baxsan hareeraha si ay u bedelaan bulshadooda, heer shaqsiyeed iyo mid wadareed?

Xigasho: Arigatou International, 2008

Nidaamyoo gaar ah ayaa lagu taliyaa si loo helo goobo loogu talagalay dhiirrigelin, isdhaafsi, isdhexgal, la kulan, daah furid, fikir muhiim ah, Falcelinta iyo ficil. Qaababkani waxay baraan bartaha habraaca barasho ee iskiis u riixa, oo loo qabto dadka kale. Waxay sidoo kale gacan ka geystaan horumarinta xirfadaha, kor u qaadaan aqoonta ardayda, iyo kobcinta dabeecadaha iyaga ku dhiirrigeliya inay bartaan inay ku noolaadaan oo ay ku dhaqmaan bulsho badan.

Waa doorka bare kasta inuu doorto habka ugu habboon ee kooxda ardayda. Tilmaamahan wuxuu soo bandhigayaa talooyin dhowr ah oo ku saabsan waxqabadyada iyo hababka cutubka ugu dambeeya. Kuwani waxaa loo isticmaali karaa iskudhaf iyo / ama loo waafajin karaa xaalada guud ee Itoobiya iyo da'da kaqeybgalayaasha. Xusuusnow, kuwani waa talo soo jeedin oo kaliya iyo in barayaashu ay xor u ahaadaan la qabsiga iyo dib u qaabeynta marka loo baahdo.

Waxbarashadu si gaar ah ayey u dhici kartaa, laakiin waa iskaashi lala yeesho kuwa kale in dhalinyaradu awood u yeeshaan inay ka hor yimaadaan aragtiyada, horumariyaan fikradaha cusub, ayna ballaadhiyaan aragtidooda iyaga oo sahaminaya aqoonsigooda. Ka qaybqaadashada iyo wada shaqeynta barashada waxay u baahantahay fursad si buuxda looga wada qeybqaato qof walba, dhaqamada loo dhan yahay, habab iyo farsamooyin kaladuwan oo isku duubnaansho, iyo ixtiraamida kaqeybgale kasta habka waxbarashadiisa iyo la dhaqanka.

Sawirka 4: Barashada oo ficil lagu muujinayo



Dhallinyarada iyo carruurta waxay doortaan oo ay mas'uul ka yihiin waxbarashadooda, oo ay ku shaqeeyaan xiisaha ay leeyihiin iyo dhiirrigelinta u gaarka ah. Waa inay ka warqabaan safarka ay si wadajir ah ula bilaabayaan barayaasha. Waa inay xor u ahaadaan sahaminta, ka qaybgalka, joojiyaan, ka fikiraan, ka doodaan oo su'aalo weyddiyaan. Ardayda iskood iskuxiran waxay kuxiranaan doonaan wadahadalada gudaha iyo dibada ee noloshooda, waxayna uheli doonaan dhiirgalin ujeedo gaar ah ee barashada. Masuuliyada baraha ayaa ah inay siiso goobo ay caruurta iyo dhallinyarada si firfircoon uga qayb qaadan karaan horumarinta barnaamijyada, soo jeediyaan talooyin iyo adeegsiga agabyada ay yaqaanaan. In kasta oo barayaashu mas'uul ka yihiin qeexidda ujeedooyinka cad, dejinta goobta iyo fududeynta barnaamijka, natiijooyinka iyo geeddi-socodka waxbarashadda waxaa horumarinaya ugu horreyntii ardayda.

6.5 Ku dayasho Mudan

Dhammaan dadku waxay u baahan yihiin shaqsiyaad tusaale inoo noqda oo aan si fiican wax ugu barano. Barayaashu waa mid kamid ah dadka lugta ku leh ee ugu muhiimsan noloshu dhallinyarada markay tahay fududeynta aqoonta, aragtiyada iyo qiyamka. Intaas waxaa sii dheer, barayaashu sidoo kale waxay dhiirrigeliyaan ardayda waxayna inta badan noqdaan kuwo lagu daydo oo muhiim ah. Yaan xusuusan saameynta uu kugu yeeshay ugu yaraan mid ka mid ah macalimiintaadii dugsigu?

Marka la fulinayo barnaamijyada iyo waxqabadyada iyadoo la adeegsanayo habka waxbarasho ee isbedelka leh, ku dayashada waxay noqoneysaa udub dhexaadka geeddi-socodka waxbarashada. Baruhu wuxuu u baahan yahay inuu:

- 1) Muujiyo aragtiyada, dabeecadaha iyo ficilada anshaxa

- 2) Muujiyo is faham, ixtiraam iyo qadarinta dadka kale
- 3) Noqdo mid soo dhaweynaya kala duwanaanta
- 4) Muujiyo iswaafajinta ereyada, dabecadaha iyo ficilada
- 5) Noqdo mid lagaga daydo anshaxa & damiirka wanaagsan ee sixitaanka ardayda taasoo saameyn ku yeelan karta dhaqankooda iyo dabecadooda

Bareyaasha waxaa lagu casuumay inay had iyo jeer ka turjumaan saameynta anshaxeed ee dhaqankooda iyo inay ku dhaqmaan fikradahaas, sida kuwa ardayda loogu martiqaaday inay sidaas sameeyaan. Tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay barayaal ahaan, waxaan u baahanahay inaan tusaale u soo qaadano guuldarrooyinka iyo u nuglaanta sida ugu badan ee aan u moodno guusha, maadaama kuwani ay yihiin qaybo muhiim u ah xaaladda aadanaha. Barayaashu waxay tusi karaan ardayda inay khaladku yahay qayb caadi ah oo ka mid ah barashada.

6.6 Hanaanka Ka wada shaqaynta Arrimaha guud ee Dugsiga

Waxbarashada nabadda waxay ku baaqeysaa qaab dhammaystiran oo aan ku koobnayn xiriirka ka dhexeeya ardayda iyo barayaasha. Taas bedelkeeda waa mid dhameystiran oo loogu talagalay in lagu lug yeesho dugsiga oo dhan sida ku lug lahaanshaha ardayda, macalimiinta iyo waalidiinta maamulka dugsiga iyo qorsheynta. Habka Iskuulka oo Dhan ayaa tixgelinaya sida dhaqamada, qaabdhismeedka, farsamooyinka edbinta, maareynta iyo siyaabaha loo wajaho xalinta khilaafaadka ka dhex jira bulshada dugsiga oo dhan ay si weyn gacan uga geystaan bedelida ardayda.

Dhamaan Iskuulka wuxuu hubiyaa in fursadaha waxbarashadu ay kuxiran yihiin ka mid noqoshada, muwaadinimada dimoqraadiga ah, xorriyadda hadalka, ixtiraamka kala duwanaanshaha iyo bedelka iskudhaca aan gacan kahadalka lahayn, oo aan ku koobnayn oo keliya mawduuca waxbarashada nabadda. Taa badalkeed, mabaadi'da dhismaha nabada iyo waxbarashada nabada ayaa qayb ka ah iskuulka oo dhan iyo bulshada ku hareeraysan. Tan macnaheedu waxa weeye in Habka Dugsiga oo Dhan uu ka kooban yahay dhammaan maadooyinka dugsiga, dhammaan shaqaalaha dugsiga, macalimiinta iyo ardayda oo wuxuu taabanayaa dhammaan qaybaha nolosha dugsiga.

Habka Iskuulka oo Dhan wuxuu kobciyaa jawi waxbarasho oo qof walba oo iskuulka ka mid ahi dareemo amaan iyo soo dhaweyn, iyadoon loo eegin garashada iyo awooda jir ahaaneed, luqadda, isirka, asalka dhaqameed, asalka diinta, jinsiga, aqoonsiga jinsiga ama da'da. Marka la eego ficil ahaan, tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay in dugsigu u baahan yahay inuu ardayda siiyo fursado ay ku bartaan nabadda iyo dimuqraadiyadda. Waxqabadyada ku lug leh ardayda go'aan qaadashada, geediga waxqabad ee hoggaanka iyo maareynta dugsiga maalinlaha ah

ayaa muhiim u ah kobcinta kaqeybgal macno leh. Hawlaha sida golayaasha ardayda ayaa sidoo kale waxtar u leh dib-u-dhiska qaab-dhismeedka bulshada iyo kobcinta aqoonta dimuqraadiyadda.

Dhamaan Iskuulka wuxuu ku lug leeyahay dhamaan xubnaha bulshada dugsigu, oo ay ku jiraan ardayda, macalimiinta, shaqaalaha maamulka, saraakiisha dowlada, waalidiinta, ururada macalimiinta waalidiinta iyo xubnaha kale ee bulshada. Kaliya maahan waxa ku dhaca manhajka, waxay ku saabsan tahay iskuulka oo dhan, iyadoo ku doodaya in waxbarashadu aysan ku dhicin oo keliya manhajka rasmiga ah, laakiin sidoo kale iyada oo loo marayo ardayda 'waaya-aragnimada maalinlaha ah ee nolosha dugsigu iyo wixii ka dambeeya. Waxay u baahan tahay iskuulada inay wax ka qabtaan nabadeynta iyo bad-qabka shaqaalahooda, ardayda, waalidiinta / daryeelayaasha iyo bulsho weynta iyadoo loo marayo saddexda qaybood ee muhiimka ah ee kawada shaqeynaya si wadajir ah si loo gaaro xiriir wanaagsan iyo natiijooyinka waxtar leh.

- **Manhajka waxbarashada**
- **Dhaqanka iyo Deegaanka:** deegaanka dulleed, asluubta iyo qiyamka, siyaasadaha iyo qaabdhismeedyada loo sameeyay si loo abuuro jawi ku habboon nolosha, waxbarashada iyo shaqada.
- **Wadashaqeynta iyo xiriirka bulshada:** iskaashi gudaha ah oo lala yeesho waalidiinta, shaqaalaha iyo ardayda iyo iskaashiga dibada ee iskuulada kale, dowlada iyo ururada aan dowliga ahayn.

Tan ugu muhiimsan, dadaallada dhiirrigelinta gaarsiinta bulshada waxay u baahan yihiin in si buuxda loo dhexgeliyo, loo taageero loona dhiirrigeliyo inay qayb muhiim ah ka yihiin waxbarashada nabadda, halkaas oo waalidiinta, hoggaamiyeyaasha bulshada, saraakiisha dowladda iyo barayaashu ay ka ciyaaraan doorar muuqda oo ku dhiirrigelinaya Dhammaan Iskuduwaha Dhismaha nabadda.

Cutubka 7aad: Go'aan Qaadashada

7.1 Kamid Noqoshada Xubnaha Isbeddel Doonka ah

Ujeedada waxbarashada nabadda ee isbeddelka leh ayaa ah in la dhiirgeliyo ardayda iyo barayaasha inay kamid noqdaan wakiillada isbeddelka islamarkaana si wanaagsan u fakaraan si ay diyaar ugu noqdaan uguna istaagaan arrimaha nabadda iyagoo qaadaya tallaabooyin ku saleysan qiyaamka anshaxa iyo ilaaliyaha sharafta dhamaan shacabkooda.

Goobtii la doonaba tababarka shaqsigu haku qaatee, ha ahaato goobaha tababarka ama fasalada dhexdooda, ujeedadu waa in fikradaha isbeddelka lagu kobciyo laguna dardargeliyo; halkaas oo loogu talagalay qorshooyin mas'uul ka ah bulshada oo ay taageerayaan barayaasha awooda inay sare uqaadaan kaqeybgal firfircoon ee bulshada. Barayaashu waa inay ku wacyigeliyaan kuwa waxbarta in ay ka qaybqaataan qorshayaasha horumarinta iyo mashaariicda kuwaasoo sare loogu qaadyo garaadka ardayda si ay uga qaybqaataan dadaalada nabadeynta ee ka socota dalka iyo deegaankooda.

Barayaashu waxay kaalin muhiim ah ka ciyaaraan abuurista goobo ku haboon kasoo sare uqaadaya kaqeybgalka si uu unoqdo mid macno buuxa leh iyo lasocodka barayaasha iyagoo raadinaya waxqabadyada isbeddelka iyo wadajirka ah. Sababtaas awgeed, waa inay ku qalabaysan yihiin aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah inay ku dabaqaan habka waxbarasho ee is-beddelka leh. Tani waxay si firfircoon u hawlgelisaa ardayda iyadoo la adeegsanayo habab ka qaybqaadasho waxayna abuuridoontaa jawi waxbarasho oo nabadgelyo leh wadahalad iyo wada noolaansho islamarkaana barayaasha inay bartaan inay iskaashi yeeshaan oo ay uga gudbaan waxbarashada shaqsigu una gudbaan ficil wadajir ah.

Jaantuska13: Xirfadaha ay horumariyaan markay bartayaashu abuuraan mashruucyo ama waxqabadyo



7.2 Qaab-dhismeedka Go'aan qaadashada

Qaab-dhismeedka geediga go'aan qaadashada waa tilmaame hage kaasoo loogu talo galay sidii barayaasha ay garab u siin lahaayeen ardaydooda si ay u diyaariyaan mashaariico iyo waxqabadyo.

Sawirka 14: Qaab dhismeedka Go'aan qaadashada



Dhameystirid: Dhamaystiridu waxay qeexaysaa adeegsiga habab isku dhafan si wax looga qabto arrimaha muhiimka ee la xidhiidha baahiyaha ka jira deegaanka.

Lahaansho: In la xaqiijiyo in mashaariicda ay hogaaminayaan bareyaashu iyo ardayduba qaataan masuuliyadeeda.

Ka Qayb-qaadashada & Iskaashiga: Tan waxaa loola jeedaa dhiirrigelinta hawlgalada iyo hanaanka waxbarasho ee ka qaybgalka. Iskaashiga waxaa loola jeedaa isku xirnaansho iyo iskaashi dhexmara ardayda, dugsiga iyo bulshada.

Awood siin: Kobcinta Awooda waa kartida ay barteyaashu ku horumariyaan xirfado kala duwan iyo hogaaminta.

Xigasho: Waxaa sameeyey ACCU-UNESCO Barnaamijka daahfurka waxbarashada ee Horumarka waara

Lahaanshaha ardayda iyo kaqeybgalintoodu waa qaybaha muhiimka ah ee lagu xaqiijinayo in dadaalada iyo mashaariicda ay ka turjumayaan barashada waxayna ka caawinayaan barayaasha inay fahmaan saameynta barnaamijyadooda waxbarashada nabada ay leeyihiin.

Sidoo kale Lahaanshaha iyo horumarinta mashaariicda iyo dadaallada waxaa loogu talagalay tilmaamayaasha baraha ee isbeddelka ardayda, Falcelinta ku saabsan arrimaha iyaga taabanaya, bulshadooda iyo caqabadaha inaga hortaagan nabad ku wada noolaanshaha..

7.3 Heerarka kaqayb-galka

Heerarka ka qayb-galku waxay muhiim u tahay bareyaasha inay fahmaan heerarka kaladuwan ee ka qeybgalka si ay u noqdaan kuwo qalabeysan taageerida kaqeybgalka waxtarka leh ee ardayda dhinaca qaabeynta iyo hirgalinta howlaha iyo mashaariicda. Jaranjarada kaqeybgalka Roger Hart waa aalad faa'iido leh oo wax ku ool ah oo lagu hago barayaasha.

Shaxda 16: Waa maxay kaqeyb-gal waxtar leh?

Aqoonyahanka lagu magaco Roger Hart (1997), ayaa buugiisa lamagac baxay ***“The Theory and Practice of Involving Young Citizens in Community Development and Environmental Care”*** ayaa wuxuu si faahfaahsan ugu sharaxay fikradaha iyo nuxurka ka-qaybgalka waxtarka leh ee carruurta. Wuxuu naqshadeeyay qalab aad u faa'iido badan oo loogu magac daray "Jaranjarada Kaqeybgalka Carruurta," ama "Jaranjarada Kaqeybgalka Dhallinyarada,". Sallaanku wuxuu noqday aalad aasaasi ah oo lagu fahmo kaqeybgalka dhalinyarada iyo qaabeynta barnaamijyada iyo dadaalada lagu kobcinayo kaqeybgalka waxtarka leh ee carruurta iyo dhalinyarada adduunka oo idil.

Jaranjarada ayaa tilmaamaysa heerar kala duwan ee ka qeybqaadashada ah ayadoo laga bilaabay wax is daba marinta, qurxinta iyo calaamadeynta - taas oo loo arko ka-qeybgal la'aan, asal ahaana bixineysa kaliya muuqaalka kaqeybgalka- heerarka kaladuwan ee ku lug lahaanshaha waxtarka leh. Tani waxay u dhaxeysaa in la wargeliyo oo loo xilsaaro kaalin gaar ah, in lala tashado, iyo in la helo meel lagu wadaago go'aan gaarista dadka waaweyn.

Heerarka ugu sareeya ee kaqeybgalka waxaa lagu gaadha hawl-galada ay dhalinyartu qaabeysay ee ay hogaaminayso, halkaas oo dadka waaweyn ama ay kujiraan ayago kaalin takulayn ugu jira ama go'aan qaadashada ay wadaagaan dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Xaaladdan ugu dambeysa, dadaallada ayaa sidoo kale ka faa'iideysanaya fursadaha waxbarashada jiilka kala duwan.

Jaantuska 15: Jaranjarada Kaqeybgalka Dhalinyarada

Jaranjarada Roger Hart ee kaqeybgalka dhalinyarada



waxaa laga soo qaatay't.R. (1992). *Children's participation from Tokenism to citizenship*
Florence: Xarunta cilmi baarista ee UNICEF innocent

Xigasho: Hart, 1992

Talaabada 8: Waxqabadyada ay bilaabeen dhalinyarada iyo go'aan wadaagga dadka waaweyn

Tani waxay dhacdaa marka mashaariicda ama barnaamijyada ay bilaabaan dadka dhallin-yarada ah isla markaana go'aan-qaadashada ay wadaagaan dhallinyarada iyo dadka waaweyn. Mashaariicdani waxay awood siinayaan dhalinyarada iyaga oo isla markaana awood u siinaya inay helaan oo ay wax ka bartaan waayaha nololaha iyo khibrada dadka waaweyn. Jaranjaradan waxaa lagu soo koobi karaa iskaashiga dhalinyarada & dadka waaweyn.

Talaabada 7: Dhalinyarada ayaa wax bilaabay oo jiheynaya

Talaabadani waa marka ay dhalinyaradu bilaabaan oo ay hagaagan mashruuc ama barnaamij. Dadka waaweyni waxay ku lug leeyihiin oo keliya kaalin taageero. Jaranjaradan waxaa astaan u noqon kara firfircoonida ay hogaaminayaan dhalinyarada.

Talaabada 6: Go'aaminta dadka waaweyn, go'aanada lala wadaago dhalinyarada

Waxay dhacdaa marka mashaariicda ama barnaamijyada ay bilaabaan dadka waaweyn laakiin go'aanka ayaa lala wadaagayaa dhalinyarada. jaranjaradan waxaa lagu soo koobi karaa ***cilmi baaris ku saabsan kaqeybgalka.***

Talaabada 5: Lalatashaday oo lala socodsiiyay

Waxay dhacdaa markay dhalinyaradu talo ka bixiyaan mashaariicda ama barnaamijyada la qaabeeyey iyagoo ay maamulaan dadka waaweyn. Dadka dhalinyarada ah waxaa lagu wargelinayaa sida loo isticmaali doono talooyinkooda iyo natiijooyinka go'aamada ay gaaraan dadka waaweyn. Jaranjaradan waxaa lagu soo koobi karaa ***golayaasha latalinta dhalinyarada***.

Talaabada 4: Loo xilsaaray laakiin lagu wargaliyay

Halkani waa meesha dhalinyarada loo xilsaarayo kaalin gaar ah laguna wargelinayo sida iyo sababta looga qaybgelinayo. jaranjaradani waxaa lagu soo koobi karaa ***golayaasha dhalinyarada & bulshada***.

Talaabada 3: Cadaalad iska yeelis

Markay dhalinyartu u muuqdaan in cod la siinayo, laakiin dhab ahaantii wax yar oo ikhtiyaar ah uma laha waxa ay qabanayaan ama sida ay uga qayb galayaan.

Talaabada 2: Qurxinta

Waxay dhacdaa markii dhalinyarada loo adeegsado inay ku caawiyaan ama "ku xoojiyaan" sabab (Arrin) qaab aan toos ahayn, inkasta oo dadka waaweyn aysan iska dhigin in sababta ay ka dambeeyaan dhalinyaro.

Talaabada 1: Kudul Maamulid

Waxay dhacdaa halka dadka waaweyn ay u adeegsadaan dhalinyarada inay ku taageeraan sababaha oo ay iska dhigaan in sababaha ay ka dambeeyaan dhalinyarada.

7.4 Tallaabooyinka muhiimka ah ee Ku hagaya bareyaasha sidii ay u taageeri lahaayeen mashaariicda ay hoggaaminayaan barteyaashu

Halkan waxaa ku xusan tallaabooyin wax ku ool ah oo loogu talagalay barayaasha si ay si wada jir ah ugala shaqeeyaan ardayda fikradda, qaabeynta iyo fulinta howlaha iyo mashaariicda ay hoggaaminayaan dhalinyaradu.



TALLAABADA 1: Aqoonsiga Mashruuca

Udiyaari ka qaygalayaasha goob adigoo siinaya fursad ay ku ogaadaan dhibaatooyinka gaarka ah ee bulshadooda oo ay jeclaan lahaayeen inay wax ka qabtaan oo ay talaabo ka qaadaan islamarkaana xaalad ay rabaan inay wax ka beddelaan. Hag ardayda oo u saamee goob ku haboon oo ay uga fikiraan dhibaataada ama xaaladaa (shaqsi ahaan iyo koox ahaanba).

TALLAABADA 2: Qorshe usamaynta mashruuca

Adigoo adeegsanaya qorshaha waa in aad ku hag ardayda geedi socodka qorshaynta oo dhan. U ogolow waqti ku filan ardayda inay bilaabaan ka fikirka iyo qaabeynta fikirkooda mashruuca si faahfaahsan, kala saaraan yoolalka ay rabaan inay gaaraan, tallaabooyinka gaarka ah ee ay fulinayaan iyo baaxadda mashruucoda. Ma u baahan yihiin inay ka qaybgeliyaan bahwadaagta kale ee ka baxsan dugsigu? Waxaad siisaa ardayda gashi si uga gudbaan fasalka iyo dugsigu oo ay ula macaamilaan dadka kale ee ku lugta leh.

TALLAABADA 3: Aqoonsashada doorka hogaamineed ee kooxda fulinaysa mashruuca

Mashruuc kasta iyo hawl kasta waxay u baahan tahay qaab-dhismeed gaar ah oo cad iyo doorarka looga baahan in ay ka qaataan ardaydu. Ayaa ka tirsan kooxda fulinta? Kumaa isku duba ridaya xilalka kaladuwan oo Indho indhaynaya in dhammaan howlaha la fuliyey? Qof kasta kaalin gaar u ah ma leeyahay? Bare ahaan, kaalintaadu waa inaad xaqiijiso in kaqeybgalka uu furan yahay. dhamaan ardayda waxbarataa waxay fursad u helaan inay door ka ciyaaraan waxna ku darsadaan.

TALLAABADA 4: U soo bandhigida tilmaamo hage, taageero iyo dib u eegista heerka mashruuca

Ardaydu waxaa loo baahan yahay in aad siisoo taageero joogto ah si ay fahmaan geedi socodka mashruuca. Baruhu waa in aad ula wadaagto go'aan qaadashada si aad ugula taliso markay ku sii socdaan mashaariicdooda iyo waxqabadyadooda. Sidoo kale, hubi inaad qorsheyso shirar joogto ah oo looga hadlayo horumarka.

7.5 Ka Qeyb Qaadashada Dhalinyarada Ee Arrimaha Dhismaha Nabada

Ficil ku muujinta dimuqraadiyadda: Gudiyada ardayda ee dugsiyada

Ma jirto hab ka fiican oo lagu baran karo dhisida bulshooyin loo wada dhan yahay iyo kuwa nabadeysan ee Itoobiya marka loo eego khibrada dimuqraadiyadeed ee ka jirta jawi kala duwan.

Gudiyada ardayda, oo loo yaqaan naadiyada baarlamaanka ardayda ee iskuulada badankood ee Itoobiya, waxay u ogolaanayaan dhalinyarada in awood la siiyo, inay noqdaan u doodayaashooda ugu fiican ayna la taliyaan maamulka iskuulka iyagoo siinaya gashi talo ah ee go'aanada iyaga khuseeya. Waxay u fidiyaan dhalinyarada barxad ay ku wadaagaan fikradaha isla markaana ay codadka kala geddisan ku gaaraan go'aamada. Gudiyada ardayda ayaa sidoo kale bixiya goobo nabdoon oo loogu talagalay horumarka shaqsiyadeed, ilaalinta ardayda, hogaaminta dhalinyarada iyo isku xirka go'aan qaadayaasha bulshada si ay ugu doodaan isbadal ka dhaca gudaha iyo banaanka iskuulka.

Naadiyada baarlamaanka ardayda ee Itoobiya sidoo kale waxay u ogolaadaan dhalinyarada inay galaan tartanka doorashada. Waxay fursad siiyaan dhalinyarada si ay u soo saaraan sheekooyinka wax ku oolka ah ee doorashooyinka, lashaqaynta kooxaha, soo jeediyaan barnaamijyo iyo waxqabadyo isla markaana adeegsadaan hal-abuurkooda iyo xirfadahooda (Engdaw, 2018, p. 172).

Kaqeyb-galka bulshada ee ka baxsan fasalka: Dhisida naadi nabadeed

Naadiyada nabada ayaa ah dadaallada kacaanka ee isu keena dhalinyarada ka soo jeeda dhaqamada iyo diinmaha kala duwan si ay awood ugu yeeshaan isfahamka iyo dhisida dhaqanka nabadda. Waxay metelaan meel aamin ah oo looga wada hadlo arrimo badan, oo ay ku jiraan qowmiyadaha iyo arrimaha qabaa'ilka iyo dhaq-dhaqaaqa bulshada. Naadiyada nabada, bulshada oo dhan waxaa lagu casuumay inay isugu yimaadaan si ay uga doodaan una helaan jawaabo aan rabshad lahayn oo ku wajahan caqabadaha kala duwan ee soo food saaray qoysaska iyo bulshada oo dhan. Waxay yihiin goobo lagu abaabulo waxqabadka dhalinyarada si ay uga wada shaqeeyaan nabadda.

Tusaale ahaan Itoobiya gudaheeda, Ardayda jaamacadaha waxay ku midoobeen naadiyada nabada muddo ka badan toban sano. Qiyaastii 600 ardayda jaamacadaha ah ayaa loo xushaa sanad walba si ay uga qaybqaataan wadhadalka joogtada ah inta lagu gudajiro sanadka si looga wada hadlo arrimo kaladuwan oo la xiriira fikradaha qowmiyadaha iyo diinta ee Itoobiya. Ardaydu waxay wadaagaan eexda iyo fikradaha iskhilaafka ah waxayna wax ka bartaan midba midka kale wadhadal. Naadiyada ayaa sidoo kale fuliya howlo kala duwan, sida shirar bille ah iyo doodo iyo dabaaldegyada maalmaha caalamiga ah ee khuseeya, sida Maalinta Nabadda Adduunka, oo sanad walba la xuso 21-ka Sebtember.

Naadiyada nabada ee Itoobiya waa tusaale guul u ah ka qaybgalka dhalinyarada ee ka qayb qaadashada bulshadooda iyo wixii ka baxsan. Naadiyada nabada ayaa ah tusaale la taaban karo oo ah sida loo xoojiyo dhalinyarada loona dhiirigeliyo nabada iyada oo loo marayo habab is dhexgal ah iyo aragti wadaag ah oo wax looga badalayo bulshadooda.

7.6 Abaabulka Xafladaha Dabaaldega iyo Bandhigyada

Dhacdooyinka dabaaldegu waxay leeyihiin awood muuqata oo dhaqaajin kara bulshada. Tusaale ahaan, dhacdooyinka waxaa ka mid noqon kara dardargelinta nabadda ee ay horumuudku u noqonayaan ardaydu iyagoo soo bandhigaya heeso iyo farriimo nabadeed; taasi waa calaamad kasta oo ku baaqeysa in la joojiyo rabshadaha ku saleysan qowmiyadaha, takoorka diinta, musuqmaasuqa iyo arrimaha kale ee muhiimka u ah bulshadaas, gobolkaas ama waddankaas. ardaydu waxay go'aansan karaan mowduucyada aadka u culayska leh ee iyaga khuseeya.

Bandhigyadu waxay sidoo kale u adeegaan sidii lagu soo bandhigi lahaa farriimaha aan rabshadaha lahayn, loo dabaaldego barashada loona abaabulo nabadda. Tusaale ahaan, intii lagu gudajiray Barnaamijka Wadajirka ah ee Tana River County ee Kenya, dadaal wadajir ah oo ay sameeyeen xafiiska UNESCO ee Bariga Afrika, Wasaaradda Waxbarashada Kenya iyo Arigatou International, carruurta ka socota Dugsiga Hoose ee Semikaro ayaa u qabtay bandhiga beeshooda. Waxay adeegsadeen shaxda websaydhka si ay u matalaan una sharxaan bini-aadamnimada iyo isku xirnaanta qowmiyadaha kala duwan ee Kenya. Waxay sidoo kale soo bandhigeen qof bini-aadam ah oo wadnaha ku leh biinanka. Soo-booqdayaasha waxaa laga codsaday inay ka saaraan biinanka iyo inay garwaaqsadaan godadka laga tagay. Fikradda dib u heshiisiinta ayaa markaa la sharaxay, iyo sida, inkasta oo ay adag tahay, ay tahay wax mudan.

7.7 Ganacsi Bulsheed oo ay Hogaaminayso Dhalinyaradu

Ganacsi bulsheed oo ay hogaamiso dhalinyaro ayaa gacan ka geysan kara hagaajinta habnololeedka iyo kobcinta dhaqamada nabada. Hoos waxaa ku yaal laba tusaale oo ah mashaariic ay dhalinyaradu hoggaaminayaan oo ka socda Koonfurta Suudaan iyo Uganda

Sannadkii 2016-kii, mashruuc ay hoggaamineysay dhalinyarada Koonfurta Suudaan, laguna magacaabo 64 Hands SACCO, oo isku xiraya dhismaha nabadda iyo ganacsiga bulshada ayaa ku guuleystay tartankii hal-abuurka dhalinyarada ee nabadda oo ay soo qabanqaabisay UNDP's, gaar ahaa Mashruuca amniga bulshada & xakamaynta kaganacsiga hubka 64 Hands SACCO waa keyd bulsho iyo iskaashatooyin iskaashi oo siiya ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhexe ee Koonfurta Suudaan helitaanka maalgelinta ku saleysan bulshada.

Yugaandha, waxaa ka jira urur aan dawli ahayn oo dhalinyaradu hoggaamiso oo loo yaqaan **'Future Hope Foundation'**. Waxay bilawday barnaamijka Xirfadaha Shaqaalaynta Dhalinyarada si kor loogu qaado danaha iyo xirfadaha dhalinyarada iyada oo loo marayo tababaro, aqoon iyo is-waydaarsi macluumaad, u doodid iyo isku xirnaansho. Laga soo bilaabo 2014, waxay u tababareen in kabadan 220 dhalinyaro iyo haween xirfado leh, sida dhaqashada digaaga iyo beerida cananiska. dhalinyarada, qoysaska iyo bulshada dhammaantood way ka faa'iideystaan.

Su'aalaha Falcelinta

- Maxay yihiin tusaalooyinka qaar ee mashaariicda ay dhalinyarada horseedka ka yihiin ee Itoobiya?
- Maxay yihiin baahiyaha aad ku aragtay bulshadaada dhexdeeda? Dhaqdhaqaaq nooc ee ah ayaa faa'iido u leh? Tusaale ahaan, maxaa la samayn karaa si loo caawiyo loona kordhiyo nabadda iyo xasilloonida dadka hoy la'aanta ah, shaqo la'aanta ah, masaakiinta iyo kuwa buka?

Cutubka 8aad: Qiimeynta Aqoonta iyo xirfadaha la xidhiidha Dhismaha Nabada

8.1 Maxay tahay sababta Qiimeynta loogu baahanyahay?


Qiimayntu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah geeddi-socod kasta oo waxbarasho. Waxay u oggolaaneysaa barayaasha iyo ardaydaba inay iska warbixiyaan, xiriir sameeyaan oo ay fahmaan meesha ay ka taagan yihiin nidaamka waxbarashada, sida ay ku yimaadeen halkaas iyo su'aalaha ay weli qabaan. Qiimayntu waa geedi socod falcelin ah maadaama ay tahay geedi socod daah-fur ah. Bareyaasha, qiimeynta waa in loo arkaa inay tahay hab lagu hormarinayo nidaamka baris-barsho isla markaana wax looga qabanayo hoos u dhaca geedi socodka waxbarashada ee ardayda.

Qiimayntu waxay ubaahantahay inay cabirka saarto heer waxbarasho ee shaqsiga iyo kuwa wadajirka ah. Ujeedadu waa in la fahmo haddii/sida ardaydu uga gudbayaan mas'uuliyadda shakhsi ahaaneed una gudbaan mida wadareed. Qiimayntu waxay u baahan tahay in loo fahmo loona qorsheeyo inay tahay qaybo ka mid ah geedi socodka waxbarashada . Waqti cayiman oo qiimaynta ah waa in had iyo jeer lagu daraa qorshaha casharka ee fasalka ama waxqabadka tababarka.

8.2 Barashada Xeeladaha Dhismaha Nabada

Waxbarashada nabadda, Nimaamka baris-barashadu waxay ku lugleedahay heerar kala duwan iyo laamo aqooneed oo kalagedisan; tan macnaheedu waa in hababka qiimeynta loo qaabeeyaa si loo soo qabto dhinacyada badan ee barashada, oo ay ku jiraan aqoonta, xirfadaha, Aragtiyada iyo qiyamka.

Sawirka 16: dhinacyada barashada nabadda




8.3 waxtarka Qiimeyntu leedahay

Qiimeyntu waxay ka caawin kartaa barayaasha inay:

1. Si nidaamsan ula socdaan nidaamka ardayda iyo horumarkooda (shaqsi ahaan iyo koox wadareed ahaan).
2. Fahmaan oo qiimeeyaan isbeddelada ku dhaca habdhaqanka, cilaqaadka, aragtida iyo kartida ardayda.
3. ogoow waxa hagaajinta loo baahan yahay in la sameeyo si barayaashu ay si fiican ugu waafajiyaan barnaamijkooda baahiyaha xaalada guud ee ardayda Itoobiya.
4. In loo abuuro goobo iyo fursado ardayda wax barata si ay u muujiyaan una fahmaan isbadalooda dabeecadeed, xiriirada, aragtiyada iyo kartida.

Si loo cabiro yoolalkaas, waxaa muhiim u ah barayaasha inay horumariyaan xeelado lagu falanqaynayo ujeedooyin gaar ah, oo la cabbiri karo, la gaari karo, macquul ah oo waqti ku xiran. Tusaale ahaan, ujeeddada waxbarashadu waxay noqon kartaa in bartayaashu ay awoodaan inay kala saaraan fursadaha aan rabshad lahayn oo lagu beddelo xaaladaha caddaalad darrada ama iskuulka ka dhaca. Ujeeddada labaad waxay noqon kartaa inay qaab rabshad lahayn ay xaaladaha caddaalad darrada ula macaamilaan.

Sawirka 17: Habka falaqaynta ujeedooyinka



Si loo cabiro ujeedooyinka, barayaashu waxay u baahan doonaan tilmaamo si ay u qiimeyn karaan haddii ujeedooyinka waxbarashadeed la fuliyay. Tilmaamuhu waa qayb ka mid ah macluumaadka tilmaamaya isbedelka. Tilmaamayaasha waxay noqon karaan labadaba tiro, tusaale ahaan. Diwaangelinta tirada ardayda awooda u leh inay kala saaraan ugu yaraan saddex dariiqo oo aan rabshad lahayn oo lagu xalliyo isku dhacyada, iyo tayo ahaan, tusaale ahaan. Diwaangelinta noocyada talaabooyinka ay barteen ardayda si ay uga jawaabaan rabshad la'aan xaaladaha isku dhaca.

Barayaasha waa in ay la wadaagaan ujeedooyinka waxbarashada iyo tilmaamayaasha ardayda. Sidan oo kale, barayaashu way ka warqabi karaan rajada ardayda iyo, laga yaabee, inay dib u eegaan ama la qaataan ujeedooyinka kolba sidii loogu baahdo.

Sideen u qiimeyn karnaa haddii waxbarashadu ay socoto ?

1. Diyaari ujeedooyin waxbarasho oo cad;
2. Soosaar tilmaamayaal u oggolaan doona barayaasha inay ogaadaan haddii / sida waxbarashadu u socoto;
3. Adeegso habab udub dhexaad bartuhu u yahay iyo ka qaybqaadasho iyo agab fudud;
4. Qiimee oo falanqee natiijooyinka ficilna qaado.

8.4 Goorta la qabanayo qiimaynta

Qiimeynta waa in loo fahmaa oo loona qorsheeyo iyadoo qeyb ka ah nidaamka barashada. Waqtiyo gaar ah oo loo qiimeeyo qiimaynta waa inay had iyo jeer kamid ahaato qorshaha casharka. Tusaale ahaan, dhamaadka casharka / hawlgalka baraha waa inuu ku daraa waqti ku filan ardayda inay:

- ✓ Dib ugu Falcelinta waxbarashadooda
- ✓ Kala saar tallaabo ay qaadi lahaayeen
- ✓ Milicsi ahaan koox ahaan u bixi oo qiimee asaaga
- ✓ Qaado heerkul hubiye sida ay ugu raaxaysteen casharka / hawsha

8.5 Agabyada muhiimka u ah qiimeeynta barashada aqoonta iyo xirfadaha dhismaha nabadda

Si loo qiimeeyo natiijooyinka waxbarashada ee barnaamijyada dhismaha nabad, barayaashu waxay u baahan yihiin agab qiimeyn wax ku ool ah oo ka caawiya iyaga inay fahmaan saameynta hawlahooda. Dhowr hab oo wax ku ool ah ayaa lagu soo bandhigay qaybtan. agabka lagu soo bandhigay bogagga soo socda ayaan ahayn mid dhammaystiran oo dhammaan noocyada kala duwan ee agabka qiimeynta ee looga isticmaali karo waxbarashada nabadda. Qalabka kale ee qiimeynta waxaa ka mid ah:

- U fiirsasho
- Sawirro / sawirro
- Liistada hubinta
- Daraasadaha kiisaska / Sheekada
- Joornaalka
- Xayeysiinta
- Miisaanka Qiimeynta
- Warbixinnada
- Dhacdooyinka hab-dhaqanka/ anshaxa
- Tilmaanta
- Faah-faahin

Jadwalka hoose wuxuu soo koobayaa aaladaha qiimaynta ee lagu soo bandhigay cutubkan.

Jadwalka 1: Soo-koobidda Aaladaha Qiimeynta

Aaladaha Qiimaynta	Ujeeddo	Goorma la isticmaalayaa
Xusuus-qorka barashada	(Loogu talagalay ardayda) Wuxuu cabiraa waayaha shaqsiyadeed ee bartaha (Loogu talagalay barayaasha) inay wax ka qoraan kalfadhiyada oo ay meel ku lifaaqaan isbeddelada ku dhaca bartayaashooda, iyo sidoo kale inay lifaaqaan barashadooda iyo ka falcelintooda u gaarka ah.	Cashar kasta ka dib
Qaadashada heerkulka	Waa in la Fahmo haddii aqoonta la wadagay ay tahay mid la fahmay iyo sida ardayda ugu hawlan yihiin fadhiga.	Inta lagu jiro kal-fadhiga (si loogu oggolaado hirgelinta hagaajinta) iyo/ama kal-fadhiga kadib qaab qiimeyn dhakhso leh
Qalabka is-Falcelinta	Si loogu Cabbiro arrimaha adkeysiga la xiriira ee gudaha iyo dibaddaba ah ee ay heli karaan dhalinyarada	Marka la isticmaalayo Su'aalaha wax lagu Qiimeeyo oo ah mid sir ilaalin ku dheehan tahay taaso wakhti kooban la samayn doono.
Shayga an jeclaa iyo shayga aanan jeclayn	Si loo Qiimeeyo wax barashada oo sido kale loo qiimeeyo casharka	Kalfadhiga kadib si loo qiimeeyo casharka loona ogaado waxa lagu horumarin karo
Wadaag kooxeed	In la wadaago wixii ku saabsan barashada shaqsiyeed iyo in laga talobixiyo kooxda iyo firfircoonida inta lagu jiro howlaha	Fadhiga kadib barayaasha waxaa sidoo kale lagu casuumay inay kaqeybqaataan wadaagista
Shaxda hubinta	Si loo Cabiro barashada shaqsiga	Cashirka kadib
Wadaagida dareenka, aqoonta iyo ficilka	Falcelinta shaqsiyeed ee xagga aqoonta iyo xirfadaha	Casharka kadib
Ururinta sheekooyinka isbeddelka	Loogu talagalay barayaasha inay soo ururiyaan sheekooyinka ardayda si ay u muujiyaan isbeddelladooda	Kadib hirgalinta buuxda ee barnaamijka (6 illaa 12 bilood)

Xusuus-qorka Barashada

Hababka iska waramidu waxaa badanaa loo tixgeliyaa inay yihiin cabbirka ugu habboon ee khibradaha shaqsiyadeed ee qofka cabiri kara. Sidaa darteed, waa aalad qiimo u leh qofka wax barta (shaqsi) iyo barahaba. Waxay sidoo kale muhiim u tahay barayaasha naftooda inay u fiirsadaan maadama ay tahay inay qiimeeyaan horumarka ardayda xagga dhismaha adkeysiga.

Xusuus-qorka waxbarashada ee loogu talagalay ardayda

Inta lagu jiro casharka ugu horeeya, barahu waa inuu siiyaa ardayda xusuus-qor waxbarasho. Waa in loo sharaxaa in kani yahay marka hore xusuus qor gaar ah oo lagu diwaan geliyo khibradaha iyo dareenka bartaha. Waa aalad fudud oo is-qiimayn ah oo ardayda lagu casuumay inay isticmaalaan ka dib casharka fasalka ama hawlgalada tababarka si ay u qabtaan hannaanka waxbarashadooda. Barteyaasha waxaa lagu casuumi doonaa inay si ikhtiyaar ku dheehan tahay ula wadaagaan fikradahooda, tusaale ahaan inta koox wadaagta, laakiin maahan inay la wadaagaan wax aysan rabin.

Si ay ula socdaan hawshan is-Falcelinta, barayaashu waxay ku casuumi karaan ardayda inay tixgeliyaan oo ay milicsadaan dhowr su'aalood iyo weedhood. Su'aalo dhowr ah oo hagitaan ah ayaa hoos lagugula talinayaa:

- Muxuu ahaa mowduuca hawlgalku / casharku?
- Maxay ahaayeen qodobbada ugu waaweyn ee diiradda la saaray?
- Maxaan ka bartay hawshan?
- Maxaa aad ii xiisogeliyey dhanka hawlgalka maanta?
- Miyu jiraa wax iskakey bedelay hawshan ka dib? Fikradahaygu miyay isbadaleen? Hadday haa tahay jawaabtu, sidee?
- Miyu jira wax isbaddelay intii hawshu socotay si ka duwan sidii aan filayay? Miyaan awooday inaan ka gudbo xaalada dhacday? Hadday haa tahay, sideen u sameeyay?
- Maxaan ogaaday oo naftayda ka bartay maanta? Iyo wax ku saabsan dadka kale ee igu xeeran?
- Sideen u isticmaali karaa waxaan bartay maanta?
- Waxaan u malayn jiray / samayn jiray... .. hadana waxaan qabaa / sameeyaa

Xusuus-qorkan waxbarashada waxaa loo isticmaali karaa mowduuc kasta, maaddama ay diiradda saareyso guud ahaan Falcelinta iyada oo ujeedadu tahay horumarinta xirfadaha guud ee Falcelinta barashada.

Xusuus-qorka u fiirsashada ee barayaasha

Xusuus-qorka u kuurgalida barayaasha waxay u oggolaaneysaa fursad lagu milicsado looguna fiirsado khibradaha, caqabadaha iyo guulaha lagala kulmay intii lagu jiray casharada. Xusuus-

qorku wuxuu u noqon doonaa baraha sida qalab loogu qoro isbeddelada iyo isbeddelka ku dhaca ardayda, sida ay ugu tahay fursad lagu ogaanayo barashada iyo is-Falcelinta.

Hubinta Heerkulka

Xaaladaha qaarkood, barayaashu waxay u baahan doonaan is-qiimeyn degdeg ah oo saaxiibtinimo iyo qalab qiimeyn kooxeed si ay u qiimeeyaan barashada. Qaadashada "heerkulka" ee ardayda ayaa ah hab lagu cabiro heerka hadda ee kaqeybgalka iyo xamaasadda ardayda.

Tan waxaa lagu sameeyaa iyadoo laga codsanayo ardayda inay kor u qaadaan gacmahooda, haddii aysan horey u qaadin, inay ka jawaabaan su'aalaha. Inta ardaydu sidan sameeynayaan, barayaashu waa inay isweydiyaan: Si xamaasad leh miyay gacmahooda u taagayaan? Ma waxay jecel yihiin inay hadlaan ama muujiyaan waxa ay xisaynayaan? Miyay ku hawlan yihiin? Mise gacmuhu kala-badh bay kor u qaaden mise korba uma qaadin? Su'aalahan sidoo kale waa lagu qiimayn karaa iyadoo la weyddiinayo ardayda inay gacanta taagaan ama suul kor u taagaan ama suul hoos u dhigaan haddii ay fahmeen illaa iyo hadda ama ay fahmeen erayga / mawduuc gaarka ah ee aad soo bandhigayso.

Tani waxay kaa caawin kartaa inaad fahamto haddii in wax ka badalka casharkaaga ay lagama maarmaan u tahay kordhinta kaqeybgalka. Sidoo kale waa qaab wax ku ool ah oo lagu fahmi karo haddii aqoonta aad la wadaagtay si buuxda loo fahmay oo ay khusayso ardaydaada.

Aaladaha is-qiimaynta shaqsiga

Aaladda iska falcelinta qofka, sida qorista Falcelinta shaqsiyeed ama su'aalo shaqsiyeed, waxay u baahan tahay qarsoodi heer sare ah maadama ardayda la weyddiin doono inay la wadaagaan macluumaadka gaarka ah ee xasaasiga ah.

Marka la bixinayo foomka su'aalaha, waxaa muhiim ah in erey bixinteeda si taxaddar leh loo tixgeliyo si ay ula qabsan karto baahiyaha iyo muujinta ardayda. Waxyaabaha su'aalaha la weyddiinayo waxaa lagu qiimeyn karaa shan-dhibic oo u dhexeysa 1 (Had iyo jeer) illaa 5 (Marnaba) oo leh dhibco hoose oo muujinaya jiritaanka weyn ee is-adkeysiga la xiriirta arrimaha gudaha iyo dibadda ee ay heli karaan qaan-gaarka.

Fadlan eeg jadwalka 2aad ee tusaalaha su'aalaha ardayda. Kaliya seddex karti ayaa la bixiyaa tusaale ahaan, laakiin fadlan ogow in dhammaan awoodaha lagu qiimeeyo su'aalaha. Marka, fadlan u isticmaal saddexda la siiyay tusaale ahaan sida loo sameeyo su'aalo ku saabsan kartida kale ee hadhay.

Darajo siinta: 1 = Had iyo jeer, 2 = Badanaa, 3 = Mararka qaarkood, 4 = Marar dhif ah, 5 = Marnaba

Jadwalka 2: Namuunada Aalada is-qiimaynta shaqsiga

Kartida	Su'aalaha	Qiimeynta
Is-baraarujin	waxaan dareemayaa inaan si wax ku ool ah ugu biirin karo bulshadeyda.	1 2 3 4 5
	Waxaan dareemayaa in dadka igu xeeran i jecel yihiin oo i taageersan yihiin.	1 2 3 4 5
Isku kalsoonaan	Waxaan ku kalsoonahay inaan xamili karo wax kasta oo igu soo dhaca.	1 2 3 4 5
Fikirka xasaasiga ah	Waxaan dareemaa amaan iyo kalsooni inaad fikiradahayga cabro inta lagu jiro wada hadalka ama hawlgalada fasalka dhexdiisa.	1 2 3 4 5

Waxaan jeclaaday iyo wax aanan jeclayn

U diyaari ardayd inay u fadhiistaan goobaaban, kuna wareeg oo ku casuum arday kasta inuu ka hadlo hal shay oo ay ka heleen oo ku saabsan casharka, hal shay ay barten, hal shay aysan jeclayn, iyo hal shay oo ay jeclaan lahaayeen in wax laga beddelo inta lagu jiro casharka.

Wada-shaqayn kooxeed

Badanaa way u fududahay ardayda inay la wadaagaan Falcelinta dhaqankooda, fikradahooda iyo isbeddelada ay la kulmeen haddii ay la wadaagi karaan koox facooda ah. Hubso in qof kastaa haysto fursad uu ku hadlo isla markaana kooxdu aanay ku badnayn dhawr cod oo keliya. Sidoo kale, waa muhiim in la hubiyo meel wadaag ah oo ammaan ah. Qaabka wadaagga waa mid aad muhiim u ah, waxayna u baahan tahay inay ku habboon tahay sameynta isku xirnaanta iyo wadaagista khibradaha shaqsiyeed ee isbeddelka iyo is-qiimaynta.

Wadashaqayn kooxeed waxay noqon kartaa labadaba fursad lagu wadaago wax ku saabsan barashadiisa iyo sidoo kale fursad lagu qiimeeyo kooxda iyo dhaqdhaqaaqa la abuuray intii lagu jiray howlaha. Waxa kale oo ku jiri kara wax yaabaha ay ka qaateen ardayda arrimaha laga wada hadlay iyo khibradaha intii lagu jiray barnaamijka.

Ku soo biir wadahadalka! Bare ahaan, waxaa sidoo kale lagugu martiqaadayaa inaad la fariisato kooxda isla markaana aad la wadaagto sheekadaada iyo barashadaada. Tani waxay sidoo kale

gacan ka geysaneysaa sidii loo abuuri lahaa jawi nabdoon ardayda waxna barta oo waxay la jaanqaadeysaa mabaadi'da ku dayashada leh.

Shaxda 17: 'Usha hadalka' ee Masai ku leeyahay Kenya iyo qaybaha Galbeed ee Itoobiya

Kaliya qofka haysta "Usha Hadalka" ayaa loo oggol yahay inuu hadlo. Inta ul aad haysato, keligaa ayaa hadli kara, illaa aad ku qanacsan tahay in lagu fahmay. Kuwa kale looma ogola inay ka hadlaan fikiradooda, doodaan, ogolaadaan ama diidaan. Waxa kaliya ee ay sameyn karaan waa inay isku dayaan inay ku fahmaan ka dibna ay caddeeyaan fahamkaas. Markaad ku qanacdo in lagu fahmay, usha waxaad u gudbinaysaa qofka ku xiga.

Su'aalaha qaarkood oo aad u bandhigi karto kooxda si ay uga wada hadlaan una wadaagaan waa kuwa soo socda:

1. Qeybta barnaamijka /hawlgalka ka midka ah ee aad ka u Qimeyso waa qaybtee? Maxaad xilligan u jeclaatay? Maxay adiga muhiim kugu ahayd oo sido kale gaar kugu ahayd?
2. Ma jirtaa xaalad takoorid ama ixtiraam darro ah oo aad soo aragtay? Ayey saameyn ku yeelatay? Haddii aad ku jiri lahayd xaaladdan, sideed dareemi lahayd? Sideed uga fal celin lahayd?
3. Miyaad ka fikiri kartaa waxa aad sameyn karto qof ahaan ama bulsho ahaan ee aad ku caawin karto si aad u baddesho xaalad ay jirto cadaalad daro, takoorid ama ku tumasho xuquuqda aadanaha? Miyaad nala wadaagi kartaa?
4. Maxay ahayd waxa ugu muhiimsan ee aad baratay? Sabab?

U ogolow goobtan inay noqoto goobta keenta isku xidhnaansho, wax wadaaga, isu damqasho iyo midnimada. U ogolow sheekooyinka in la wadaago, waaya-aragnimada in laga sheekeeyo. Waxaad Xusuusnaataa inay tahay sheeko sheekada tabka micnaha lagu abuurayo oo sido kale, barayaashu ay aqoonsan karaan isbeddelada aragtiyaha, fikradaha iyo hababka fikirka. Intaad sheekeynayso ama aad waayo-aragnimada wadaagayso, waxaad la kulmi kartaa qof kamid ah ardayda oo shucuur ahaan murugaysan.. Kafiiri Shaxda 17 wixii talooyin ah ee ku saabsan sida loo taageero ardayga murugaysan.

Dhamaadka fikir wadaagga kooxda, ku martiqaad ardayda inay ku qoraan xusuus-qorkooda waxbarasho wixii ay wadaageen iyaga oo ku daraya fikradahooda iyo dareenkooda ku saabsan kulanka wadaagga.

Shaxda 18: Sida loo taageero ardayga murugeysan

Qaar badan oo ka mid ah hawlgalada ku jira hagahan waxay la xiriiraan shucuurta iyo waayaha shaqsigu. Xaaladaha qaarkood, Ardayda ayaa dareemi doona murugo wakhtiga ay wadaagayaan Falcelinta, eexashada, fikradaha khaladka ah ee dadka kale ka qabaan iyo arrimaha la xiriira qiyamka iyo asalka bartaha.. Waa kuwan qaar ka mid ah talooyinka waxtarka leh ee loogu talagalay barayaasha si ay u taageeraan ardayda haddii murugo shucuur dhacdo:

- U oggolow ardayga meel iyo waqti si uu ula wadaago dareenkiisa kooxda ama waliba shaqsi ahaan adiga oo ah bare ahaan.
- Diyaar u ahaw inaad si gooni gooni ah u dhageysato ardayda, gaar ahaan haddii ay la kulmaan dhibaato xagga shucuurta ah. U sheeg inay iska caadi tahay dareemidda shucuurta. La hadal bartaha si aad u fahamtid waxa keena dhibaataada iyo sababta ay u dhaawaceyso.
- Xaaladaha qaarkood, bartaha ayaa laga yaabaa inuu u baahdo taageeradaada ka dib hawsha. Waa inaad ku hagto sida u maareyn lahaa xaaladaha gaarka ah ee asaga/ayada saameynaya.
- Haddii bartaha uu muujiyo cidhiidhi xagga shucuurta ah inta lagu gudajiray hawlgalka ama koox wadaaga, noqo mid u damqanaya oo u naxariiso. Weydii waxa dhacaya, u oggolow muujinta dareenkooda, oo weydii ka-qaybgalayaasha kale inay dhagaystaan oo ay isku dayaan inay fahmaan shucuurta qofka.
- Farsamooyinka nasashada ee fudud, sida neefsashada qoto dheer, heesaha, heesaha ama adigoo u ogolaada inay jiifsadaan, ayaa sidoo kale ka caawin kara qof dhibaataysan shucuur inuu dejiyo.
- Hubso inaad markasta ixtiraamto sirta ardayda.

Waxaa laga soo qaatay Arigatou International daabacaaddiisii 2008 Barashada Wada Noolaanshaha: Barnaamijka Dhaqamada iyo Diimaha Kala Duwan ee Barashada Anshaxa, pg. 41

hubinta Shaxda

Jaantuska hubinta ayaa ah aalad kale oo waxtar u leh qiimeynta shaqsigu ka dib casharka. Jaantuska waxaa abuuray su'aalo dhowr ah oo lagu cabbirayo barashada shaqsigu. Su'aalahaan waxaa loo qori karaa sabuuradda si markaa ay uga jawaabaan buugaagta xusuus-qorka ama xusuus-qorka barashada ama waxaa loogu gudbin karaa waraaqo. Su'aalaha ku qoran jaantusku waa inay kiciyaan Falcelinta shaqsiyeed sida ugu badan ee ay ugu casuumaan bartaha inuu helo habab uu ku dhaqmo oo uu masuul uga noqdo. Sidee ardaydu uga qayb qaadan karaan hagaajinta iyo isbeddelka ku xeeran xaaladaha rabshadaha, takoorka iyo caddaalad darrada? Sidee ayey u abaabuli karaan asaagooda si ay tallaabo u qaadaan?

SHAXDAYDA BAARITAANKA

Ma jirtaa xaalad gaar ah oo aan jeclaan lahaa inaan ku hagaajiyo? Fadlan qor	Maxaan u doonayaa inaan ku hagaajiyo xaaladdan?	Ma jiraan wax ii diidaya inaan sameeyo si aan u hagaajiyo xaaladdan gaarka ah? Hadday haa tahay, maxay tahay?	Miyay xaaladdani saamayn ku leedahay aniga ama dadka kaleba qaab taban? Sidee?	Ma raadin karaa caawimaadda kuwa kale si aan u hagaajiyo xaaladdan? Ayaa ku caawin kara?
--	---	---	--	--

Waxaad u habeyn kartaa jaantuskan hubinta sida aad ugu aragto inay ku habboon yihiin ardaydaada iyo waxqabadka. Tusaale ahaan, waxaa loo habeyn karaa waxbarashadda nabadda si loo dhiso nabdoon iyadoo lagu xirayo khilaaf deegaanka ah (fasalka, qoyska, bulshada). Ka dib, weydii ardayda inay falanqeeyaan isku dhaca una gudbaan jihada lagu xallinayo iyada oo loo marayo hab aan rabshad lahayn oo ah qaybta ugu weyn ee waxbarashada nabadda.

Wadaagista aqoonta, dareenka iyo ficilada

Ardaydu waxay ka tarjumayaan aqoontooda ay heleen (madaxa), dareenka (wadnaha), iyo hawlgelinta iyo ficillada (gacmaha) iyadoo adeegsanaya qaab dad. Qaabkan (tilmaanta qofka) waxaa lagu sawiri karaa sabuuradda ama warqad yar oo darbiga ku dheggan halkaas oo dhammaan ardeydu ka arki karaan. Barayaashu waxay ku casuumi karaan ardayda inay ku soo lifaaqaan warqad ama ay ku calaamadeeyaan sabuuradda meesha ay ka dareemaan inay la kulmeen isbeddel xagga aqoonta, dareenka, shucuurta iyo u heellan waxqabadka.

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah mowduucyada aag kasta oo aad ka codsan karto ardayda inay la wadaagaan waxbarashadooda

Madaxa	Wadnaha	Gacmaha
Iska-warhayn	Ku xirnaanta dadka kale	Wada shaqayn kooxeed
Helitaanka xal kale oo aan rabshad lahayn	Maareynta Shucuurtaada	Hawlgalada Bulshada
Fikirka xasaasiga ah	Isku damqasho	Xalinta dhibaata

Ururinta sheekooyinka isbeddelka

Qaab kale oo loo diiwaangaliyo horumarka waxbarashadu waa aruurinta sheekooyinka ardayda oo muujinaya isbeddelladooda. Farsamadan ayaa lagu magacaabaa Isbeddelka Ugu Muhiimsan (MSC); waa farsamo si weyn loo aqoonsan yahay oo lagu fahmayo saameynta mashruuc / barnaamij. Aasaaska MSC wuxuu kujiraa aruurinta sheekooyinka shaqsiyaadka ka faa'iideysanaya barnaamij gaar ah.

Nidaamka dukumiintiyada ayaa ku lug leh aruurinta sheekooyinka ardayda taas oo muujineysa isbedel weyn oo la xiriira ujeedooyinka waxbarasho ee uu dejiyey baraha iyo xulashada nidaamsan iyo taxaddarrada sheekooyinka ugu muhiimsan.

Sawirka 5: Sheekooyinka isbeddelka sida tilmaamayaasha



Xigasho: Davis & Dart, 2000

Su'aalaha Falcelinta

- Sidee tilmaamahan tababarku kuu saameeyay?
- Sidee ayaad ula qabsan kartaa qaar ka mid ah aaladaha qiimaynta si aad ula socoto xaaladaada?

Cutubka 9aad: Hawl-galo

Cutubkan waxaa loogu talagalay in lagu soo bandhigo hawlgalo tusaalooyin ah kuwaasoo ka cawiyaan ardayda inay fahmaan fikradaha aasaasiga ah iyo hanaanka dhismaha nabada ee ay ku soo qaateen cutubyadii hore.

Hawlgaladani waa kuwo aad muhiim u ah islamarkaana saameyn badan leh marka lagu saleeyo xaalada gaarka ah iyo kooxda ardayda ee gaarka ah. Sidaas darteed, waxaa la dhirigenayaa in la dhaqan geliyo hawlgaladan iyo hawlgalo kaleba si aad u daboosho baahiyaha waxbarasho ee kooxdada gaarka ah.

Shaxdan hoose waxaa lagu soo bandhigayaa hawlgalada waxbarasho oo ay la socdaan hanaanka la adeegsanayo iyo cutubka ay kujiraan.

Hawl gal	Hannaanka	Cutubka la xidhiidha	Bogga
Geed lagu muujinayo heerarka khilaafaadka	Nidaam waxbarasho oo ku saleysan wada hadal iyo xalinta dhibaatooyinka.	1	
Maxaan u taaganahay anigu	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan wada hadalka	1, 2	
Hanaanka u adkaysiga bulshada.	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan wada hadal	1, 4	
Matalaada khilaafaadka	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan xalinta dhibaatooyinka	1, 4	
Qarandi iyo maroodi	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	2, 4	
Wararka nabadda	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada iyo xalinta dhibaatooyinka	2, 5	
Jasirado si ba'ba'aya	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	3	
Ku Tallamid	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan wada hadalka	3	
Sahaminta asalkaaga	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	3, 4	

Booska Qofka oo aad isdhigto	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan wada hadalka iyo isqiimeynta naf-ahaaneed	3, 4	
Hiigsiga dadka caanka ah	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan is qiimeynta shaqsi	4	
Koodhka Gaarka ah ee Hubka	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	4	
maaskaro adigo xidhan inaad cagaysid	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	4	
Isku xidhnaanta Biniadanka	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	4	
Wabiga oo laga gudbo	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	4	
Matalaada dhaqamada	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	4	
mashaaricda ka qayb gelinta bulshada	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan iskaaashiga	4, 6, 7	
Wada-hadalada u dhexeya jiilka kala duwan eek u saabsan bulsho aamin ah	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan wada hadalka	7	
Yoolalka horumarka waara ee 2030	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan wada hadalka	7	
Matalaada Doorashada	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	7	
Maalmaha kala duwanaanta dhaqamada	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan waayo aragnimada	7	
Aasaasida Naadi nabadeed	Nidaamka waxbarasho ee ku saleysan iskaaashiga	7	

Ujedo:

- Si loo kala saaro dhibaatooyiinka udub dhexaadka u ah isku dhaca, saameyntooda iyo sababaha aasaasiga ah ee keenay isku dhaca.

Natiijo:

- Ardaydu waa in ay falanqeeyaan isku dhacyada xaqiiqo ah ayagoo adeegsanaya habka is-barbardhiga ee qaybaha geedku ka kooban yahay & heerarka khilaafaadka si ay u fahmaan dhibta udub dhexaadka u ah isku dhaca, saameynta iyo sababaha aasaasiga ah ee keenay isku dhaca.

Agabka loo bahanyahay:

- Sabuurada tamaashiirta, Sabuurada cad ama warqada flip chart -ga ah
- Tamaashiir, Qalinka (Marker)ka ama Qalin
- Geed lagu muujinayo khilaafaadka oo tusaale ah

Hawlgal:

1. Ka wada fikira adiga iyo bartayaashu dhawr isku dhac oo tusaale ah oo bulshada ka dhacay. Sabuurada ama warqada flip chart -ga ku qora jawaabaha oo u kala qaybi jawaabaha dhawr nooc oo kala duwan (Toos, Qaab dhismeed ama dhaqameed; Maclumaadka intaa dheer, fiiri qaybta hore)
2. Ardayda u kala qeybi kooxo shan ilaa lix qof ka kooban kadib koox kasta u xil saar isku dhacyo kala duwan si ay uga wada hadlaan. Waa inaad xaqiijiso in isku dhacaasi uu ahayn mid xaasaasiya oo dareenka ardayda kiciya oo gelin kara mid ka mid ah ardayda xaalad adag ka wada hadalka isku dhaca.
3. Adigoo isticmaalaya tusaale, u soo bandhig waxa geedka khilaafka lagu muujinayo. Geedka khilaafka waa sawirka loo isticmaalayo sidii loo kala saari lahaa arrimaha muhiimka u ah xalinta isku dhacyada. aaladan waxaa si fiican u isticmaalaya kooxda dhexdeed ee loo dirayo layliska shaqsiyeedka. Isku dhacayada badankood, waxaa jiri doona afkaar kala duwan oo ku saabsan Suaalaha sida:-
 - a. Waa maxay dhibta ugu muhiimsan(udub dhexaadka u ah) khilaafka
 - b. Waa maxay saameynta ka dhalaneysa dhibtan inoo muuqata?
 - c. Waa maxay sababaha aasaasiga ah? Maxaa sababay dhibtan?

4. Waydii kooxwalba inay warqad weyn ay ku sawiraan sawir geedka oo wata xididadii, jiriddii iyo laamihisa.


5. Waydii kooxwalba inay ka wada hadlaan isku dhacii loo dhiibay si ay geedka sidan hoose ugu dhameystiraan.

a. Jiridda korkeeda, ku qor waxa ay ku heshiiyeen inuu yahay dhibta ugu weyn ee isku dhaca.

b. Laamaha korkooda, ku qor dhamaan dhinacyada muuqqda ee isku dhaca ee ay isleeyihiin waa saameynta isku dhaca.

c. Xididada korkooda, ku qor dhamaan sababaha aasaasiga ah ee keenay isku

dhaca ee ay kala saareen. Si loo helo sasabaha aasasiga ah, waxaa wanaagsan in loo kuurgalo saameynaha kala duwan ee la ogaaday oo kadib la isweydiyo sababta ay taasi u dhacayso.



6. Markay dhamaan kooxuhu dhameystiraan Geedka lagu muujinayo heerarka khilaafaadka, waxaad siisa dhawr daqiiqo si ay shakhsiiyaadka matalaya kooxwalba usoo bandhigaan geedkoodii lagu muujinayay isku dhaca. Kooxaha kalena ku dhiirigeli inay weydiyaan su'aalo.

7. Soo gabagabee cashirka adigoo dulmaraya muhiimada falanqeynta isku dhacyada ay u leedahay fahanka sababaha aasaasiga ah ee aan muuqan.

Xusuus: Sida loo isticmaalo geedka lagu muujiyo khilaafaadka

1. Gacanta ku sawir geed wata xididadii, jiriddii iyo laamihii (Warqad weyn korkeed, Sabuurada tamaashirta, warqada flip chartga, dhinaca dhismaha ama dhulka korkiisa)
2. Qofwalba waxaad siisaa dhawr kaar oo tilmaame ah ama warqad la mid ah adigoo tilmaamo uraacinaya in kaarwalba korkiisa ay ku qoraan hal erey ama labo. sidookale ku sawiro calaamad ama sawir si uu u muujiyo arrin muhiim ah oo ka mid ah isku dhaca sida ay u arkaan.

3. Kadib qofwalba ku martiqaad in ay ku dhajiyaan kaararka geedka korkiisa.
 - a. Jirrida korkeeda, Haddii ay u arkaan inay tahay dhibta ugu weyn.
 - b. Xididada korkooda, haddii ay u arkaan inay tahay sabab aasaasi ah.
 - c. Laamaha korkooda, haddii ay u arkaan inay tahay saameyn.

4. Kadib markuu qofwalba u ku dhajiyo kaarkiisa geedka korkiisa, qof ayaa loo baahan yahay inuu fududeeyo wada hadalka si ay kooxdu ugu heeshiiso arrimaha ay isla meeldhigeen gaar ahaan dhibta ugu weyn.

5. Anagga oo ka duuleyna heshiiska la gaadhay, dadku waxaa laga yaaba inay rabaan inay go'aan ka qaataan arrimaha ay jecelyihiin marka hore inay wax ka qabtaan marka la xalinayo isku dhaca. geedi socodkan ayaa laga yaaba inuu qaato mudo dheer. ayadoo lagu saleynayo qaabka baruhu u daadhinayo, waxaa laga yaaba in loo baahdo in la sii wado hawshan kulamada ku xiga ee kooxda.

6. Ayagoo Kooxo ah, ardayda waxaa looga baahan yahay in ay soo bandhigaan islamarkaa gidaarka ku dhajiyaan geedkii ay ku muujinayeen isku dhaca.

Ka falcelin

- Waxaad waydiisaa ardayda inay xusuus qorkooda waxbarasho ku sawiraan sawir gacameed ama dhawr calaamadood si uu umatalo waxa ay ka barten casharkooda.

Maxaan rabaa inaan ogaado

Ujeedooyin:

- Si loo sameeyo mabda' uu qofku utaagnaado
- Si looga doodo weedhaha laga yaabo inay keenaan isku dhac si loo muujiyo muhiimada dhageysiga isu-damqashadu ku dheehan tahay

Natiijooyinka laga filayo:

- Ardaydu waxay ogaanayaan waxay aaminsan yihiin iyo fikradahoogu sida ay uga duwan yihiin kuwa kale waxa ay aaminsanyihiin iyo fikradahooga.
- Ardayda oo kobcisay kartidooda dhageysiga , ee ay damqashadu ku dheehantahay iyo xushmeynta fikradaha dadka kale

Agabka loo baahan yahay

- Liis la diyaariyey oo weedho ka kooban, kaas oo loogu talagalay in kor loo akhriyo.

- Ikhtiyaar ku saleysan: angabka ku haboon, sida tamaashiirta, warqda ama xadhiga warqadaha lagu dhajiyo, In ilaa bartamaha warqada hoos loo xariiqo; Labo calaamadood oo waaweyn oo lagu calaamadeeyey' waan ku taagersanahay' iyo 'kuma taagersanin'.

Hawlgal:

1. Goobkasta oo aad joogto (fasal,goob ciyaareed,iwm), waxaad u sharaxdaa ardayda in dhamaadka hal dhinac ee qolka u la micno yahay '**waan ku raacsanahay/taageersanahay**' iyo in dhinaca kale uu la micno yahay '**kuma raacsani/taagersanin**'. haddii aad haysato agabka dheeriga ah, waxaa calaamadaha lagu dhejin karaa labada dhinacba ayadoo xariiq u dhexeeya la sawirayo. Waxaad kuwargalisaa ardayda inay ka jawaabaan weedho taxane ah ayagoo u dhaqaaqaya dhinaca qolka si ay 'u tageeraan' ama 'u taageeri waayaan' ama meel xariiqa agtiis ah ay joogsadaan ayagoo ku saleynaya fikirkooda.
2. Kor u akhri dhawr weedh oo sababi karta kala duwanaansho fikradeed oo u dhaxaysa ardayda. Waa kuwan dhawr tusaale ah:
 - Dhamaan ardaydu waa inay awoodaan siday u aadi lahaayeen dugsiyada dalka.
 - Ardayda waxbaratay kaliya ayaa xaq u yeelan inay galaan waxbarashada dugsiga sare
 - Waa khalad in qof la dilo sababtay doontoba ha noqotee.
 - dadku xaq ayay u leeyihiin inay u dagaalamaan waxa ay aaminsan yihiin
 - Qofwalba waxaa uu xaq u leeyahay inuu nabad ku noolaado.
 - Kahortaga Dikhawga hawadu waa masuuliyada dawlada itoobiya.
 - Qofwalba wuxuu xaq u leeyahay inuu ku dhaqmo diintiisa.
 - Diimuhu waa sababta ugu weyn ee keenta isku dhaca itoobiya dhexdeeda.
3. Ayadoo la akhrinayo boodhasha inay ardaydu istaagaaan dhinac ayagoo ku saleynaya jawaabtooda, weydii dhawr arday inay sharaxaan sababata ay meeshay u istaageen (waan taagersanahay, Ma taagersani, ama meel labadaba u dhaxeysa) u joogsadeen. ardayda meelaha kala duwan jooga, jawaabahooga ka qaad oo isku day inaad xaqiijiso dhamaan in fursada ay kusoo jeediyaan helaan.
4. Markaad qoraalada aad wada akhriso, ardayda u fadhisi koox koox. kawada hadla arrimaha ay la kulmeen qaar kood iyo dareenka ay ku dhalisay.haddii ardayda ay ku adkaato inay ka jawaabaan su'aalaha, waxaad weydiisa sababta ay sidaas u noqotay. qodobka muhiimka ah ee kasoo baxaya wada hadalka ayaa ah in xaaladaha aduunku had iyo jeer ahayn mid si fudud go'aan ku gaadho waxay ay tahay inaad aaminto iyo goorta ay tahay inaad dhinac taagerto. weydii ardayda waxay dareemeen intay kuwa kale ay taagnaayeen xariiqa dhinaciisa kale. Sidey u arkayeen kuwa kale iyo waxyaabaha ay aaminsanaayeen?

5. Soo gabagabee layliska adigoo xoogga saaraya sida waxyaabaha dadku aaminsanyihiin iyo fikradahoogu u kala duwan yihiin iyo sida mararka qaar ay taas u keento isku dhac. Kala hadal ardayda muhiimada ay leedahay dhageysiga ku saleysan naxariista iyo xushmeynta kuwa aan aaminsaneyn waxad aaminsantahay ama aan qabin fikirkaaga mid la mid ah.

Ka Falcelin:

- Ka dalbo bartaayaasha inay ku qoraan xusuus qorkooda waxbarasho fikradahooga ku aadan hawlgalada.

Wacyigalinta Bulshada ee u dhabar adeyga dhibta

Ujeedooyin:

- Si loo qiimeyno bulshada aan ka midka nahay meelaha ay ka nugushahay iyo meelaha ay adkaysiga u leedahay anagoo adeegsanayna iskuxidhka bulshada.
- Si loo sameeyo jihooyiin ay bulsho ku noqon karto mid u dhabar adaygta rabshadaha ayadoo loo marayo nidaamka iskuxidhka.

Natiijooyin:

- Ardayda oo yeelandoonta xirfado lagu ogaado khataraha iyo fursadaha bulshadooda ka dhigaya mid nabad ah.
- Ardaydu waxay ogaandoonaan sida arrimaha bulshada, horumarka, dhaqanka iyo siyaasada ay ula xidhidhaan inay rabshado dhacaan.
- Ardaydu waxay aqoonsandoonaan meelaha god dalooloyinku kajiraan iyo tallaabooyinka suurta galka ah ee ay qaadi karaan si ay uga digaan bulshadooda isku dhacyada.

Agabka loo baahan yahay:

- Warqada flip chartiga ah ama warqada wax lagu sawiro
- Qalimaanta wax lagu calaamadeeyo oo dhawr midab oo kala duwan ah.

Hawl gal:

1. Sii kooxwalba warqad weyn iyo Qalimaanta calaamadaha oo dhawr midab oo kala duwan leh kadib markaad u qaybiso kooxo midkiiba ka kooban yahay afar ilaa lix qof.
2. Ka dalbo bartayaasha inay sawiraan khariirada bulshadooda oo deg deg ah ayagoo wakhti badan galineyn sharaxada oo ah micnaheedu tahay, hordhaca kaliya oo ah marxalada muhiimka ah ee bulshadu kujirto.

3. Hadda weydii ardayda inay firriyaan khatarta ama unuglaanta ay bulshadoodu la kulmi karto Marka dhanka rabshadaha laga fiiriyo. Waxay isticmali karaan midab gaar ah si ay khariiradooda korkeeda ugu calaamadeeyaan, ayago adeegsanaya dhawr erey ama calaamdood oo muhiim ah. Tusaale ahaan, Suuqa ama Meesha basku istaago ayaa laga yaaba inay noqoto meel u nugul rabshadaha maadama dad badan oo dibada ka yimid ayaa laga yaaba inay goobahan joogaan badanaa goobahani waa goobo buuq badan oo isku dhexyaacsan.
4. Intaa kadib, ka codso ardayda inay khariiradooda ku calaamadeeyaan midab kale meelaha ay ka xooggan tahay, khayraadka iyo fursadaha bulshadoodu ay haysato si ay uga hortagaan rabshadaha. Tusaale ahaan, xarunta booliska waxaa laga yaabaa inay tahay meesha bulshadu ka xooggan tahay marka loo eego ilaalinta amniga, sharciga iyo kala danbeynta. xusuusnow;- in meelaha qaar ama khayraadka qaar laga yaabo inay noqdaan Meeshay ka xooggan tahay ama ka nugushahay bulsho labadaba ayadoo lagu saleynayo xaalada.
5. Waxaad hubisaa in bartayaashu si firfircoon midba midka kale ula hadlayo. Mararka qaarna, adigoo weydiinaya su'aalo koox gaar ah ama dhammaan kooxaha oo dhan, sii wadaan hadal dheeriya.
6. ugu yeedh hal qof kooxwalba si u unoqdo qofka martigelinya ee sharaxaya waxay ka wada hadleen. Waxaad yeeshaa in kuwa kale ay koox ahaan ugu wareegan muqaalada kooxaha kale si ay u ogaadaan waxay ka wada hadleen ayagoo dhageysanaya qofka martigelinaya kooxda. Si wad kooxaha dhawrkii daqiiqaba si aad ugu ogalaatid ardayda inay maqlaan aragtiyada kala duwan ee kooxaha kale.
7. Guud ahaan kooxda oo dhan, ku casuum in bartayaashu ay la wadaagaan kuwa kale fikradahooga ku aadan hawlgalka iyo inay kobciyaan fikirka ah bulshada in laga dhigo mid aad ugu dhabar adag dhibatooyinka ayagoo garanaya meelaha ay ka nugul yihiin oo laakiin ku kabaya meelaha ay ku xooggan yihiin.

kafalcelin

- Ka codso ardayda inay ka fikirkaan meelaha ay ka xooggan yihiin shaqsiyan taasoo wax ka geysan karta bulshadooda.

Matalaada khilaafaadka

Ujedo:

- In loo isticmaalo xirfadaha nabadeynta iyo fikirka xasaasig ah ee hal abuurka ah xaaladaha nolosha ee dhabta ah

Natiijo:

- ardayda waxay sahaaminayaan xalka wanaagsan ee xaaladaha isku dhaca

Agabka loo baahan yahay:

- Wax loo baahan yahay ma jiro.

Hawl gal:

1. Kooxo yar yar u kala qaybi ardayda oo kooxwalba u xilsaar xaalad gaar ah oo la xidhiidha isku dhaca bulshadooda dhexdeeda, gobolkooda ama Dalkooda dhexdiisa ka dhacay. Isku dhacyadan waxay noqon karaan kuwo ka dhexeeya bulshooyin ama mid bulshada dhexdeeda ah, mid dalka dhexdiisa ama mid caalami ah.

Tusaale Isku dhac Labo walaalo ah oo wiil iyo gabadh kala ah ayaa isku dagaalaya qofka qaadanaya liin macaanta ugu danbaysa ee hadhay. Labaduba waxay leeyihiin waa inaan helaa liinta. Inadeerkood oo ay jeclaayeen ayaa soo booqanaya, wiilku marka waxa u rabaa inu u shiido oo sharaab uga dhigo wiilka inadeerkood ah.

Dhanka ay gabadha walaashina ay ka qorsheynayasay inay u dubto keeg liin ka sameysan inadeerkood/inabtigood.

Dhinacyada is haya: Labo walaalo ah (wiil iyo gabadh)

Dooda dhinaca wiilka: wuxuu rabaa liin macaan

Dooda dhinaca gabadha: Waxay rabtaa liin macaan

Rabiitaanka wiilka: wuxuu rabaa inuu liinta ka samaysto sharaab uu ku macsuumo inadeerkiis

Rabiitaanka gabadha: waxay rabtaa inay keeg kasamayso liinta si ay ugu macsuunto inadeerkeed.

2. Ka codso kooxaha inay la yimaadaan matalaad saddex ilaa afar daqiiqo noqonaysa oo inatusaysa xaaladu siday tahay ayado dhawr jilaa la isticmaalayo iyo sida isku dhaca loo xaliyey.
3. Kooxwalba inay soo bandhigto doodooda.
4. Matalaada walba kadib, kala wada hadal ardayda kolba waxa dhacay sida ay ahaayeen dhinacyada is hayey? maxay kala ahayeen meesha ay kala taagnayeen iyo baahiyahoodu,? maxay dareemeen, Maxay jilaayaashu u sameeyeen waxa ay sameeyeen iyo sidee bay xaaladu si kale ugu dhici lahayd.?
5. Haddii wakhti aad haysataan, waxaad kooxaha ka dhigi kartaa inay dib u matalaan laakiin markaan kooxaha kale ayaad ka codsanaysa inay soo farageliyaan ama waxaad badaleysaa jilaaga si ay u muujiso/umuujiso sida xaaladu ay si ka duwan ugu dhici karto.
6. Kadib dhammaan matalada marka la sameeyo ee laga wada hadlo, ku casuum ardayda inay qoraan dhawr qodob oo ay ka barten hawlgalka.
7. Ka codso dhawr arday inay la wadaagaan qodobada ay ka barten hawlgalka kuwa kale iyo sido kale kooxaha oo dhan ka dhig inay ka wada hadlaan waxa ay ka barten hawlgalka.

Kafalcelin

- Ku casuum ardayda inay isticmaalaan xusuus qorka waxbarasha si ay uga fikiraan wixii ay sameyn lahayeen xaalad isku dhaca hadday ku jiraan.

Qarandi iyo Maroodi

Ujedo:

- Si loo horumariyo xirfadaha dhageysiga firfircoon ee shaqsigu ayado la raacayo tilmaamo afka ah.

Natiijo

- Ardaydu waxay ka falcelindoonaan fahamka muhiimada dhageysiga.


Agabka loo baahan yahay

- Warqad/Buugga xusuus qorka
- Qalin ama Qalin qori
- Sabuurad madow ama flipjarti

Hawlgal

1. Bilow hawgalkan adigoo qofwalba weydiinaya inay lasoo baxaan warqad. waxaad u sheegtaa inaad u akhrinaysi sifaha/tilmaanta xayawaan xaqiiqo ah oo ay tahay inay sawiraan.
2. Si aad wakhti ay wax ku sawiraan u siisid, yara joogso intaa aad akhrinaysid tilmaanta xayawaanka (kasoo qaad sida adigo sawiraya, ka fikirka wakhti intee leeg ayaad u baahan lahayd kolba inta laynwalba la akhrinayo). haddii aad deg degto ,tan ma shaqaynayso: waa kan sifaha/tilmaanta xayawaanka
 - Xayawaan badankiisa waxaa laga helaa afrika.
 - Waxay leedahay san dheer oo tuubo oo kale ah.(sii cadee- sanku qaabsikisu waa sida tuubo oo kale)
 - Indho yaryar ayay leedahay
 - Dhago waaweyn
 - sayn dheer
 - Lugo dhuuban leh marka lala barbardhigo cabirka jidhkiisa

- Midabka maqaarkisu waa buni iyo dambasi isku jira.
 - Cidiyo waa weyn oo u adeegsan karo sida qalabka wax lagu qodo.
3. Ardayda badankood waxay sawirayaan maroodi. Waxay maqli doonana tilmaanta ugu danbeysa oo aad bay u khalkahaldi doonaan. Qaarkood, Cidiyo waaweyn ayay u yeelayaan maroodiga oo ay ku sawirayaan, halka kuwa kale ay iska masaxayaansawirkooda oo ay dib u bilaabayaan. Si aad u tixraacdo, Waa kan sawirka xayawaanka waa Qarandi (nooc ka mid ah xayawaanka dabada dheer ee cuna qudhaanta)



Xigasho: The Noun Project, Parkjisum

4. Ka dalbo ardayda inay kor u qaadaan sawiradooda si ay kuwa kale u arkaan waxay sawireen.
5. Kadib ayaad weydiin kartaa ardayda: Maxay idinla tahay sababata aan hawlgalkan u sameynay? Maxaan ka baran karnaa? Miyay idiin fududeyd inaad sawirtaan wixii aan akhrinayey? Sababta aad qaabkaa ugu sawirteen maxay ahayd?
6. U sharax ardayda, haddii jawaabahooda ayna ku jirin in hawlgalkan uu ku saabsanaa dhageysiga iyo codka gudaha qofka kasoo maaxay. (hoos ka fiiri tilmaanta ama sharaxada labadaba)
- a. Dhageysiga: waa fursad aad ku milicsan lahayd maqalka xogta macluumaad asaasi ah kadibna aad u gudubto gabagabaynta. Hawlgalkani wuxuu gaar ahaan wax badan ka tari in ardayda u sahalo inay ka fikirkaan qaabka ay wax u dhageystaan. Badanaa, waxaan dhageysanaa qaybta hore ee hadalka dadka kadibna intaa hadhay anaga yaa ku buuxsana. Xaqiiqdi waa muhiim in aad wada dhageysato waxwalba ay dadku leyihiin.
 - b. Codka gudahaaga: waxaad sidoo kale usoo bandhigi kartaa fikirka ah “Codka gudaha” adigo ugu sharaxaya, marka aan wax dhageysanayno waxaa jira cod kasoo maaxaya dhanka madaxeena oo fikir ka dhibanaya waxa u shaqsigu kale leeyahay kuna daraya macluumaad dheeri ah. Codkaan waxa weeye codka u

sheegay inuu sawirku “Maroodi” yahay kahor inatayna cadaymo dhamaystiran u helin.

7. Waxaad ardayda weydiisa’ sidee ayaan si wanaagsan wax ugu dhageysan karnaa? Kadibna ku qor jawaabahooga samuurada korkeeda ama warqada flipjartiga korkeeda. Haddii ay ayago la imaan waayaan jawaabta laf ahaantoodu, weydii ayaga waxay noqon karaan calaamadaha muuqda ee u muujinaya in qof si fiican ayaga u dhageysanayo?
8. Gunaanadka, weydii ardayda in labo labo ay isku raacaan oo ay ku celceliyaan dhageysiga firfircoon. Ka dalbo mid ka mid ah kooxda laba labada ah inay ka sheekeeyaan xaalad ay aad u faraxsanaayeen kuwa kalena ay si firfircoon u dhageysanayeen. Dhawr daqiiqadood kadib kala badal kaalintooda. Haddi wakhtigu idiin ku filan yahay, waxaad weydiin kartaa siday ahayd ku celcelinta (ku dhaqanka) dhageysiga firfircoon iyo waxaad ka wada hadli kartaan.

Ka falcelin

- Ka dalbo in bartayaashu ay ku qoraan fikiradaha xusuus qorka waxbarashada. Sido kale, weydii ayaga inay soo saran qof noloshooda ka mid ah oo ay jecel yihiin inay si fiican u dhageystaan kana dalbo inay ku dhaqmaan dhageysiga firfircoon marka danbe ee ay la kulmaan qofkaasi.

Wararka nabadda

Ujedooyin:

- In loo adeegsado xirfadaha xalinta dhibatooyinka iyo maareynta khilaafadka xaaladaha dhabta ah ee nolosha.
- In xal loo helo xaaladaha goobaha ay ka jiraan xushmo la’aan iyo Isfahan daro.

Natiijo

- Ardaydu inay falanqeeyaan xalka wanaagsan ee xaaladaha xushmo la’aantu ka jirto oo u adeegsadey habraacan isku dhacyada noloshooda ka dhaca.

Agabka loo baahan yahay:

- Kaararka wararka ku saabsan nabadda (Hoose ka fiiri)

Hawlgal

1. Ka codso in bartayaashu u kala baxaan 4 ilaa 5 kooxood. Kooxwalba sii kaararka wararka nabadda. U sheeg inay tahay in xal ay la yimidaan oo ay warbixinta kasoo daayaan TVga sida Warka Madaxdiisa.

2. Kooxwalba waxay haysataa sodon daqiiqo oo xal ay ku hesho kuna diyaariso warkeeda. Waxaad weydiisa inay matalaan xaalada ama ay wareystaan dadka ku lugta leh oo ay warbixinta xalka soo gudbiyaan.
3. Warkasta kadib, waxaad yeelataan wada hadal. Su'aalaha qaarkood waxay noqon karaan:
 - Xaaladan taagan, miyey jiraan waxyaabo kale oo aan isdhihi karno xal ayay u noqon karaan?
 - Ka waran haddii xaalada ay kasii dari lahayd masiibo dabiici ah awgeed?
 - Xalkan lasoo bandhigay miyuunan ku xadgudbayn xuquuqda kuwa kale?
 - Haddii xaaladan aad ku jiri lahayd maxaad sameyn lahayd?
 - Sidee bay dadku dib ugu heshiin karaan? Dib u heshiisintu muhiim miyay u tahay in aduunkan nabad lagu naaloodo?
4. U fududee ardayda inay ka shaqeysiiyaan maskaxdooda iyo inay si madax banaan uga fikiraan xalka adigoo dhirigelinaya fikradaha hal abuurka ah iyo kuwa iska hor imaanaya. Waxaad ku dhirigelisaa inay ka fikiraan xalka nabada ee dadka kale aan waxyeelaynaynin. Weydii ardayda inay ka fiiriyaan dhacdooyinka dhinaca aragtida xuquuqda, xushmada iyo si ay masuuliyad ku dheehan tahay. Xuquuqda shaqsi ayaa lagu xadgudbayaa? Xuquuqdi shaqsi ayaa la dhawrayaa? Dadku miyay is xushmaynayaan? Xalku miyuu ka koobvan yahay dadka oo qaata khaladaadkooda iyo khaladka kuwa kale? Miyay ilaalinayaan xuquuqda dadka kale?

Falcelin

- Ka codso ardayda inay xusuus qorka waxabarashada ay ku qoraan fikirkooda ku aadan waxay nabaddu la micno tahay.

Kaararka Warka nabadda

Hoos waxaa ku xusan dhawr tusaale oo kaararka warka nabadda ah. Fadlan si madax banaani u fiirso si aad u sameysato kaarar kuu gaar ah oo xaaladaada ku saleysan.

Kaarka warka nabadda 1

Waxaa mardhaw loo qaaday dugsii bulsho kale ku dhexyaal afartan dhalinyaro ah oo ka yimid deegaan rabshado bulshooyinka u dhexeeya ka socdaan. Dugsiga iyo bulshada cusub waxay u arkeen imaanshaha dhalinyartan cusub inay qas ku tahay dhaqdhaqaaqooga iyo waxqabadkooda.

Kaarka warka nabadda ee 2

Shan boqolkiiba dadweynaha ku nool magaaladiina waa qoxooti. Dhawr todobaad ka hor, waxaa dhacday rabshad u dhaxeysa qoxootiga iyo dadka deegaanka ah. Saddex caruur ah oo qoxootiga kasoo jeeda ayaa la qabtay ayagoo xadaya boorsad taala tukaan dhexdiisa. Dadka deeganka ayaa kacay ayagoo leh maahan markii ugu horeysay ee sidan ay dhacdo oo sidoo kale leh ma rabno in qoxootigu deegaankooda ku noolaado hadda wixii ka danbeeya.

Dadka deegaanka ayaa dawlada ka dalbaday inay meel kale u raraan qoxootiga. Waxay ku doodeen in heerka amnidarada iyo dambigu uu magaladooda ku kordhay intii qoxootigu soo dageen kadib. Qoxootigu waxay ka cabanayaan in la takooro sidoo kalena ku adadg tahay inay helaan shaqo iyo inay dhexgalaan bulshada. Hoolka shirarka magaalada hortiisa ayay maalinwalba ku banaanbaxayeen usbuuci hore. Dawlada ayaa xal u heshay, waxaana lagu soo qaatay warka madaxdiisa.

Kaarka warka nabadda ee 3

Wasaarada waxbarashada ayaa mardhawayd soo bandhigtay siyaasad looga dhigayo doorashada hogaamiyeyaasha dugsiyada mid dimuqraadiyada waafaqsan ayadoo doorasho la qabanayo. Hase yeeshe, bareyaasha dugsii ku yaala degaan magaalo yar ah ayaa qaba doorashadu inay keeni doonto hogaamiyeyaal dugsii oo ku hawlan sidii ardayada u qancin lahaayeen oo kaliya iyo kuwa aan dugsiga si fiican u matali Karin. Waxay aaminsanyihiin in bareyaashu ay ku yeeshaan door weyn dhanka doorashada hogaamiyeyaasha ardayda.

Koox ka mid ah ardayda oo ka war heshay siyaasadan cusub ayaa isku dubariday banaanbax ay ku dalbanayaan in dugsigu qabto doorasho. Maamulka dugsiga ayaa u digay ardaydan oo u sheegay inay suurogal tahay in laga cayriyo (eryo) dugsiga.

Kadib marki warkan laga soo daayey TV deegaanka, wakiil ka socda wasaarada waxbarashada ayaa booqday dugsigii si uu ula kulmo maamulka dugsiga, ardayda iyo waalidkooda halkaas oo xal loogu helay. Hadda tvgi deegaanka ayaa soo daynaya xalkii la gaadhay.

Jasiiradaha sii dabar go'aya

Ujedo

- Si loogu dabaqo caqabadaha anshaxa ciyaarta badbaadada ee xaaladaha dhabta ah ee isku dhaca.

Natiijo

- Ardayda waxay ka dhiibanayaan fikirhooda caqabadaha anshaxa ee khilaafka.

Agabka loo baahan yahay

- Dhawr bog oo jaraa'id ah.
- Muusik iyo sameecad (ama in la yar shido oo ay dadka oodhan ay maqlaan)

Hawl gal

1. Ku baahi bogaga jaraa'id ee sagxada korkeeda ayadoo la yar kala fogeynayo. ku bilow bogaga fara badan oo jaraa'id ah. bogg walba waxa uu u tagan yahay jasiirad. u daar muusik oo ka codso ardayda inay ku wareegaan jasiiradaha ayagoo aan ku joogsanayn. waxaad ku amartaa inay ku dul joogsadaan jasiirad markasta oo la joojiyo muusika. Wakhti wakhti jooji muusika.
2. Marwalaba aad dib u shidaan muusika, kasaar hal jasiirad sidaas awgeed tirada jasiiradaha ayaa isku dhimi aayar iyo midwalba waxay noqon mid buuq badan. gabagabada, waxaa la waayi goob ay dhamaan bartayaashu ay istaagaan. kuwa aan jasiirad dul istaagi karin waxay ka baxayaan ciyaarta. dheela ciyaarta ilaa hal jasiirad oo kaliya ay soo hadho oo dhamaan ardayda ay ka baxaan ciyaarta
3. Marka ciyaartu dhamaato, kala hadal ardayda waxa dhacay. Waa kuwan;- dhawr su'aalo oo aad weydiin karto.
 - Maxaa dhacay markay soo hadheen dhawr jasiiradood?
 - Dadku sidee ayay uga jawaab celiyeen?
 - Maxaad dareentay markaad jasiirada dulistaagi kariwayday ee ciyaarta aad ka baxday
 - Sidee ayaad u ilaashatay goobtaada?
 - Miyaad caawisay kuwa kale?
 - Tan miyay la mid tahay waxa nolosha dhabta ka dhaca?
4. Ciyaarta la xidhiidhi xaaladaha dhabta ah oo ka wada hadla ardayda wax ku saabsan caqabadaha anshaxa ee badbaadada, wadaagida kheyraadka, wax loo dhan yahay, ilaalinta intaa nugul, iwm.
5. Waxaad u sheegtaa ardayda in khilaafku yahay wax iska caadi ah laakiin u isku bedelikaro mid rabshad wata haddii dadku ay ku guuldareystaan inay wax wadaagaan, iskaashadaan iyo midoobaan. Kawada hadlaa waxayaabaha inaga caawin kara inaan noqono dad anshaxa ku dheehan yahay isdhexgalkoodu.

Ka falcelin

- Ka dalbo ardayda inay soo bandhigaan waxyaabaha ugu muhiimsan ee hawlgalkan ay ka barten ayagoo adeegsanaya xusuus qorkiisa waxbarashada.

Ujeedooyinka

- In lagu dabakho tilmaamaha go'aan qaadashada anshaxa iyo mabaadi'da anshaxeed ee kala duwanaanta anshaxa
- In xal loo helo mushkiladdaha anshaxa.

Dhibaataada anshaxa waa xaalad inta badan ku lug yeelan doonta iska hor imaad muuqda oo udhaxeeya anshax xumada, taas oo daba galka midna uu umuuqdo mid kale.

Natiijo

- Barteyaashu waxay hindisi doonaan go'aan anshax leh markay soo wajahdo xaalad cakiran.

Agabka loo bahan yahay

- Nuqulada hal ama dhowr dhibaato oo xagga akhlaaqda ah
- Tilmaamaha go'aan qaadashada ee lagu qoray sabuuradda, waraaqda is-beddelaysa ama nuqulada daabacan ee koox kasta

Hawlgal

1. U qaybi ardayda kooxo 3 ilaa 5 qof ka kooban, koox walba waxaad u dirtaa in ay kala saaraan xaalad anshax oo ay adagtahay in sax tahay iyo in ay khalad tahay.
2. Sii 30 daqiiqo oo ay uga wada hadlaan dhibaataada isla markaana u gaaraan heshiis la isku raacsan yahay oo xal loogu helo. Ka dib, ha u ogolaadaan inay la wadaagaan go'aanadooda kooxaha kale.
3. Bar barayaasha Tilmaamaha Go'aan-qaadashada Anshaxa ee hoos ku xusan. Barteyaashu waxay marka hore ka doodaan tilmaamahan kadibna waxay u isticmaalaan inay dib ugu eegaan go'aanadooda

Tilmaamaha lagu qoro cilladaada anshaxeed ee kuu gaarka ah:

- Soo bandhig xaalad ay tahay inay bartayaashu go'aansadaan waxa saxda iyo waxa qaldan.
- Soo jeedi xaalad jahwareer ah halka xalka ugu fiican uu u muuqdo mid waxtar u leh ardayda laftooda laakiin taasi saameyn xun ku leh dadka kale.
- Sharaxaad ka bixi xaalad ku lug leh fursado looga gudbayo xeerarka.
- Hubso in mushkiladdu ku lug leedahay xaalad ay tahay in bartayaashu ay iyagu iskood u qataan go'aano.

Tilmaamaha Go'aan Qaadashada Anshaxa:

Markaad la kulanto xaalad ay tahay inaad go'aan gaarto, iskuday inaad isticmaasho su'aalaha soo socda si ay kaaga caawiso inaad doorato wanaagsan:

- ✓ Go'aankani saameyn ma ku yeelanayaa dadka kale? ayuu kuyeelanayaa?
- ✓ Go'aankaagu saameyn ma ku yeelanayaa waxa aad aaminsan tahay?
- ✓ Go'aankaagu ma saameynayaa waxa dadka kale aaminsan yihiin?
- ✓ Go'aankaagu ma ka dhigi doonaa kuwa kale inay ku dhaqmaan wax ka soo horjeeda rabitaankooda ama waxay aaminsan yihiin?
- ✓ Go'aankaagu ma ixtiraamayaa aragtida dadka ka soo jeeda mabda 'ama dhaqammo kala duwan?
- ✓ Go'aankaagu ma u muujin karaa sawir xun dadka kaa duwan (xagga jinsiga, xagga diinta ama xaaladaha kala duwan)?
- ✓ Go'aankaagu miyuu xaqirayaa sharafta aadanaha?
- ✓ Miyaad si furan ula wadaagi kartaa go'aanka qoyskaaga, saaxiibbadaada ama macallimiintaada?
- ✓ Go'aankaagu ma wax ka qabanayaa dhibaata mise si fudud ayuu u qaridayaa?
- ✓ Ma jiraan wax cawaaqib xumo mustaqbalka ah oo go'aankaaga ah?

4. Ka wada hadla in soo bandhigista tilmaamaha ay beddeleen go'aannadii kooxaha iyo in kale. Aqoonta xuquuqul insaanku saameyn ma ku yeelatay go'aanadooda? Ma rabaan inay dib u eegaan tilmaamaha Go'aan-qaadashada Anshaxa ah?

Ka falcelin

- Ku hoggaami daqiiqad falcelinta fasalka xaqiiqda ah in arrin ay soo kicin karto aragtiyo badan oo iska soo horjeeda Ka wada hadla baahida loo qabo in arrimaha laga eego dhinacyo kala duwan iyo in laga fikiro mid walba mudnaantiisa.
- Ku martiqaad ardayda inay aqoonsadaan dhibaata ay noloshooda kala kulmeen oo ay ku

Cilad-xumo akhlaaqeed: ilaalinta beenta

Ayaan waa 15 jir. hooyadeed waxay u balan qaaday inay aadi karto riwaayad qaas ah oo ay abaabuleen koox Itoobiyaan ah haddii ay ka caawiso iskuulka ka dib rootiga qoyskooda. hooyadeed waxay ogolaatay inay siiso 20 birr maalin kasta oo ay caawiso. waxay ku guuleysatay inay keydiso 200 oo bir, taasoo ku filan riwaayaddii, taasoo u dhiganta 150 Bir. Si kastaba ha noqotee, Ayaan hooyadeed waxay bedeshay go'aankeeda waxayna u sheegtay inay lacagta ku bixiso buugaagta dugsiga.

Ayaan way niyad jabtay waxayna go'aansatay inay aado riwaayad waliba. waxay iibsatay tigidh oo way tagtay. si kastaba ha noqotee, waxay been u sheegtay hooyadeed waxay ujeedisay inay maalin taas la joogtay saaxiibadeed. toddobaad ayaa laga soo wareegay iyada oo aan hooyadeed ogaan.

Ayaan waxay u sheegtay walaasheed ka weyn, Hodan, inay u tagtay riwaayadda oo ay uga been sheegtay. Hodan waxay la yaabban tahay inay u sheegto hooyadood.

- Hodan, walaasheeda ka weyn ma u sheegtaa hooyadood in Rahel ka been sheegtay riwaayadda mise waa inay aamustaa? Maxay salka ku haysaa inay go'aankeeda gaarto?
- Yey Hodan ku leedahay daacadnimada ugu xoogan, hooyadeed ama walaasheed? Sababta
- Xaqiiqda ah in Ayaan ay shaqsatay lacagta lafteedu muhiim ma ku tahay xaaladan? Sababta
- Hooyadu waxay u balan qaaday Rahel inay aadi karto riwaayadda haddii ay lacagta kasbato. Xaqiiqada ah in hooyadu ka laabatay balanqaadkeedii tixgelin muhiim ah ma tahay? Sababta
- Guud ahaan, ma in ballan la oofiyaa? Sababta
- Wax isbeddel ah ma samaynaysaa haddii qofka wax loo ballanqaado inuu kuu dhow yahay ama qof qaraabo ah oo aad qaraabo tahay

- qoraan dhowr doodood oo kala duwan buugooda xusuus-qorka wixii noqon kara jawaabta ugu fiican

Ujeeddo:

- Si loo kala saaro dhinacyada kala duwan ee asalka qofka.

Natiijooyinka:

- Ardayda waxay qiimaydoonaan dhinacyada kala duwan ee asalkooda iyo sida ay rabaan inay naftooda ugu muujiyaan adduunka.
- Ardayda u waxay kala garandoonaan isku kalsoonaanta xooggan ee caafimaadka qabta iyo dareenka fiican



Agabka loo baahan yahay:

- Warqad xaashi ah oo loogu talagalay arday kasta ama arday kasta waxay isticmaali karaan buugaag iyaga u gaar ah
- Arday kastaba qalinkiiisa ama qalin qorigiisa.
- Qalimaan midab leh ama midabyo, haddii la heli karo

Hawlgal:

1. Dib u eegis ku sameeya ardayda qiimeynta iyo dhinacyada asalka qofka (eeg Qeybta 3). Weydii ayaga waxa qofka asalkiisu yahay. U adeegso sawirka halkan tixraac ahaan. Ku sawir sawirkan sabuuradda haddii aad ku jirto fasalka kuna dar fikradaha kale ee ay ardaydu bixiyaan.
2. Weydii ardayda inay ka waramaan waxa ay qiimeeyaan iyo sida ay iyagu isu arkaan, iyo sida ay jeclaan lahaayeen inay naftooda ugu soo bandhigaan adduunka. U Sharax in ay qaabayn doonaan sawirkooda asal-ahaaneed.
3. Xusuusi barayaasha in sawiradooda asalka ah ay arki doonaan asxaabtooda fasalka, kuwaas oo laga yaabo inay fikir deg deg ah ka qaataan ayago ka duulaya waxa ay soo bandhigaan.
4. Way fiicnaan lahayd haddii ardayda fursad u heleen inay horey isku bartaan hawlgalo kale oo waayo aragnimo wadaag ah inay si furan oo macno leh uga hadlaan asalkooda. Inta hawshu socoto u oggolow ardayda oo ku dhiirrigeli inay wada hadlaan dhexdooda.
5. Sii ardeyda qalimaan midabyo ah ama qalin midab leh, haddii la heli karo, iyo mid kasta sii xaashi ama ha soo saaraan buugaagtooda shaqsiyeed si ay ugu sawiraan naqshadooda. Ku dhiirrigeli inay hal-abuur u yeeshaan oo ay wax cusub hindisaan sida ay jecel yihiin. usharax in garaafka asalku uu tusaale yahay oo aysan ahayn inay si sax ah u koobiyeeyaan. tusaale ahaan, halkii ay ka qori lahaayeen "asalkayga" dhexda ama magacooda, waxay sawiri karaan sawir iyaga laftooda ah.
6. Isku soo wada duub casharka markii qof waliba dhammeeyo ama ay 10 daqiiqo kaliya ka harsantahay. Weydii ardayda inay ka waramaan waxa ay sawireen iyo waxa ay ka leedahay asalkooda. dhawr ka mid ah ardayda ku wargali inay sawirkooda la wadaagaan fasalka. haddii waqtigu saamaxo, bartayaashu ha ku dhaafaan sawirkooda miiskooda oo ha ku dhex wareegaan fasalka dhexdiisa si ay u daawadaan sawirrada kuwa kale.
7. Gabagabee hawsha adiga oo sharaxaya muhiimada ay leedahay in la qiimeeyo cidda aan nahay iyo kuwa kale, ixtiraamo kala duwanaanta oo la qadariyo kala duwanaanta.

Falcelinta:

- Weydii ardayda inay ku qoraan buugooda xusuus-qorka hal shay oo ay naftooda ka barten, mid ay ka barten qof kale (haddii ay ku wareegaan si ay u daawadaan sawirrada asalka kuwa kale) iyo hal shay oo ay ka barten qiimeynta qofka naftiisa iyo dadka kale iyadoo lagu saleynayo hawlgalkan.

Dhanka qofka kale oo aad wax fiiriso

Ujeeddo:

- Si looga fikiro dadka kale waaya aragnimada iyo dareenka adoo lugeynaya samee

Natiijooyinka:

- Ardayda waxay aqoonsadeen waayaha dadka kale.
- Ardayda waxay fahmeen sida loo kobciyo u damqashada dadka kale.

Qalabka:

Kaarboon ama warqad loogu talagalay arday kasta si uu u jaro qaabka kabaha / cagaha

- Qeybo yar yar oo xarig ah, xarig ama gogo 'maro si loogu xiro kabaha malo-awaalka ah
- Maqas, dhowr
- Qalimaan ama qalin



Hawlgal:

1. Ku martiqaad ardayda inay isbarbar dhigaan barte kale oo aysan iyagu si fiican u aqoon oo jeclaan lahaa inay wax badan ka ogaadaan.
2. Bare kasta wuxuu sawirayaa shaashadda lammaanayaashooda cagaha / kabaha dusha kaartoonka oo wuu jarayaa.
3. Wada-hawlgalayaasha waxaa lagu martiqaadayaa inay helaan meel deggan oo ay wada fariistaan oo ay is wareystaan iyagoo ujeedkoodu yahay inay wax badan ka ogaadaan lamaanahooda Waxaad la wadaagi kartaa dhowr su'aalood sida tusaalooyinka hoos ku xusan si aad uga caawiso inay yeeshaan wareysi macno leh.

Fikradaha su'aalaha:

- Waa kuwee dadka muhiimka ah noloshada?
- Waa maxay wax aad runtii ku faanto?
- Maxaa kaa farxinaya?

- Sideed u rabtaa dadka kale inay kuula dhaqmaan?
 - Waa maxay riyo muhiim ah ama rajo aad leedahay?
4. Xusuusi barayaasha in markay wareysiga qaadayaan ay muhiim tahay in si xushmad leh loo waydiiyo su'aalaha, si firfircoon loo dhagaysto loona ixtiraamo haddii lammaanaha uusan rabin inuu kala hadlo wax shakhsi ah; oo markay wareysanayaan, way ka boodi karaan su'aal kasta oo aysan rabin inay ka hadlaan. waa inaysan dareemin cadaadis inay la wadaagaan macluumaadka aysan rabin inay la wadaagaan.
 5. Dhamaadka wareysiga midba midka kale, weydii in ay sawiraan astaamo ama ay qoraan ereyo si ay u qabsadaan qodobbada ugu muhiimsan wixii lagu wadaagay shaxda cagaha lamaanahooda.
 6. Weydiiso ardayda inay daloollo yar ka sameystaan kartoona oo ay u isticmaalaan xarig / gabal maro si ay ugu xirxiraan shaxda kartoona cagtooda / kabaha.
 7. Weydiiso ardayda in ay hadda ku socdaan kabaha mid kale oo hareeraha bannaan ah, iyaga oo qaadaya tallaabooyin gaabis ah iyaga oo isku dayaya in ay qiyaasaan sida ay noloshu u noqoneyso lammaanahooda iyadoo lagu saleynayo wareysigooda.
 8. Hawsha ka dib, ku martiqaad ardayda inay wadaagaan qaar ka mid ah waxbarashooda u gaarka ah khibrada. Kala hadal ardayda wax ku saabsan is-naxariisashada, waxa naga caawin karaan ama naga hor istaagi kara inaan u naxno dadka kale.

Falcelinta:


Weydiiso ardayda inay u adeegsadaan xusuus-qorka waxbarashooda si ay ugu milicsadaan qof ama koox ay jeclaan lahaayeen inay yeeshaan naxariis dheeraad ah iyo waxa ka caawin kara inay yeeshaan dareen lahaansho

Ujeedo

- Si aad u qiimeyso asalkaaga adiga oo u maraya su'aalo shaqsiyeed.

Natiijooyiin:

- Ardayda oo bartay qaybaha kala duwan ee asalkooda iyo sido kale asalka kuwa kale.
- Ardayda oo bartay sida kuwa kale ee ka duwan ay haddana u noqon karaan kuwo ay isku mid yihiin.



Agabka loo baahan yahay

- warqad ama buug yar
- qalin ama qalin qori
- wareeg /duub dun midab leh oo dheer oo badan

Hawlgal

1. Ka codso bartaha inu sawiro xidig shan dhibic leh si ay u daboosha warqada oodhan ama bogga buuga ardayda oodhan. Waxaad u sawiri karta hal xidig si ay tusaale uga dhigtaan.
2. Ardayda waxaad weydiisa qaybta macluumaadka ee ayaga ku saabsan ee ayaga u muhiimsan iyo inay ka jawaabaan shan su'aalood. Waxaad dooran karta su'aalaha ku haboon kooxdada ama waxaad isticmaali karta shantan soo socda:
 - Waa maxay muusika, heesta ama cuntada ay ugu jecelyihiin ayagu?
 - Goobta ay ugu jecelyihiin waa tee?
 - Waayo aragnimada ay aadka u qiimeynayaan waa tee?
 - maxay aaminsan yihiin ee ugu muhiimsan?
 - waxay jecelyihiin inay sameeyaan?
3. Weydii inay, dhibic walba oo xidigtu ka koban tahay, ku qoraan jawaabaha su'aalaha.
4. Markay dhameeyaan kadib, ka dalbo inay helaan saaxiib ay la fadhistaan oo ay la wadaagaan jawaabahooda.


5. Kadib marka laba labada loo qaybiyo, ka codso ardayda inay kor u qaadan xidigta oo ay hortooda ku hayaan oo ay dhex lugayaan si u tusaan ardayda kale xidigtooda iyo u wadaagaan ugu yaraan labo jawaab oo ka mid ah. Shaqsiwalba waa inu isku dayo inu helo ugu yaraan hal shay ay iskaga mid yihiin, hal shay ay ku kala duwan yihiin, ama shay xiisa geliyey oo ku saabsan bartaha ay la kulmeen.
6. Dhirigeli isku dhexdarsanka oo ka dalbo inay u dhaqaaqaan dhankaa iyo qof cusub oo kale marwalba ay maqlaan sacab ama gambaleel ugu yaraan dhamaadka afar daqiiqo kasta. u ogoloow wakhti u qofwalba u ugu yaraan shan qof kula wadaago.
7. Raadi meel banaan si aad qaab wareeg u sameyso. Weydii ardayda inay ka hadlaan wax ku saabsan mid ka mid ah dadka ay la kulmeen, inay sharaxaan wixii labadooduba ay ka sinaayeen ama waxa ay ku kala duwanaayeen ama wax aad u xiisegeliyey. U dhiib xadhig duuban qofka ugu horeya ee bilaabaya, adigoo ka codsanaya in u qabto bilowga xadhiga oo ugudbiyo qofka u ka hadlayo.
8. Inta qofwalba u wadaagayo, waa in duubka xadhiga loo dhiiba qofka u hadal hayo ayago ku dhagay qaybtiisi taasoo keenaysa in shabag meesha ka sameysmo. had iyo jeer ka dalbo in bartayaashu ay u dhiibaan qof aan horey u haysan xadhiga kana dalbo caawimaad kuwa kale haddii usan lahadal saaxiibadood haddii ay la hadal ayagu.
9. Haddii kooxdu aad u balaadhan tahay, wadaaga iyo sheekeysiga waxaa laga dhigi karaa ayado labo koox oo kala duwan loo qaybinayo si qofwalba aad ugu ogalaatid in wakhtigaas guduhiis u kula wadaago.
10. Marka qof kasta wax wadaago isla markaana webka la dhammaystiro, wada hadal la baro ardayda waxa ay arkaan, waxa webku matali karo iyo waxa aan ka baran karno webka ay indha indheeyaan.
11. Gabagabee casharka oo muujinaya qiimaha kala duwanaanta, isku xirnaanta aadanaha iyo fikradda Ubuntu.

Falcelinta:

- Ku martiqaad ardayda inay u isticmaalaan Buugaagta Xusuus qaarkooda si ay wax uga qoraan wax cusub oo ay ka barten saaxiibkood isku fasal iyo wax ay ka barten qiimeynta kala duwanaanta iyo isku xirnaanshaha.

Ujeedo:

- Si loo aqoonsado himilada qofka, xooggiisa iyo falsafadiisa nolosha.



Natiijo:

- Barteyaashu waxay aqoonsadeen xoogooda iyo qaar ka mid ah himilooyinka noloshooda.

Agabka loo baahan yahay:

- Warqad ama Buug yar
- Qalin ama qalin qori

Jaakedka gaarka ee xabada celiya

Jaakedada (koodhadhka) ee xabada waxaa isticmaali jiray dagaalyahanada qarniyadii dhexe si ay isaga gashaantaans cadowgooda. Waxaa loo isticmaali karaa iney calaamad utahay qiimaha qofka iyo jinsiyadiisa, sida uu qabo Tech4Learning (2019)

Xigasho: Freemium Templates, 2018

Hawlgal:

1. Weydii ardayda inay helaan warqad cad oo ay ku qoraan magacooda warqadda.
2. Ku sawir gaashaan afar qaybood ah iyo qayb hoose warqadda sida ku cad halkan
3. Qeyb kasta oo gaashaanka ah, ku sheeg waxyaabaha soo socda:
 - Guulihii ugu weynaa ee aan gaadhay
 - Hadafyadeyda / hamigeyga (ugu yaraan labo)
 - Waxaan ahay kan ugu fiican markaan (xooggayga)...
 - Qofka (dadka) ugu muhiimsan noloshayda
4. Calanka ka hooseeya gaashaanka, weydii ardayda inay ku sheegaan hal ku dhiggooda ama falsafadooda nolosha, yacni waxa hagaya noloshooda?
5. U qaybi ardayda kooxo ka kooban afar ama shan xubnood oo weydii ardayda inay wadaagaan qaybaha kala duwan ee gaashaankooda ah.
6. Ku celi koox-kooxeedyo cusub si aad ugu oggolaatid ardayda inay wax kula wadaagaan aagag kala duwan asxaabta ugu badan ee suurtoogalka ah.

7. Kala hadal ardayda wixii ay ka barten hawsha, caqabadaha qaarkood ee laga yaabo inay kala kulmeen go'aan ka gaadhida astaamaha iyo qaybaha gaashaanka iyo sida ugu dambayn loogu doortay waxa la dhigayo.

Falcelinta:

- Ku martiqaad barteyaasha inay ku qoraan Buugooda Xusuus-qorista wixii ku saabsan guulaha ay gaadheen, yoolalka / himilooyinka, xoogooda iyo hal ku-dhigga / falsafadda nolosha. Weydii inay wax ka qoraan sida kuwan isu beddeli karaan waqti ka dib.

Xidhashada gaashaanka

Ujeeddo:

- Si looga fikiro sida sumadaha iyo fikradaha khaldan ay u saameyn karaan habka aan u aragno kuwa kale, mararka qaarkood qaabab xun.

Natijooyinka:

- ardayda waxay fahmeen noocyada kala duwan ee aqoonsiga bulshada iyo sida loogu arko bulshada dhexdeeda.
- ardayda waxay aad ugu baraarugeen cabbirada kala duwan ee aqoonsigooda.

Agabka loo baahan yahay:

- Kartoonada
- Maqas
- Xarig

Hawlgal:

1. Weydii ardayda inay sameeyaan maaskaro oo ay ka gooyaan kartoon si ay wejigooda ugu daboolaan oo ay u hagaajiyaan gabal xadhig ah oo ku xidha madaxooda.
2. Sii diyaarso sumado kala duwan oo aqoonsi ah oo ka turjumaya doorarka bulshada ee kala duwan ee ku jira bulshada, tusaale ahaan hooyo, aabo, sarkaal booliis ah, hoggaamiye diimeed, naag, nin, siyaasi, adeegto, iwm. Xaqiji inaad ku darto kuwa la liido ee bulshada ka mid ka ah iyo / ama waxaa loo arkaa inay yihiin kuwo muran badan, si loo hubiyo in khibrad waxbarasho oo adag ay dhacdo.

3. Weydii ardayda inay xirtaan maaskaradooda ka dibna ku dhejiso mid ka mid ah calaamadaha wejiga hore ee maaskaro si bartaha xiran maaskaro uusan u aqoon calaamadda uu wato..
4. Ku martiqaad ardayda inay ku soo wareegaan, la kulmaan ardayda kale si ay u arkaan cidda ay la kulmayaan. Markay la kulmaan qof leh sumad, waxay uga falcelin karaan sida ay iyagu / bulshadu caadiyan ula dhaqmi lahaayeen qof noocaas ah, in u gacan qaado siyaasiga, iska dhaafi qof naafo ah, iwm.
5. Ardayda waa inay sidoo kale isku dayaan inay gartaan astaanta aqoonsiga ee ay wataan iyagoo ku saleynaya falcelinta ay helaan. U oggolow waqti ku filan ardayda inay isku darsamaan oo ay la kulmaan inta kale ee suurtoogalka ah.
6. Isku darka ka dib, samee goobo oo ka wada hadla khibrada iyo waxa ay ka baran karaan.
